

# SUUGAANTA GEELA

Qore

Axmed Cali Abokor

# SUUGAANTA GEELA

Qore

Axmed Cali Abokor

SCANDINAVIAN INSTITUTE OF AFRICAN STUDIES, UPPSALA 1986

Cover drawing after embroidery by Fatuma Sheikh Omar

Masawirka jildiga waxa laga soo qaatay taswiir-xardhid ay samaysay
Faduuma Sheek Cumar

ISBN 91-7106-259-9

Waxa lagu daabacay dalka Sweden:
Motala Grafiska, Motala 1986

Printed in Sweden by
Motala Grafiska, Motala 1986

# HORDHACA DAABACAYAASHA

Xoolahu waxay ahaayeen qarniyo badan lafdhabarta dhaqaalaha Soomaaliyeed. Gaar ahaan geelu waa xoolaha xooladhaqatadu si weyn u qaddariyaan. Xoolhaasna waxaa loo jecel yahay si aan meesiyada kale oo dhan loo jeclayn. Sidaas waxa ina tusaalaynaya ereyadan uu yidhi gabayaagga Soomaaliyeed ee caanka ah Sayid Moxamed Abdulle Xasan:

> Hasha-geelu wa hooyadii
> ninka lahoo hantiya
> halka awrku yahay halbawlahii
> nolosho heehaabto ... *

Soomaalidu si wacan ayay ugu tilmaantay Suugaanta odhahda manaafacaadka iyo waxtarka geelu leeyahay, suugaantaas oo jiilba jiilka kale u soo gudbinayay, ilmahu ka dhaxlaayay aabbihiis. Suugaantan waxay ka kooban tahay dhaqan suugaaneed oo tiro badan isuguna jira maanso, heeso, murti, maahmaahyo, quluud, sheekooyin iyo xikmado badan.

Shaqadan waa qayb ka mid ah mawduucyada la dersayo ee "Mashruuca Cilmi Baarista Geela Soomaaliyeed" oo ay wadajir ahaan u fulinayaan Soomaaliya iyo Sweden (Akadeemiyadda Cilmi Baarista Soomaaliyeed, SOMAC, iyo Wakaaladda Iswiidishka ee Isbahaysiga Dalalka soo koraya dhinaca Cilmi Baarista, SAREC). Mashruucan wuxu koobayaa qaybo iyo dhinacyada kala duwan ee dhaqashada geela markii laga eego dhinacyada cilmiga bulsho, aadamaha iyo kan dabiicaddaba.

Axmed Cali Abokor oo ah aqoonyahan Soomaaliyeed ee la yaqaan xubinna ka ah Akadeemiyaadda Cilmi Baarista Soomaaliyeed, Wuxuu bilaabay ururinta suugaanta geela Soomaaliyeed 1982. Falanqaynta qoraalkan wuxu muujinayaa in suugaanta geelu la xiriirto dhinacyo kala duwan oo ay ka mid yihiin: caanaha geela iyo hilibka oo cunto ahaan ah, iyo adkaysiga geelu u leeyahay duruufaha adag ee ka imanaya xaaladda cimilooyinka Soomaaliyeed, iyo dhinacyada la xiriira xurmada, magaca lahaanshaha geela iyo maamulka dhaqashadiisa.

Waxaa sharaf weyn u ah Machadka Iskaandineefiyaanka ee Cilmi Baarista Afrika inuu ku daabacay ururintan suugaanta Soomaaliyeed ee geela afka Soomaaliga. Daabacaadda qoraalkan wuxu ka mid yahay kuwa ugu horreeya oo af Soomaali lagu daabacay dalka Soomaaliyeed dibaddiisa, qoritaanka afkaas oo filkiisu ka soo bilawday 1972. Qoraalkan ku qoran af Soomaaliga waxaa ku soo dabajira tarjumaddiisii af ingiriis ah ee uu samaynayo Axmed Cartan Xaange lana filayo dhaqso dhammaadkiisa.

Uppsala, Diseembar 1986

Moxamed Cali Xuseen iyo Anders Hjort
Xiriiriyayaasha Mashruuca Cilmi Baarista Geela Soomaaliyeed

---

* Fikraddi gabayaagga weeye ee ma aha ereyadiidii

# PUBLISHER'S PREFACE

For centuries livestock have formed the backbone of the Somali economy. Camels are especially highly valued by Somali herdsmen and are loved more than any other animal. This comes forth in the following few lines by the famous Somali poet Sayid Maxamed Abdille Xassan:

"A she-camel is a mother
To him who owns it
Whereas a he-camel is the artery
Onto which hangs life itself..."

The practical uses of the camel have been eloquently described by Somalis in their extensive oral poetry, handed down through generations from father to son. It forms a complete literary tradition composed of poems, proverbs, metaphors and tales of wisdom.

Oral literature has been one of the subjects studied by the "Somali camel research project", a bilateral undertaking between Somalia and Sweden (the Somali Academy of Sciences and Arts, SOMAC, and the Swedish Agency for Research Cooperation with Developing Countries, SAREC). This project covers many aspects of camel pastoralism, ranging from the humanities to the social and natural sciences.

Axmed Cali Abokar, a distinguished Somali scholar, and a member of the Somali Academy of Sciences and Arts, started to collect oral camel poetry in 1982. The analysis of this vast material has shown that camel poetry relates to various aspects, such as camel milk and meat for food, the camel's extraordinary ability to endure hot climatic conditions, honour and prestige expressed in camel ownership and management. In short, camel poetry is as interdisciplinary as any scientific subject can be. This was aptly stated by a leading Somali administrator: "Here, everybody is a professor of the camel".

We take great pleasure in presenting this collection of Somali camel poetry in the Somali language, published by the Scandinavian Institute of African Studies. This publication is among the first in Somali, a language which has been written only since 1972, to be published outside Somalia. This Somali version will be followed by a translation into English, prepared by Axmed Arten Xange.

Uppsala, December 1986

Maxamed Cali Huseen and Anders Hjort
Project coordinators, Somali camel
research project

# TUSMADA


1. ARARTA ........ 1

2. I. XOOLA DHAQASHADA ........ 4

3. II. WAXTARKA DHAQAALE ........ 6
   1. Caanaha ........ 6
   2. Hilibka ........ 13
   3. Gaadiidka ........ 16
   4. Adkeysiga ........ 24

4. III. WAXTARKA BULSHO ........ 30
   1. Tolleey ........ 30
   2. Magta ........ 36
   3. Yaradka ........ 38
   4. Magaca & Sharafta ........ 41

5. IV. DHAQASHADA GEELA ........ 44
   1. Geel jacayl ........ 44
   2. Dhaqidda geela ........ 49

6. V. DHIBAATOOYINKA GEEL-DHAQIDDA ........ 57
   1. Dhibaatada jidhka ........ 57
   2. Cabsida ........ 59
   3. Colaadda ........ 64
   4. Dhaca ........ 69

7. VI. SUUGAANTA CUSUB IYO GEELA ........ 73

8. LIFAAQYADA ........ 81
   1. Ereyfurka ........ 81
   2. Maansooleyda ........ 97
   3. Taariikh-nololeedka maansooleyda ........ 98
   4. Qoraallada la tixraacay ........ 102

# Mahadnaq

Waxaa mahadcelin iga mudan dhammaan intii iga kaalmeysay ururinta iyo habeynta qoraalkan Suugaaneed. Waxaan si gaar ah ugu mahad celinayaa duqeydii iyo maansooleydii murtida badnayd iigu deeqay iyo suugaanleydii kale ee iga taageeray xagga hufidda iyo sharxidda murtida maansadu xambaarsantahay.

Waxaan kaloo aad ugu mahadcelinayaa Maxamed Cali Xuseen Madaxa Mashruuca Geela, oo si gaar ah u garwaaqsaday ahmiyadda ay leedahay Suugaanta Geelu, iyo kaalinta wacan ee ay ka qaadan karto Cilmibaarista Geela. Kaalmadii iyo dhiirrigelintii aan ka helay Maxamed Cali Xuseen waxay suuragal ka dhigtay in la ururiyo suugaan badan oo geela ku saabsan, oo laga soo xulay qoraalkan.

Waxaa kaloo mahad weyn iga mudan Caadil Sheekh Cismaan oo garaacay qoraalkan iyo dhammaan Cilmibaarayaasha Qaybta Suugaanta oo iga kaalmeeyay xagga ururinta.

Qoraha!

Axmed Cali Abokor

# Ararta

Ururinta iyo kaydinta suugaanta odhaahda(1) ah ee soomaaliyeed waa arrin muhiim ah oo wax ka-qabasho degdeg ah u baahan. Suugaantaas oo waayihii hore la tiriyey, iyada oo aan qornaynna da'iba u soo gudbinaysey da'da(2) xigta illoobid ama lumidna halis u ahayd, waxay si weyn uga warramaysey dhaqanka iyo taariikhda soomaaliyeed. Shakina kuma jiro in inteedii badneyd ay luntay, oo waxa laga soo gaaray ay aad u yartahay.

Mowduuc kasta oo ku saabsan dadka iyo dalka soomaaliyeed marka wax laga qorayana, raadraacyada(3) lama huraanka ah ee weliba wax laga heli karaa waa suugaanta odhaahda ah. Qoraalkii aan lahayn raadraac suugaaneed waxaad mooddaa inuu kala dhiman yahay ama macluumaadkiisuba aanay sugnayn.

Qoraalkan oo ku saabsan suugaanta geela wuxuu ka soo dhex baxay ururin ballaadhan iyo diraasad weyn oo lagu sameeyay suugaantii hore ee soomaalidu ka tirisay dhaqashada geela. Suugaantaas oo aad u tira badnayd, dhul kala durugsanna laga kala tiriyey waqtiyo aad u kala fogaa, waxa waqtigan laga heli karaa, waa la garanayaa inay yihiin wax tiro ahaan kooban, laakin tayadoodii(4) iska leh. Weyna habboon tahay in aynnu ka faa'iideysanno, oo ogaanno dhibaatada iyo dheefta(5) ku dhex jirta dhaqashada geela.

## UJEEDDADA

Ujeeddada qoraalkani ma aha soo bandhigidda suugaanta geela laga tiriyey oo dhan, ama suugaanta waqtigan la jooga ee geela loo tiriyo. Guud ahaan ujeeddooyinka qoraalkan laga leeyahay waxay isugu soo ururayaan dhawrkan qodob:-

1. Soo bandhigid suugaan muujinaysa kaalinta qiimaha weyn leh ee dhaqashada geelu kaga jirto nolosha xoola-dhaqatada reer-guuraaga ah.
2. Si gaar ah waxay suugaantaasi uga warramaysaa waxtarka iyo waxyeellada la xiriirta dhaqashada geela iyada oo la barbardhigayo dhaqashada xoolaha kale.
3. Suugaantani isbarbardhigi mayso dhaqashada geela iyo meheradaha(6) kale ee ay ka midka yihiin Kalluumeysiga iyo beerfalashada. Waxa la damacsan yahay in isbarbardhigga noocaas ahi noqdo qoraalka labaad ee suugaanta geela.

## SUUGAANTA

Muddadii la waday ururinta iyo dersidda suugaanta geela, wixii macluumaad ah ama maansooyin(7) ah ee la helay oo dhan, laguma soo bandhigin qoraalkan, waxase buugaan ku qoran:-

1) Tusaalooyin suugaaneed oo si gaar ah looga xulay ururin badan oo ku saabsan suugaanta geela.

2) Suugaantaas xulka ahi waxay ka warramaysaa waxtarka dhaqaale ee geela (caanaha, cadka, gaadiidka, adkeysiga) iyo waxtarka bulsho ee geela (guurka, magta, magaca, wada manaafacaadsiga, iwm) iyo weliba dhibaatooyinka tirada badan ee la xiriira dhaqashada geela.

3) Tusaalooyinkaas suugaaneed waxay u sii qeybsamaan heeso (shubaasha(8), salsalka(9), cayaaraha, iwm), gabayo iyo murti kale oo ay ka mid yihiin maahmaahyo, halxiraalayaal, iwm.

4) Suugaantu waxay ka kooban tahay 1200 beyd oo maanso ah oo laga soo xulay qiyaastii 3000 beyd, waxayna u sii kala baxaysaa 632 beyd oo heeso ah, 517 beyd oo gabayo ah iyo 51 beyd oo murti kale ah.

5) Suugaantu uma qorna hab tixeed, waxayse u qoran tahay hab mawduuceed. Taas waxa looga jeedaa, tix(10) walba sidii maansayahanku u tiriyey ee ay isugu xigtay ama dhammideedba, uma qorna, ee waxay u qoran tahay hab isu keenaya intii isku mawduuc ah. Waxa suurowda in hal tix keli ah uu tiriyey maansayahan loo kala qaybiyo saddex ama afar mawduuc oo kala duwan.

## Maansayahannada

Waxa si aad ah la isaga xilsaaray oo lagu dadaalay in la helo dadkii curiyey(11) maansooyinka iyo murtida qoraalkan ku jirta. Baadigoobkaasna(12) waxa lagu ogaaday arrimahan:-

1. Maansooyinkan badidood, siiba heesaha oo dhan, lama yaqaan maansayahannadii curiyey, oo waxay noqdeen suugaan dadweyne oo gobollada oo dhan laga yaqaan. Waxana lagu wadaa in heesahaas la tiriyey waqti aad u fog.

2. Maansooyinka qaarkood, curiyayaashoodii waa lagu murmayey oo aad uma sugneyn(13). Sidii loo batay ayaana la raacay oo la qoray.

3. Gabayada badidood, laba iyo saddex mooyaane curiyeyaashoodii waa la sheegay. Waxana laga helayaa gabay kasta arartiisa iyo lifaaqa labaad ee buuggan.

## Ereyfurka

Maansooyinka qoraalkan waxa ka buuxa oo laga helayaa ereyo badan oo lagu wado in garashadoodu ku adag tahay da'da maanta ee soomaaliyeed iyo reer magaalka aan aqoon fiican u lahayn nolosha xoola dhaqatada reer-guuraaga ah. Ereyadaas oo ka soo jeeda magacyo dad, meelo iyo xayawaan ama ku lug leh qalabka iyo alaabada ay adeegsadaan(14), waxa laga bixiyey ereyfur ama sharxid kooban oo lambar taxan leh, lagana helayo lifaaqa koowaad ee qoraalkan.

## Ururinta

Ururinta ama helidda macluumaadka odhaahda ahi aad bay u dhib badan tahay. Qofka baadhistaas samaynayana waxa looga baahan yahay feejignaan weyn iyo dulqaad badan. Illeyn waa wax aan qorneyn oo madaxa lagu hayaye, qofba si gaar ah ayuu u hayaa ama u maqlay. Waxa badanaa lagu murmaa maansadaas sida loo tiriyey iyo qofka curiyey. Haddaba, si loo ogaado xaqiiqada hal mawduuc ama maanso, waa in aan lagu kaaftoomin(15) hal waraysi oo keli ah, ee mid walba loo sameeyaa dhawr waraysi oo laga kala sameeyay dhawr meelood oo kala durugsan.

Habkaas oo waqti dheer qaadanaya, baadhahana dhibo badan u keenaya ayaa lagu heli karaa ninka iyo xaqiiqada macluumaadka odhaahda ah. Waxana halkaas ka caddaanaysa in tusaale kasta oo suugaaneed oo qoraalkan ku jira aan laga helin qof keli ah ee dad badan laga helay. Dadkaas la waraystay, intoodii ugu xogogaalsanayd(16), magacyadoodii waxa lagu helayaa **lifaaqa saddexaad** ee buuggan.

Helidda macluumaadkan iyo sugitaankoodaba waxa kaloo lala kaashaday qoraallo badan, kuwa daabacan iyo kuwa aan daabacneynba. Qoraalladaas oo iyana la tixraacay waxa lagu taxay **lifaaqa Afraad** ee buuggan.

## AFEEF

Sidii horeba loo soo sheegay, baadhista iyo dersidda suugaanta oddhaahda ahi aad bay u dhib badan tahay. Tirada yar ee halkan ku qoranina kuma dhamma wixii suugaan ahaa ee Soomaali geel ka tirisay ama u tirisey. Runtiina way ka badan tahay waxa dhawr buug lagu qoro, kanse waxa loo arki karaa tusaale bilow ah oo awoodda yar ee la haystay dhalisay.

Waxa badan ee dhimman, shaki wuxuusan ku jirin inay dhammayn doonaan dad badan oo qoraalkani dhiirrigelin ku abuuri doono. Wixiise khaladaad ah ama is-dhaafin ah ee laga helo suugaanta iyo curiyayaashooda ama sharxidda ereyada, waxa xilkeeda iska leh qoraha. Mana aha mid loola kacay ee waa mid aqooni keentay.

# I. Xoola dhaqashada

Dalka iyo dadka soomaaliyeed waxay ka mid yihiin dalalka iyo dadyowga caanka ku ah xoola-dhaqashada. Waxana lagu qiyaasaa in 70% ay ku dhaqan yihiin hab-nololeedkaa. Habka xoola-dhaqashadu, taariikh ahaan lama qeexi(17) karo markii uu ka bilaabmay dalkeenna. Waxase la rumeysan yahay inuusan ahayn hab dhawaan soo-gal ah ee uu dalka ka jiray intii Soomaaliba jirtay. Wuxuuna noqday mid faciba(18) faca ku xiga u dhiibayey, oo aan la helin wax beddela. Maxaa yeelay, sidii dadkii hore u jeclaayeen xoola-dhaqashada si ka sii weyn ayaa hadda soomaalidu u jeceshahay. Xoolaha dalka ku dhaqanna waxa tirakoobkii ugu dambeeyey ee 1975-kii lagu qiyaasay 5.5 milyan oo geel ah, 26 milyan oo adhi ah, iyo 3.7 milyan oo lo'ah. Waxaa isweydiin u baahan, sababta tiradaas badani u jeclaadeen xoola-dhaqashada oo ka jeediyey ka kalluumeysiga xeebaha dhaadheer iyo beer-falashada agagaarka webiyada ee leh ciidda hodonka ah.

Duqeyda waaya-aragga ah iyo indheer-garatada soomaaliyeed waxay isla qirsan yihiin, in xoola-dhaqashadu waagii hore ahayd hab nololeed ka hawl yar oo ka nolol fiican kalluumeysiga iyo beerfalashada, sababtaas ayaana la sheegay inay ugu weyn tahay sababaha keenay inay soomaalidu u badato xoola-dhaqato.

Xoola-dhaqashada in la jeclaado sababaha keenay ee dhiirri-geliyey waxaa ka mid ah cimilada(19) dalka iyo dabiicaddiisa(20). Guud ahaan, waxa loo yaqaan dal intiisa badani kulushahay oo roobkuna ku yar yahay. Laba xilli oo keli ah ayaa caada ahaan ay ka da'aan roobab aan badneyn. Wuxuuna dhulku u qeybsan yahay xeeba dhaadheer oo kulul, buuro ku wareegsan xeebaha badidood iyo dhul sare oo kaymo(21) iyo bananba(22) leh. Baahida biyo aad bay u weyn tahay inkasta oo ay jiraan laba webi (Jubba iyo Shabeelle) oo xilliyada roobabka biyo keena, meela kalana ceelal laga qoto.

Waxa halkan ka muuqanayso, in kuleylka badan iyo biyo yarida ka jirtay xeebaha ay dhaawacday habka kalluumeysiga, roobab yariduna ay waxyeelleysey beerfalashada. Agagaarka webiyada oo dhul biyood ah, keymaha badan ee ka baxay oon loo haysan qalab farsamo oo lagu banneeyaana wuxuu ka mid ahaa arrimihii hor taagnaa beerfalashada ama tacbashada dhulka. Dad tiro yar oo keli ah ayaa isku dirqiyey inay dhulka qotaan oo delag(23) ka beertaan. Kuwaas oo xoola-dhaqashada aan ka dheereyn ee isku waday labada meheradoodba.(24)

Kolkii loo fiirsado kuleylka badan iyo roob yarida joogtada ahayd (marka laga reebo xilliyo gaar ah oo aaran(25) ah mooyee), Soomaalidii hore waxay door bideen xoolaha oo la dhaqdaa in ay ka nacfi iyo nolol roon tahay isku hallaynta beer roob sugeysa. Roobku dalka oo dhan kama wada maqnaan jirin sannadka oo idil. Waxa dhici jirtay, sida imminkaba dhacda in uu meel seejiyo(26) oo meel kale helo.

Illeyn beeri ma guuri kartee, xoolaleydu waxay awood u lahayd inay u guurto hadba meeshii xoolahooda daaq iyo biyoba u leh. Sidaas ayaana xoola-dhaqashadu u noqotey hab uga roonaa beerfalasho iyo kalluumyesiga. Si kasta oo roobabku u yaraadaan ama abaara u dhacaan, dalka oo aad u

ballaadhan iyo xoolaha oo sidan ka yaraa dartood, lagama waayi jirin meelo lagu baxsado oo daaq iyo biyo leh. Waxaana jiri jiray dhul keymo waaweyn leh, iyo dhul daaqsin fiican leh oo ka fog meelaha biyaha leh ee oollimaadka(27) badan, oo xilliyada abaarta oo keli ah la degi jiray.

Xoolaha la dhaqdo oo geel, adhi, lo' iyo gammaan(28) ahaa isku si looma wada jecleyn, lagamana wada sinneyn lahaanshahooda. Waxa loo kala jeclaa sida ay u kala adkeysi badan yihiin iyo sida ay u kala waxtar badan yihiin. Gammaanka oo gaadiidsi(29) oo keli ah loo isticmaalo mooyee, inta kale, caanaha iyo cadka oo ay ka sinnaayeen ayaa xoolaleydu ku nooleyd. Hase yeeshee, waa la sii kala jeclaa oo waa la kala horumarin jiray. Geela ayaana laga hor marin jiray. Sida imminkaba looga hor mariyo. Waxtar uu dheer yahay xoolaha kale ayaa looga doortay.

Intaan magaalooyinku dalka ka dhismin ee aan la baran habkan ganacsiga ee cusub ee lacagta wax lagu kala beddesho, waxa waagii hore soomaalida u caada ahaan jirtay in xoolaha nool ee ay dhaqato ay ganacsi ahaan wax ku kala beddelan jireen. Isaga oo geelu yahay ka ugu qiima badan, wax walbana lagu qiimeeyo. Guud ahaan waxa tuludda ama neefka geela ah lagu qiimeyn jiray ama shan lo' ah ama soddon adhi ah. Fardaha oo keli ah ayaa ka qiima badnaa neefka geela ah.

Mudnaanta geelu ka yeeshay meesiyada(30) kale oo la dhaqdo, kuma iman jeclaansho keli ah oo isaga loo qabo. Shaki kuma jiro in xoolaha oo dhami ka siman yihiin jeclaanta xoola-dhaqatada Soomaaliyeed. Hase yeeshee, waa la sii kala jecel yahay. Geeluna waa meesiga loogu jecel yahay. Nin waayey mooyee, nin kasta ama qoys kasta oo soomaaliyeed oo reer guuraa ahi, hanti uu yeesho ama dhaqdo, wuxuu ugu jecel yahay geel. Taas macnaheedu ma aha in qof kasta ama qoys weliba geel leeyahay. Waxa jira qoysas badan oo gaadiid(31) maahaane, godolkiisu(32) ku yar yahay, ama xerada aani ugu jirin. Waxa suuragal noqon karaysa in qoysaskaasi ama qaarkood, xoolo kale oo badan leeyihiin. Taasna sabab loogama dhigi karo in qoysaskaasi neceb yihiin dhaqashada geela. Waxaase laga yaabaa in dhulka ay ku nool yihiin, yahay mid aan ku fiicneyn dhaqashada geela. Qoysaska tirada badan ee lo'da iyo ariga ama midkood oo keli ah ku nooli, kama diimoona(33) qiimaha geela, ee sababo badan oo jira awgeed, ayuun baanay u dhaqan ama u haysan.

Sababta ugu weyn ee geela xoolaha kale looga hormariyo, waxaa weeye, isaga oo ah meesiga si la yaab leh ugu adkeysan kara dabiicadda adag ee Dalka Soomaaliyeed. Si kale haddii loo dhaho, geelu waa xoolaha keli ah u gegsan(34) kara dhibaatooyinkaas, badidoodna xoolaha kale waa ay ku dhintaan, haddii aanay dhaawac weyn ee kale gaarsiin. Adkeysigaasi waa qiimo geela u gaar ah oo uu kaga duwanyahay dhammaan xoolaha kale, lagagana jecel yahay. Wixii kale ee qiima ah ama manaafacaad ah way la wadaagaan xoolaha kale; ha kaba badsado(35) qaarkood e'.

# II. Waxtarka dhaqaale

Xoolaha, nooc kasta ha ahaadeene, waxa loo dhaqdaa waxtar ay leeyihiin oo dadku ka helo. Haddii aanay xooluhu waxtarkaas lahayn, waxa hubaal ah in aan la dhaqdeen. Sida xoolaha la dhaqdo u kala duwan yihiin; ayaa waxtarkooduna u kala duwan yahay, una kala badan yahay. Waxaa suurowda in laba ama saddex nooc ama meesi oo xoola ahi, ay wada yeeshaan dheefaha qaarkood, sida cadka iyo caanaha. Hase yeeshee, waa ay kala badsan karaan.

Xoolaha reerguuraaga Soomaaliyeed dhaqdo, ee geelu ka mid yahay, waxtarka ay leeyihiin ayaa u yeelay qiimaha ay leeyihiin. Waxay xooluhu yihiin saldhigga nololeed ee reerguuraaga. Iyaga ayaana lagu nool yahay. La'aantood, nolosha bulshada reerguuraaga ahi, halis bay ku jiri lahayd. Waxtarkaas dhaqaale ee guud-ahaan xooluhu leeyihiin, ayaa geelu ugu sii qiima badan yahay.

Waxtarka dhaqaale ee geela, waxa caddeynaya sida bulshada xoolaha dhaqatada ahi u jeceshahay lahaanshaha geela, xoolaha kale oo dhanna uga biddo.(36)

Ninkii ama qoyskii aan geel lahayn, welwel iyo walbahaar(37) kama baxo, xataa haddii uu meesiyada kale hodan ku yahay. Ninkii ama qoyskii geel lihi, daba ka welwel ma qabo, oo waa ka deggen yahay kuwa aan geel lahayn. Qiimaha dhaqaale ama manaafacaadka iyo dheefta laga helo geela, ayaa iska leh deggenaanta iyo welwel la'aanta.

Geelu waxtarka dhaqaale ee lagu qabo, gaadiidsiga ama rarka mooyee, waa la qabaan xoolaha kale. Cadka iyo caanaha iyo haragga waa wada leeyihiin. Gaadiidsiga uu dheer yahay oo keli ah laguma qiimeyn geela, ee xataa manaafacaadka uu la wadaago xoolaha kale, ayaa geelu ka badsadaa ama kaga dambeeyaa.

Wax ka badsigaas iyo adkeysigiisa ayaa geelu xoolaha kale ku dhaafey oo qiimaha iyo qaayaha gaarka ah ay ku siiyeen bulshada xoola dhaqatada ahi. Manaafacaadka dhaqaale ee geela ay ka helaan bulshada reerguuraaga ah ee Soomaaliyeed, si aynu u ogaanno kaalinta ay kaga jiraan nololshooda iyo jiristooda, waxaa lagama maarmaan ah, in aynnu manaafacaadkaas mid mid u qaadno, oo fiirinno wax ku-oolnimadooda(38) iyo qeybta ay ka qaataan noloshooda dhaqan-dhaqaale.

Baaxadda(39) iyo waxtarka manaafacaadka dhaqaale ee geela, waxa laga heli karaa suugaanta xoola-dhaqatadu ay qarniyada badan ku soo gudbinayeen dareenkooda. Suugaantaas oo adayd mid aan qorreyn oo odhaah ah (Oral), fac welibana ka xiga u gudbinayey, ee sidaas ku badbaadday, waa mid isku aragti iyo ujeeddo ah marka la eego kaalinta geelu ku leeyahay noloshooda. Qarni kasta ee la joogo iyo gobol kasta oo la joogo, xoola-dhaqatadu waxay suugaantooda ku caddeeyeen doorka weyn ee geelu ku lahaan jirey, welina ku leeyahay hab-nololeedkooda.

## 1. Caanaha

Geelu isaga oo u kala baxa godol (Dheddig) iyo gaadiid (Lab), dheddigiisu marka uu dhalo ee irmaan yahay, ayaa caanaha laga helaa. Quutal-

qaalibka xoola-dhaqatada Soomaaliyeed, waxa lagu tilmaamaa caanaha. Geeluna waa meesiga ugu caana badan. Caana badnaantaas ayaana ka mid ah, sababaha geela lagu jecel yahay.

Sida geela caana looga helo, ayaa lo'da iyo arigana looga helaa. Hase yeeshee, caanaha geela ayaa xoola-dhaqatadu ka jeceshahay caanaha lo'da iyo adhiga.

Waxa la sheegay in la heli karo sac ka badiya hal madi(40) ah. Haddana waxa laga jecel yahay caanaha geela sababahan dartood:-

a) Waa mide, caanaha geelu waxay oolli karaan iyagoon xumaan muddo dheer oo aanay oolli karin caanaha lo'da iyo adhigu.

b) Waa tan labaade, halka lo'da iyo adhiga laga maalo laba jeer ee kali ah, waxa geela la maali karaa saddex jeer iyo ka badan.

c) Waa tan saddexaad, haddii lo'da iyo adhiga la nuugo saacad ka hor, ma xigsimoodaan(41), halka ama meesha geelu ka xigsimoodo.

d) Haddii lo'da ama adhigu dhashoodu raacdo (Habeen iyo maalinba) looma haweysto in caana laga maalo. Laakin geelu isaga oo dhashiisa wato ayaa la maali karaa.

e) Haddii hal neefkii ay dhashay ee nuugayey uu ka dhinto, waa la sii maalaa, iyada oo ilma kale lagu tolay ama igadh(42) laga dhigay. Sidaasina badanaa kama suurowdo lo'da iyo adhiga.

f) Caanaha geelu waxay noqon karaan sooryo sharaf leh oo marti iyo mudanaba la siin karo. Laakin, caanaha lo'da iyo adhiga, baahi adag oo kallifta mooyaane, looma yaqaan sooryo sharaf leh.

Suugaanta Soomaaliyeed aad bay uga hadashay waxtarka iyo qiimaha caanaha geela. Siyaala badan oo kale duwan ayey u bandhigtay kaalinta muhiimka ah ee caanaha geelu kaga jiraan nolosha reerguuraaga xoola-dhaqatada ah. In yar oo tusaale ahaan loo xushay, waxay muujinayaan qiimaha caanaha geela. Waxaana ka mid ah:-

1) **"Maggaabo(43) geel gelin dhan bay ku waddaa"**

Maahmaahdaasi waxay tilmaamaysaa tayada caanaha geela. Maggaabo oo macnaheedu yahay kabbo caano ah, waxay sheegeysaa maahmaahdu in qofkii helaa uu ku socon karo muddo dheer oo uu ku qiyaasay maalin gelinkeed. Murtida weyn ee meesha ku jirta waxa weeye, in caanaha geela qofka cabbaa ku reebaan adkeysi dheeraad ah oo caanayowga xoolaha kale aanay siinin.

2) **"Caana ku deeqiyo, cag ku raacdaba geel baa leh"**

Maahmaahdan kor ku qorani, waxay iyana tilmaameysaa caanaha geelu in ay si gaar ah u deeqaan dadka. Maahmaahdu waxay caanaha geela ka fad-dilaysaa caanayowga xoolaha kale, kuwaas oo si dadban(44) loo sheegayo in aanay waxba deeqayn. Ereyga "deeqda" ayaa tilmaamaya in caanaha geelu deeq ama sooryo geli karaan, halka kuwa kale aanay geli karin,

dani ku khasabtay mooyaane. Qeybta kale ee maahmaahdu waxay iyana sheegaysaa sida geelu u yahay xoolo meel kasta iyo si kasta qofka u raaci kara oo aan ka daalaynin kana harraadaynin. Waxana la sheegay in geelu yahay xoolaha keli ah ee isaga oo gaajaysan, harraadan ama jirran la maali karo oo caano laga heli karo.

3) Caana aan saxarleyn, (45)
oo si san u dhamo,
Waa na siin jiray.

Heesta kor ku qoran oo ka mid ah heesaha shubaasha, waxay muujinaysaa mudnaanta weyn iyo ammaanta ay leeyihiin caanaha geelu, iyo sida gaarka ah ee aan dhibka lahayn ee loo cabbo.

4) Kaluulistaa(46) i,
Naaso kumaanke(47) eh,
Kabbo kor nuuriyaas,
Kariinkaa kii la uumi.

Heestan kor ku qoran oo lahjadda MAAY(48) ku qorani, waxay sheegaysaa in caanaha geela ee lista ah ama cusubi, xoog iyo qurux muuqda ku soo saaraan qofka cabba. Waxay kaloo geela ku ammaanaysaa in qiimahaasi yahay mid Ilaahay u yeelay oo ku mannaystay geela.

5) Xayle(49) guud weyn,
Xiddiggoo dhacay,
Xil ma kuu yimid,
Oo ma lagu xigay,
Oo ma la xil baxay.

Heestani waxay muujinaysaa waxyaalaha gaarka ah ee geelu kaga duwan yahay xoolaha kale. Geela, Lo'da iyo Adhigu waa wada leeyihiin Caano. Hase yeeshee, geelu waxa uu kaga duwan yahay "**xigta**", taas oo ah lis ama maalid geela u gaar ah oo aan xoolaha kale la wadaagin. Muddo yar oo saacad ilaa laba saacadood ah ayaa tulud(50) geel ahi ku xigsimootaa.

Heestu waxay qeexaysaa, waqti xoolihii (geel, lo' iyo adhi) la maalay waqti goor dambe oo habeennimo ah marti timid oo reerka xil weyn ku ah, in geelu yahay ka keli ah ee lagu xil bixi karo, markaan u loogid hobboqnayn. Maxaa yeelay, muddada yar ee keligii ku xigsimooda ayaa reerkii xiltireysa marka martidii caano cusub looga liso. Caano hore oo dhigaal ah, iyada oo laga maarmi waayo mooyaane, xoola dhaqatadu waa kala xishootaa in martida lagu sooro.

6) Ujeeddooyinka kor ku qoran, waxa kaloo si weyn oo sheegeya heesta hoos ku qoran oo iyana lahjadda "MAAY" ah. Heestaasi waxay geela caanihiisa, gaar ahaan, kuwa xigta ah, barbar dhigeysaa caanaha lo'da iyo ariga aanay kaa xiltiraynin caana ahaan, marti timid waqti dambe oo xoolihii la maalay. Laakin geelu, waa ged(51) loo yaqaane, uu muddo aan badnayn ku xigsimooda, martidiina looga liso caanihiisa macaan ee ay jecel yihiin marti goor dambe timid oo harraad iyo gaajo qaba. Heesta arrimahaas sheegeysa waxa weeye:

- Midow maran(52) laan guurte,
  Maran laan guurti yaa,
  May liki ku waayaan.
- Mamaadkaa(53) waa,
  La mahadsaday,
  Midow dhay.
- Menki(54) odan roogno(55),
  Martiidis,
  Moosin(56) xun koyti,
  Maarowta loo i,
  Minja yaraaga erin,
  Mirishi(57) ma leh.
- Tan maddi anna fadow,
  Mareerley ka dhawaaw,
  Martidey ku sooradow,
  Midow adley ma ahaa.

7) Korriimada dhallaanka(58), gaar ahaan waqtiyada jiilaallada ama abaaraha kululi jiraan, waa arrin xasaasi ah oo si weyn loo tixgeliyo. Ilma yar oo hal sano ama ka yar jira oo hooyadii ka gudhtay(59) baahi darteed, ama laga gudhiyey jirro darteed, waxa keli ah ee uu ilmahaasi si wacan ugu noolaan karo waa caano. Waqtigaas xun, caanaha ilmahaas u baahan yahay waxa laga heli karaa waa geel.

Maxaa yeelay, xoolaha kale, caano laga maalo daayoo, jiristooda ayaa halis ku jirta. Arrinkaas waxa si kooban u sheegaya heestan:-

Afar foollaha,
Aabbe mooyiye,
An af kale baran,
Abaydi(60) miyaay!!

8) Seben xun oo dameero ilmahood diideen, geel maahaane duunyo oo dhan caato iyo cudur la liidato oo caana daayoo aan cad lahayn, waxa lagaga baxaa caanaha geela iyo manaafacaadkiisa kale.

Sidaas waxa caddeynaya gabay hoos ku qoran oo ninkii tiriyey aannaan aqoon:-

Cirku haddaanu di'in geelu waa darar(61) ma waayaane,
Doog iyo abaar caanahaa deeqa aadmiga e,

9) Waxa la sheegay gabyaa weyn oo la yidhaahdo **Samatar Baxnaan**, ayaa afadiisii(62) kaga cadhootay geel ay la jeclayd in la siiyo dad ay afada xigto(63) ahaayeen, laakin Samatar ra'yigeedii diiday.

Samatar, isaga oo raba in uu u caqli celiyo xaaskiisa, doonayana inuu u sheego ladnaanta(64) ay ku jirto waqti kasta oo kulul, inuu u sabab yahay geela ay jeceshahay inay xerada ka saarto, gaar ahaanna, caanihiisa ay weel kasta ka buuxsatay, aanu ahayn wax si fudud xerada looga saaro oo muquuno(65) loo bixiyo, wuxuu gabay ku yidhi:-

Aqallaale(66) maantii asqiyo(67) oonka lala lee'day,
Ummulaha mantagay maantii loo af dhiqi waayey,
Aagaan karuuraa kuu sudhnayd awrka kuu rarane,
Intii aad dhintana dhay kalay ku iltiraayeene,(68)
Adhi iyo lo' baa lagu baxshaa aana(69) kuu timide,

Arlaaga geela ah naftaa lagu ilaashaaye,
Kolley aabbahaa tahay nin kale looma aamino e.

10) Caanaha geelu cunto ahaan sida xoola dhaqatadu u jeceshahay, iyo sida ay uga ba'shaan diihaal(70) kasta oo la qabo, waxa inoo sheegaya gabaygan oo uu tiriyey **Cumar Isteelliye**:-

Dhibaatiyo adoo gaaja qaba dhaxanta jiilaalka,
Dhoor(71) caana laga soo lisoo yara dhanaanaaday,
Nin dhedhemiyey wuu garanayaa dhulay qaboojaane,
Dhallaannimo qodxihii kugu mudaa kaaga soo dhaco e,
Goortaad dhantaa baa jidhkaba dhidid ku qooyaaye,
Ragga laxaha sii dhawrayow dhaqasho waa geele.

11) Waxtarka caanaha geela iyo qiimaha ay ugu fadhiyaan xoola dhaqatada Soomaaliyeed, waxa kaloo gabay uu leeyahay ku tilmaamay **Cabdi - Galayax**. Wuxuuna yidhi:-

Caanaha Qiyaas(72) laga lisiyo Qoran(73) karuurkeeda,
Ayuun baa quraac iyo cashaba lagu qaboobaaye,
Qashin weeye soortii kalaad quud(74) ka dhigataaye,
Qandho(75) iyo kuleyl laguma oga qabata meel baase.

12) Abaaraha, Kaliishii(76) iyo waqtiyada kale ee kulul, meeshaan geel joogin, ama meeshii uu joogo isaga oo gudhan oo aan weli dhalin, waxa hubaal ah in dhib badan iyo baahiba joogaan. Beeluhuna(77) aanay huraynin wax la kariyo, xoolahooda ha qasheen ama soor ha soo iibsadeene. Heestan ayaa arrinkaas si cad u tilmaamaysa:-

Kelyo-weyneey,
Kaliil aanad dhalin,
Wax la kariyiyo,
Kuleyl loo dhimay!!.

13) Xoola dhaqatada Soomaaliyeed, sida ay qabaan, qoys reer guuraa ahi oo hagaagsani waxa uu ku dhisan yahay ninka, naagta iyo geela oo duunyo ah. Saddexdaas ama midkood la'aantiis, qoyskaasi waa kala dhiman yahay. Halkaasna waxa ka muuqanaysa sida labada qof ee isqaba loo barbardhigay geela. Taasna waxa keenay waxtarka geelu leeyahay. Heestani waxay qeexaysaa la'aanta saddexdaas midkood dhibaatada ay leedahay; gaar ahaan qoys reer guuraa ah oo caana geel ka maarmi kara in aanu jirin ayey murtida heestu tahay:-

Geeridaydana,
Guryo ba'ay iyo,
Goblan(78) laga qaad;

Geerida haweenna,
Guud la fidho iyo,
Guursi laga qaad;

Geeridaadana,
Gaawa madhan iyo,
Gaajo laga qaad..

14) Caanaha xooluhu, gaar ahaan kuwa geelu waxay yihiin cuntada caadiga ah ee ay ku nool yihiin xoola dhaqatada Soomaaliyeed. Maahmaahda hoos ku qoran ayaana caddeynaysa siyaalaha kala duwan ee loo shafeecsado. Maahmaahdu waxay tiraahdaa:-

Caano geel, mar waa subag,
mar waa soor(79), marna waa sabab.(80)

15) Heesta hoos ku qoran oo ka mid ah kuwa geela, waxay ka warramaysaa, sida iskaba daa qoys aan geel lahayniye, kii lihi ilaa uu geelu aad u dhalo aanu caana uga dhergeyn, oo uu ku jirayo qadhaab(81) iyo wax karsi:-

Qaayib(82) qoyska leh,
Jeeruu qun(83) u dhalo,
Oo nirgaha qubo,
Quulla(84) dubadkiyo,
Qiiqu(85) kama hadho.

16) Heestan oo ka mid ah kuwa geela, waxay muujinaysaa in afarta naas ee geela oo markii la doono oo ay maali karaan afar qof iyo ilmaha hasha nuuga, aan caana laga waayi karin inta hashu irmaan(86) tahay:-

Afarraysane,(87)
Afar maashiyo,
Ilmihiisaba,
Afku ma qallalo.

17) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha geela, waxay tilmaamaysaa in qofka aan cabbin caanaha geela uu tamar(88) yaraado oo aannu yeelan karin ad-adeyga(89) loo baahan yahay marka hawlo culculus la qabanayo:-

Caanahaagoon,
calooshay tegin,
Yaa codwaagiyo,
Ciidan xumadaa leh.

18) Tixahan(90) gabayga ah oo uu tiriyey **Ismaaciil Mire**, waxay ka warramayaan in caanaha oo ugu weyn waxa geela iyo xoolaha kalaba loo dhaqdo, haddii neefku(91) caana yareeyo la nacayo oo la qalayo ama si kale loo miidaaminayo(92):-

Haddii baatir(93) geel kuu dhashoo baaqimaad noqoto,
Barooddada(94) big(95) caanood haddii biidna(96) laga waayo.
In billaawe lagu soo xafsiin ba'a e yow sheega!!

19) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ee geela, waxay muujinaysaa in waxa geela lagu jecel yahay uu ugu weyn yahay caanihiisa xilli walba laga helo.

Xoorki(97) laga dhamay,
xagaagi horiyo,
Xusuus baa geela,
Lagu xer geeyaa.

20) Heestan oo ka mid ah heesaha geela, waxay muujinaysaa marka reer geeliisa sii daayo oo meel beesha ka durugsan loo daaq geeyo, in reerkii caana la'aan muto,(98) illeyn geelii ay ka heli jireen ayaan ka tegeye:-

An danbaabee,
Danqad(99) dabadaa
Doobi xoorliyo,
Dambar lama dhamin.

21) Heestan oo ka mid ah shubaasha geela, waxay muujinaysaa reerkaan ama qoyskaan geel u dhalin ama u irmaanayn inuu dhibaataysan yahay:-

Goodir(100) curatiyo,
Haddaan garabweyn,
Guga kaa dhalin,
Waa la go'ayoo,
Waa la gubanyahay.

22) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha, waxay muujinaysaa in caanaha geela lagu habo(101) ama lagu koriyo carruurta dhalata, oo umushii(102) weyda caana geel iyada iyo cunuggeedu dhibaato la kulmayo:-

Wiilal habar la',
Yey habtaayoo,
Hooyadood tahay.

23) Heestan oo ka mid ah kuwa Kebdaha(103), waxay muujinaysaa sida xoola dhaqatadu caanaha geel uga jeceshahay cuntooyinka kale ee badarku(104) ka mid yahay:-

Korankor(105) cuni maynoo,
Kariba maynee,
Karuur geel ma la hayaa?

24) Reerguuraagu markuu socoto dheer gelayo, hadduu geel leeyahay, waxa u caada ah in caanaha geel sibraar(106) ku shubto oo hore u qaato, si uu jidka ugu sii cabbo markii uu harraad ama gaajo iska dareemo. Waxa la sheegay in caanaha geelu ay sahay(107) wacan u yihiin socdaallada(108). Caanayowga xoolaha kale (Lo' iyo Adhi) waxa la sheegay in aanay sahay ahaan ku wacneyn. Waa mide, muddo yar ka dib way beddelmaan oo weliba xumaadaan, oo ma laha adkeysiga ay leeyihiin caanaha geelu. Waa tan labaade, sida caanaha geelu u bi'iyaan harraadka uma bi'iyaan caanaha xoolaha kale. Waa tan saddexaade, caanaha geela markii la cabbo, halka laga helo fudeyd iyo firfircooni, caanaha xoolaha kale waxa laga qaadaa culeys iyo caajis. Gabaygan oo uu tiriyey **Yuusuf Cabaade Gurey**, ayaa si wacan u muujinaya waxtarka caanaha geela markay sahay laga dhigto:-

Sibraarrada haddaan lagu shubin Seenyo(109) libinkeeda(110)
Sahankuba(111) Afmeerrada(112) Sariyo socodka dheer diidye,
Ma surmiyo(113) kaliishii ninkii sidig(114) ka maalaaye,

2. Hilibka

Manaafacaadka labaad ee dhaqaale ee geelu leeyahay waa hilibkiisa, sida uu xoolaha kale uu uga laf weyn yahay ayuu uga hilib badan yahay. Meeshii tulud geel ah lagu qalana, qoysas dhawr ah ama dad fara badan ayaa ka dhergi kara oo weliba wax ka dhigan kara.

Xoola-dhaqatada Soomaaliyeed, marka ay u timaaddo marti(115), ama ay leeyihiin xus weyn, ama kulan weyn, waxa caada u ahaan jirtey, welina u ah in meeshaas geel lagu qalo. Hilibka geeluna waxa uu ahaan jirey sooryo(116) la bixiyo ta ugu qaalisan oo ugu qiima weyn.

Xoola kasta ee kale oo lagu qalo meel dad badani isugu yimaaddo, laguma xil bixi jirin. Haddiise geel lagu qalo, tira kasta oo timaaddaa waa ka dhergaan.

Hilibka geelu, badnaanta oo keli ah laguma jecla. Xoolaha kale hilibkooda waxa uu dheer yahay waa muddada dheer ee uu dhigmi karo isaga oo aan xumaan.

Hilibka oo ah manaafacaadka Labaad ee dhaqaale ee geelu qiimaha ku leeyahay, suugaan badan oo kala duwan ayaa muujiso hilibka geelu waxtarka uu leeyahay, iyo sida uu uga mudan yahay, uga nacfi badan yahay, ugana adkeysan badan yahay xoolaha kale hilibkooda.

1) Maahmaahda "Meel hal lagu qalay,
ma hilib yara, mana hadal yara".

Waxay si cad u qeexeysaa in sida tuludda geela ahi u weyn tahay, hilibkeeduna u fara badan yahay. Meesha ay tulud geel ahi ku qalan tahay, waxa shardi ah in uu yaal hilib badan oo qoys daayee, deeqayo dhawr reer ama dad badan.

Dadkaas tirada badan ee hilibkaas ku soo urura, waxa shardi ah in ay hadal iyo bulaan(117) bataan. Arrimahaas ayaana maahmaahdu tilmaamaysaa.

2) In kasta oo xoola dhaqatada Soomaaliyeed aanay caadadeeda ahayn in ay sheeg-sheegaan cuntada, oo soorta ka-hadalkeeda ama faaninteedu ay la tahay arrin aan qurux badneyn oo anshaxa aan ku wanaagsanayn, haddana lama waayo dad wax uun ka tilmaama. Heesta hoos ku qorani, waxay sheegaysaa qeybaha muhiimka ah ee hilibka geelu u kala baxo iyo nacfiga(118) laga helo:-

Jurmi(119) iyo seed,
Jiidh iyo caddiin,
Jinow(120) iyo xoori,
Oo isku wada jira,
Jaawo(121) ka ekeey!!

3) **Cabdi-Galayax**, oo gabay uu tiriyey kaga warramayey hilibka qeybihiisa iyo sida uu u deeqo dad badan oo sokeeyo iyo martiba leh, wuxuu yidhi:-

Haddii meleggu(122) seedaha jaroo saanta laga gooyo,
So'(123) macaan sakaarkiyo leggiyo sarar baruurowday,
Oo sokeeyaha ku filan Suubey(124) adigaa leh.

4) Hilibka geela oo xoola-dhaqatadu u haysato sooryo xoolaad ta ugu sharaf badan, ayaa heesta hoos ku qorani barbardhigaysaa manaafacaadka xoolaha kale. Murtiduna waxa weeye in markii sooryo loo daayey geel, xoolihii kelena, midba wax lagu sheegay. Heestu waxay tidhi:-

Lo' baa sixin(125) leh,
Adhi baa sadaqo(126) leh,
Sooryo Ibil(127) baa leh.

5) Dhuuxa(128) Geela iyo subaggiisa kale waxtarkiisa darteed aad baa loo jecel yahay. Waxana la sheegay qofka cuna inuu seedihiisa iyo muruqyadiisa adkeeyo oo u yeelo xoog weyn. Heestan oo ka tirsan lahjadda "MAAY" ayaa arrinkaas si wacan u tilmaamaysa.

Lafta lanki(129) dhuusado,
Ama laggah aamo,(130)
Ye leegteegeh.(131)

6) Hilibka geela waxtarkiisa iyo sida uu jidhka aadamaha nacfiga ugu leeyahay murti badan ayaa laga tirshay. Heestan oo iyana ka tirsan lahjadda "MAAY", waxay ka warramaysaa qeybaha hilibka geela iyo meelaha ay waxtarka ka yihiin. Heestu iyada oo arrimahaas geela ku amaanaysa waxay tidhi:-

Saluuglaaye(132),
Sokaa(133) waa,
Seed i,
Sarar la ka biiyo,
Saloolkaa(134) lanki aama,
Soddon ba qado,
Ma sikadaaw(135).

Saafantis ma gohaas,
Wal(136) la kii simo,
Siidigay(137) ma uunna,
Subag ha haato,
Siddi(138) dheerte.

7) Gabayaagii **Axmed Caynoosh**, ayaa isna si weyn u ammaanay waxtarka qeybaha kala duwan ee geela. Si gaar ah, gabayaagu wuxuu geela ugu ammaanay hilibkiisa badan oo uu taallo ku tilmaamay inuu yahay mid reero badan ka hirqadaan, muddo dheerna la cuno ee aannu ahayn shidho(139) maalin keli ah sida xoolaha kale. **Axmed Caynoosh**, tuducyada uu ku ammaanayey hilibka geela, wuxuu ku yidhi:-

Hadday toban dhintaan xoolo kale laysma taakulo(140) e,
Taallada hilbaha een dhammaan taniyo dhawr maalin,
Tulud reerka loo qeybin karo, Teeyoy(141) adigaa leh!
Tahar iyo baruur laga hirqado Teeyoy adigaa leh!
Togoogta iyo shanshada dhuuxa badan Teeyoy adigaa leh!
Tebbed(142) ila-cas(143) laga soo af rogay Teeyoy adigaa leh!

8) Qeybaha hilibka geela waxa ka mid ah cad loo yaqaan AMMAAN oo isaga oo aan la karin, la sheegay in lagu cuni karo ceedhiinka. Xoola-dhaqatadu, aad bay geela ugu ammaantaa arrinkaas. Cadkaas oo ku yaal bartamaha

kuruska iyo guud ahaan hilibka geela, waxa lagu ammaanay gabayga hoos ku qoran:-

> Haddii reerka shidho loo barraxo(144) koran baruuraystay,
> Billaawaha haddii lagu dig dhabo baqaye dhiiggiisa,
> Goortuu barraahsado hadday laba ka boodbooddo,
> Isagoo bardaankii la jaray laguna baashaalay,
> Bur ammaana iyo beer haddii la isku baal goysto,
> Wax bisil aan bislayn lagu cunyey, Bayl(145) hala ogaado!

9) Xilliyada abaarta ah ee xooluhu aad u wiiqmaan(146), geela maahaane, intooda kale yar iyo weynba aad bay ula lee'daan cudur iyo caato. Geela se, sida ay sheegeyso heesta hoos ku qorani, waaweynkiisa daayoo dhashiisa ayaa xilliyada kulul la qashaa:-

> Salwoy(147) nirigtaa,
> Sool(148) abaariyo,
> Seeri(149) lagu dubey.

10) **Xaashi Indhoole** geeraar uu tiriyey oo kaga warramayey nacfiga geela, waxa ka mid ahaa dhawrka beyd ee hoos ku qoran, oo kala sheegaya dhawrka siyood ee hilibka geela looga faa'iideysto, iyo tira badnaanta hilibka geela, wuxuuna yidhi:-

> Xaggani waa gog(150) daboolan,
> Xaggani waa lafo guud leh,
> Xaggani waa gumbis(151) gaar ah,
> Guullihii na abuurtayow,
> Gu' samaaday(152) miyaa.

11) Gabay uu tiriyey **Askar Cali** oo uu kaga faallooday waxtarka geela, beydadka hoos ku qoran oo ka mid ahaa, waxay ka warramayaan sida marti badan oo waqti xun oo dambe gurya timid, sida sharafta leh ee geelu u dhergiyo, iyo sida uu u xiltiro ninkii loo soo hoyday. Xiltiriddaas oo aanay xoola kale lahayni, waxa geela siiyey hilibkiisa badan ee dad badan ku fillaan kara oo ah suuryo ta ugu sharaf iyo waxtar badan, iyo caanahiisa oo waqti walba la isku hallayn karo. Wuxuuna yidhi:-

> Guutooyin(153) kugu soo habsatay(154) gacal ku soo haybshay,
> Goortay martidu soo gab tidhi heelka(155) gurigaaga,
> Oo gacan khalqigu kugu ogyahay magacu waa guune,
> Aan neef la gawraciyo loog adhi wax gaadhaynin,
> Gool loo qalyaa iyo sidkaha loogu godolyaaba,
> Isagaa xil kaa geyn kariyo guurti(156) kuu timide.

Saanta geela, si weyn ugama aanay faa'iidaysan jirin xoola dhaqatadii hore. Xagga guryo dhiska iyo ka sameynta qalab kale sida kabaha mooyee, wax badan oo kale kuma aanay qabsan jirin. Hase yeeshee, saanta ama haragga geelu ma ahayn wax la liita oo la iska tuuro. Waxa laga jeclaa hargaha lo'da ee ka jilicsanaa, kana qurux badnaa.

Saanta geelu waxay kaalin weyn ka qaadan jirtey dhismaha aqal Soomaaliga. Inta la kala bixiyo ayaa dadab ahaan loo isticmaali jirey oo aqalka lagu dugsiyi jirey; ama inta la jeex-jeexo ayaa xadhig loo isticmaali jirey, inkasta oo gogol aan loola jeclayn, adaygeeda darteed.

Kabaha laga tolo ama laga sameeyo saanta geela, waxay ahaan jireen kabo xoola-dhaqatadu aad u jecel yihiin. Adaygga iyo qarada saantu leedahay awgeed, ayay ka cimri dheeraan jireen kabaha laga tolo saanta lo' da. Adhiga haraggiisa lagama tolan jirin kabo.

3. Gaadiidsi

Si kooban marka geela loo kala qeybinayo, wuxuu u kala baxaa godol iyo gaadiid. Godolku waa dheddigiisa la maalo marka uu dhalo. Gaadiidkuna waa labkiisa oo la rarto. Caada ahaan, Soomaalidu ma rarato ama ma gaadiidsato dheddigga geela. Baahi ku dirqida ayaanay la kulmin. Xurmo iyo kalgacayl loo qabo dheddigga darteed ayaan loo raran. Hal keli ah, qofkii lehi, xataa uma quudho inuu raro.

Haddii dheddiga geela lagu xushmeeyo dhasha ama taranta iyo caanaha badan ee laga maalo, labkiisana waxtarka ugu weyn ee lagu qiimeeyaa waa gaadiidsiga ama rarka.

Neefka lab ama awrka, inta da'diisu yar tahay oo uu afar jir ama shan jir yahay, ee uu qaalinka yahay, ayaa la layliyaa oo la baraa rarka ama hoggaanka. Maxaa yeelay, hadduu aad u weynaado oo xoog weyn yeesho waa adag tahay hoggaan qaadashadiisu ama layliyiddiisu. Waxaana lagu billaabaa in la saaro rar yar oo fudud oo uu qaadi karo, ama haddii uu buubo(157) oo uu rido, aanay waxyeello gaaraynin. Laylyiddaasi waa hab qaalimada lagu carbiyo(158) intay da'yar yihiin. Kii laga dhaafo laylyidda, waa mid aan lala damcin gaadiidsi, oo laga leeyahay laba ujeeddo mid uun; Waa mide, waxaa loo reebay inuu ahaado baarqab geela (dheddigga) abaahiya(159). Waa ta labaade, waxa lala rabaa inuu noqdo neef la naaxiyo, oo hilib ahaan looga faa'iideysto. Qaalinka loogu tala galo gool(160), waxa caada ah in la dhufaano(161) oo xiniinyaha laga saaro, si aanu u qooqin oo u abaahiyin geela.

Awrka la dhufaano, aad buu u naaxaa oo jiidh iyo baruur badan ayaa fuula. Waqtiyada aad u kulul ee abaaraha xumxumi dhacaan, ee baad iyo biyoba gabaabsi(162) noqdaan, xooluhu guud ahaan caatoobaan oo weyd(163) la socon waayaan, ayaa goolasha loo aayaa(164) markii maatada(165), martida ama mudane kale loo qalo. Xaaluf(166) kasta oo dhaca, waa adag tahay sida goolasha uu uga dhaco hilibkii fuulay sannadihii hore ee barwaaqo. So'diisa iyo subaggiisa badan ayaa beeshu ku baahi baxdaa oo ku dhaaftaa waqtigaa kulul ee cad iyo caanaba gabaabsi noqdaan. Kii geeliisa aan gool ugu jirin, waxay ku kalliftaa inuu reerka u qalo hal hilib leh oo aad u jecel yahay, ama waxay ka geyeysiin weydaa inuu awr raray(167) ah oo hayin(168) biyo-ma-qubaan ah uu maatada u gawraco, si jiilaalku aanu ula hadhin ee ay u badbaadaan. Taasina waxyeelladeeda ayey leedahay ee dhibaato gaadiid ayaa imaanayso oo reerkii ayaa waayaya wuxuu ku guuro ama ku dhaansado(169).

Awrta ama qaalimada inta ay ku jiraan carbinta ama rar iyo hoggaanbaridda, waxa loo yaqaan layli. Waxaana badan, galgalashadooda, buubiddooda, cabaadkooda, didmadooda iyo carcararkooda.
Looma aamino in la saaro dad iyo duunya toona, ama alaabo burburi karta ama jajabi karta. Rar fudud oo duubasho(170) ah ayaa caada ahaan la saaraa. Xataa waa laga ilaaliyaa in la saaro shay ama wax sanqadhaya marka uu soconayo. Maxaa yeelay, sanqadha markuu maqlo wuu didaa. Didmadaasina waxay dhalin kartaa inuu alaabta rido, ama dheelliyo(171) ama

didiso awrta kale ee sidda carruuraha, cirroolaha ama maqasha yar yar ee adhiga ee aan socon karin haddii geeddi(172) la yahay.

Qaalinka ama awrka layliga ah ee raran ee didmada badan, sida badan, keli ayaa qof xoog ihi u hoggaamiyaa. Haddii awr kale in lagu xidhiidhiyo laga maarmi waayo, waa loo hormariyaa, oo kuwa hayinka ah ayaa la dambeysiiyaa.

Qaalimadu waxay layli baxaan badanaa muddo aan dheereyn ee sannad iyo laba aan ka badneyn. Dabadeed waxay u kala baxaan qaar hayin noqda oo aan yeelan didmo, iyo kuwa carar iyo cabaad bata oo dhibaato iyo rafaad lagala kulmo rariddooda, furiddooda iyo wadiddoodaba.

Awrka hayin noqda, ee badanaa ah mid dhawr sano la rarayey, waxa la saaraa oo lagu aaminaa dadka jilicsan (Carruur iyo Cirroolaba), maqasha adhiga iyo alaabada guriga ee jiljilicsan ee gurgurka(173) loo yaqaan. Waa lagu dhaamiyaa oo waxa la saaraa haamaha waaweyn ee biyahooda mudda dheer la shafeecsado. Awrkaas hayinka ahi waa ka gaadiid loogu jecel yahay ee ninka lihi, bixin iyo qalid toona aanu u quudhin. Waxana si wacan oo kalsooni ku jirto loo adeegsadaa kolkii la guuro, oo dad, duunyo iyo agabba(174) isaga ayaa lagu aaminaa. Waa lagu dhaansadaa oo dhul fog ayuu biyo ka soo qaadaa isaga oo sida haamaha waaweyn oo buuxa, oo muddo toddobaad ah uu la soconayey isaga oo qatan(175). Socodkaas dheer iyo gaajada iyo oonkana wuu u adkeystaa, oo si nabadgelyo ah ayuu ku fuliyaa adeeggaas.

Awrka la rarto, adeeggiisu kuma koobna dhaan iyo gaaddid. Markii loo baahdo, waa lagu safraa, oo culaab culus inta la saaro ayaa masaafo dheer oo boqollaal mayl ah la socdaa, isaga oo qatan oo biyo iyo baad (176) toona bishimihiisa gelin. Magaalooyin iyo mayiga kala fog, awrta la rarto ayaa gaadiid u ahaan jirtay, welina badi u ah, oo u kala qaadi jirtey badeecooyinka iyo alaabada ay is weydaarsadaan. Midhaha beeraha ka soo go'a, ee xoola dhaqatada loo geynayo ama magaalo durugsan loo iibgeynayo, awrta rarayda ah, ayuu ahaan jirtey gaadiidka lagu raro.

Awrta rarka oo keli ah qiimahooda gaadiidsi kuma koobneyn. Ragga ayaa fuuli jirey oo rakuub(177) ka dhigan jiray. Culaab(178) kale oo culus isaga oo aan sidin, ayaa nin keli ahi u fuuli jirey sidii faras, oo ku socdaali jirey ama ku sahamin jirey. Awrka rakuubka ah, marka lagu joogo, qunyar lama taxaabo(179) ama looma socodsiiyo, ee sida fardaha ayaa koore la saaraa oo laga orodsiiyaa. Dhul oomana ah oo aan cidi ku nooleyn, ayuu dhex jibaaxaa(180), isaga oo aan nasaneynin ee ordaya, daaq iyo cabbidtoona arkaynin, kulka iyo dhaxantuna uu u adkeysanayo.

Dhulka geelu sida wacan ugu dhaqmo ee oomanaha iyo keymaha u badan, rakuubku waxa uu u ahaan jirey faraska lagu socdaalo ee beelaha isku xira, wararkoodana isu tebiya. Sida faraska, ayuu ahaan jirey shay xarrago oo lagu gole tago ama lagu dabbaaldego, ama lagu duulo oo lagu dagaal galo. Gammaanka maahaane, waxa uu ahaa gaadiidka ugu dheereeya, uguna sharaf badan, ee xoola dhaqatadu adeegsadaan. Meela fara badan ee miyiga durugsan ah, ayaa weli rakuubka laga adeegsadaa oo qiimihiisii hore leeyahay.

Awrka rarayga ah waa laga reebaa geela oo lama foofo, lamana xeroodo. Guriga ama aqallada agtooda ayaa loo hooyaa oo la fadhiisiyaa. Habeen iyo maalinna; labada addin ee hore hoostooda ayaa lagaga xidhaa xadhig loo yaqaan dabar ama seeto, oo marka uu maalintii daaqayana, loo

dheereeyo, marka habeynkii la hooyana loo gaabiyaa. Maalintii kolka ay daaqayaan sida geela lama raaco oo lama daajiyo. Guriga agtiisana kama fogaadaan, illeyn xadhig baa ku xidhane. Geela iyo xoolaha kaleba ka dhib yar oo dad raaco uma baahna. Galabtii ama fiidkii ayey u baahan yihiin qof ama cid guriga ku soo dhaweyso. Haddii midkood xadhigga goosto, waa hubaal inuu socod dheer geli karo oo lumi karo. Badanaase, awr keli ahi, kama tago awrta kale, isaga oo gaajo weyn ama harraad weyn qaba mooyaane.

Qof reer miyi ahi, hadduu arko awr xadhiggii goostay, xataa haddii aanu aqoon cid leh, waxa uu u caada ah in lagu dabro ama seeteeyo meesha lagu arko, ama meesha dad ugu dhow. Xoola dhaqatada waa ku ceeb dhaqan ahaan, in la iska dhaafo awr raray ah oo xadhig jiidanaya.

Dhawrkaas siyood ee aynnu soo sheegnay ayaa awrta loo gaadiidsadaa oo loo manaafacaadsadaa. La'aantoodna, nolosha xoola dhaqatadu macno ma leh. Maxaa yeelay, geeddiga, dhaanka, safarka, iyo socdaalku waxay ka mid yihiin hawl-maalmeedkooda caadiga ah. Intaasna waxa ay ku fushadaan oo u gaadiid ihi waa awr.

Reerguuraaga Soomaaliyeed, gaadiidka ay ku guuraan ee socsocodkooda iyo alaab gurashadooda lafdhabarka u ahi waa ratiga la rarto. Gaadiidsi ahaan waxa soo raaci kara dameeraha oo cullaab yar qaadi kara iyo fardaha oo la fuulo. Ratiga rereyga ah weeye kan ay ku qaataan guryaha, ku safraan, carruuraha iyo maqasha adhigana ku qaataan. Awrka rereyga ah ayaa meelaha durugsan iyo ku u dhowba ay ku dhaansadaan oo biyaha ku soo qaataan. Awrka rareyga ah qiimaha uu ku leeyahay bulshada reer-guuraaga ah, suugaanta soomaalidu si weyn ayay uga hadashay.

1) **Ismaaciil Xayd (Aflow)**, gabay uu leeyahay, ratiga rareyga ah wuxuu ku mataalay markab., wuxuuna ku amaanay awrka rareyga ah in uu yahay, miyiga daayoo, in uu xataa yahay kan magaalooyinka camiran lagu joogo ee safarradu adeegsadaan keenid iyo qaadidba. Gabyaagu waxa gabaygiisa ka mid ahaa:-

Markab buu adduunyada u yahay macallinow geele,
Maagaalada Hargeysiyo Jigjiga moodka(181) waxa geeya,
Ee Adari(182) maarshee(183) ka dhigay muranku waa ceebe,
Waa muruq addoonlow ratiga madaxa waaweyne.

2) **Axmed Caynoosh**, gabay uu leeyahay wuxuu ku ammaanay gaadiidsiga ratiga, wuxuuna bar-bardhigay dameerka oo uu ku sheegay inuu gaabiyo oo wax aan naf lahayn qaado, laakin ratiga rareyga ah, abaaraha kulul lagu joogo meelaha aad uga durugsan ceelasha biyaha leh. Gabaygiisaas wuxuu ku yidhi:-

Toomaha Garduur(184) jiilaal dadkoo tog u hayaamaaya,
Taar ma leh dameeruhu haddaad tuhunto gaadiide,
Taboodiga(185) ratiga ee la raran Teeyoy adigaa leh.

3) **Sayid Maxamed Cabdulle Xasan**, gabay uu leeyahay, wuxuu ku soo qaaday gaadiidsiga ratiga. Wuxuuna barbardhigay dameer, oo uu sheegay in aanu culeysba sidin oo uusan gaadhi karin rati bacadle(186) ah, Waxa ka mid ahaa gabaygaas:-

Dameer laba buqlood lagu raroo lagu boqoolsiiyey(187),
Bukuulaha(188) xunbuu moodayaa buur inuu sido e,
Inaan bacadle awr lala simeyn ba'a e yow sheega!

4) Awrka rareyga, reerguuraagu si weyn ayey u jecel yihiin. La'aantiina, maba jiri karaan. Sida xad-dhaafka ah ee loo jecel yahay waxa muujinaya salsalkan oo marba la barbardhigay waxa ugu mudan nolosha bulshada reer-guuraaga ah:-

Bacadle yaa bun kuu duba,
Bafto kugu hagoojiya,
Bilcaan kugu nikaaxiya,
Wan baraara kuu qala.

5) Awrka rareyga ah waxa lagu jecel yahay waa rarka iyo adkeysiga badan ee uu culeys iyo caddibaadda kalaba u leeyahay. Marka la rarayo, qofka lihi waa uu u tudhaa. Taasna waxa caddaynaya heestan:-

Haddaan dheelli kuu raro,
iyo dhoomo(189) laallaad,
igu dhiibis baad tahay,
oo waadan ii dhalan.

6) Rareyga wanaagsan oo xoogga iyo hayyinnimadaba leh, cadowgiisa oo dad iyo dugaagba ah ma yara. Qofka lihina, duco iyo ilaalin ba waa ku difaacaa. Xilliyada xun-xun ee wax waliba caatoobaan, rareyga hayinka ahi, jiidh iyo jurmiba weli ma furfuran. Haweenka, qaarkood waxay jeceleystaan in la qalo oo hilibkiisa iyo subaggiisa meelo kala dhigtaan oo abaaraha ku dhaafaan. Heestani waxay muujinaysaa awrka noocaas ah ee la jecel yahay sida loola neceb yahay qalliinka:-

Waqaan(190) shalow(191) lagaa mudin,
Shillal(192) dheer laguu dhigin,
Habro kugu shaloombiyin(193).

7) Rareyga wanaagsan ee hayinka ah iyo ninka leh ee mar ku guura, mar ku dhaansada, marna ku safra, had iyo goor waa u socod, daal iyo gaajo. Hawlaha reerkana, gaar ahaan waqtiyada kulul, labadooda ayey ku soo baxsadaan oo fuliya. Heestani waxay qeexaysaa xiriirka hawleed ee rareyga iyo ninka rarta:-

Habeenkii lay dhalay,
Adna lagu dhaqaaleeyaa,
Dhib layska meel dhigay.

8) Dhibaatada badan ee rareygu qabo ee ah rarka culeys badan, sii socod iyo soo socod joogta ah, ayey heestani muujinaysaa in uu la qabo ninka awrka leh ama ku shaqeeya:-

Waadigaa cataabayee(194),
Sida caynku(195) kuu gubey,
Baa cagtu ii dalooshaa.

9) Nin rati dhaan ah wata, isaga oo ka garaabaya dhibaatada, ayaa ratigiisa ku waaninaya inuu adkeysi u yeesho dhib kasta oo uu qabo, Maxaa wacay, waxay u adeegayaan dhallaan dhibaataysan, oo labadooda uun dhawraya. Wuxuuna ku yidhi lahjadda "MAAY".

Dhuubow,
Dhul dheera in jeedne,
Dhaanqa(196) ennaa(197),
Dhillaan(198) isla dhalniyaa,
Dhibboodo(199) haaye,
Dhafar(200) i dhidhamis(201),
Dhinniggoo(202) isku dhignooy(203).

10) Heesta hoos ku qoran oo ku qoran lahjadda "MAAY", waxay ka warrameysaa ratiga la dhaansado sida duq aan socod u hollan(204) karin iyo dhallaan aan meel dheer gaadhi karin, uu ceelal fog-fog si degdeg ah biyo uga keeno, oo ay ugu raaxaystaan. Wuxuuna yidhi:-

Da'arre(205),
Daaddey(206 dheelka(207),
I dogga(208) dareera waayi,
Doonkaa(209) adi ka guuradi,
Daw(210) dheer,
Biyi deg-deg,
Adi in ku sheenti(211).

11) Dad iyo duunyaba, awrtu way u dhaamisaa oo lagu daryeelaa waxa jilicsan. Gaar ahaan xoolaha gaboobey ama caato la soconaynin ama dhasha yar yar ee aan helin caano ku filan ayaa guryaha lagu waraabiyaa. Taasina waxay dhalisaa in haamaha waaweyn awrta la saaro, oo culeyskooda awrtu ku garba beesho. Heestani waxay awrta u sheegeysaa maxas'(212) baahan ee guriga u joogta:-

Irmaan golongolaayiyo,
Goldheer(213) gabari nuugtiyo,
gabannaa(214) guriga kuu jira.

12) Hawlaha muhiimka ah ee rarka ah ee ratigu qabto darteed, waxa lagu tilmaamaa tiirkii nolosha reerguuraaga ah. Sidaas darteed aad baa loo ilaashaa. Heestan ayaa qodobkaa si wacan u tilmaamaysa:-

Awr geel,
Waa agoon(215) koris,
Waa adduunyo tiirkeed,
Ereyga naagood iyo,
Isha aadanow daran,
Waana laga ilaashaa.

13) Nolosha reerguuraaga xoola dhaqatada ahi waxay u qeybsantaa xilli wacan oo xooluhu daaq haystaan, caanana leeyihiin, iyo waqti kulul oo caana yar yihiin ama lahaynba, oo wax la kariyo aan la hureynin. Ilaa la helo awr dhaamiya oo meel dhow iyo mid durugsan biyo ka keena, wax la kariyo suuragal ma noqon karto. Heestan ayaa xaajadaa si kooban uga warrameysa:-

Haddaan dhay(216) la maalayn,
Asaan Dhooble(217) dhaan wadin,
Gurigii dharaar(218) ma leh.

14) Kaalinta weyn ee ratiga rareyga ahi kaga jira jirista nolosha reer-guuraaga, - ah, waxa salkeeda muuji - naysa heestan oo awoodda ilaahay ku xijisay hawlaha ratiga rareyga ah, ee geela ka dhashey:-

Rabbi iyo rareeyadaada
Reerka maal(219) ku dhaqan yahay.

15) Waqti abaareed, reer guuraya oo meel fog u hayaamaya, ratiga ama awrta la raranayo, sida loo rarayo, waxa la saarayo, rafaadka ay maray-aan, iyo sida nabedgelyada leh ee dad iyo duunyo waxay sideen ku gey-nayaan meeshii la rabey, waxa si wacan gabay ugu sheegay **Cumar Xuseen (Isteelliyo)**, Wuxuuna yidhi:-

Gu'saranseeray(220) roobkoo ku simay Sud(221) iyo Gaaroodi(222),
Saqda dhexe haddii lagu lallabo(223) socotadii geeddi,
Korammada(224) sagaal jiray haddii keeno(225) lagu saydho,
Aqallada sintoodii(226) haddii sibirta(227) loo laabo,
Qarqarsiga(228) haddii lagu sakalo(229) sayncaddaha(230) dhaartay,
Heeryada(231) haddii lagu sawiro suumankiyo baydda,
Waa wax uu Ilaahay sandahay(232) saad u eegtaba e,
Samay(233) kolkaad tidhaahuu adhaxha(234) sare u qaadaaye,
Surradda(235) iyo ubbadda(236) teedsan(237) iyo saabka(238) iyo haanta(239),
Siddeed lool(240) ah iyo tiirka iyo saamihii Adari,
Intaasaa la wada saaraayaa saayid weheshaaye,
Siqiirkiyo carruurtana guray(241) uga sameeyaane,
Goortaa suryada(242) loo baxshuu sare u boodaaye,
Sallinkiyo wax lagu caawiyaa suuradaha(243) adage,
Meeshiyo salaaddiyo hadhkuu socod u jeedaaye,
Dadka oo surmiyeybay furaan suluf(244) abaar weyne,
Oo weliba seetada xigga ah la isu saaraaye,
Adduun lama sinnee geelu waa siinad(245) gooniyah.

16) Gabaygan oo uu tiriyey Cabdi- Galayax, wuxuu ka warramayaa sida awrka Soomaalidu u rarato, iyo qaadka weyn ee uu leeyahay. Wuxuuna bar-bardhigay maroodi rabbeysan xag qaad iyo xag hebednnimoba, wuxuuna yiri:-

Asaga oo sagaal sano jiroo saadda geri yeeshay,
Oo wixii la saaraba inuu sido ad moodeynin,
Waxba kuma simeen awr ninkii sal u yaqaanaaye,
Markabka nimanka Soomaali Suubey adigaa leh.

17) Heestan oo ka mid ah Salsalka awrta, waxay tilmaameysaa meesha awrka biyaha u qaadayo dadka jiray iyo duruufaha ka jiray:-

Oonleydaad ogeydeen,
Aagaan laysa siinaynin,
Yaa aabbow leyga leeyahay.

18) Heestan oo ka mid ah Salsalka awrta, waxay ka warramaysaa dhibka badan ee uu muto awrka rareeyada ah, gaar ahaan waqtiga ay aad u kala fog yihiin ceelka iyo degmadu:-

Shaluu taagan ahaa,
Xaluu tiirka ku xidhnaa,
Waa tagoogo(246) casoobay,
Oo dhulkuu taakinaayaa(247).

19) Heestan oo ka mid ah salsalka awrta, waxay muujinaysaa sida weyn ee loo jecel yahay awrka rareeyada ah, iyo sida uu damqado qofka lihi kolkii awrka dhibaato gaarto:-

Habeenki aad baaddiyo(248),
Habeenkaad bukootaba,
Uurku way balalacleeyaa(249).

20) Heestan oo ka mid ah salsalka awrta, waxay muujinaysaa dhibaatada ay mutaan awrka iyo qofka wada, iyo sida ay ugu baahan yihiin wax nasiya:-

Adna hawl nasiyahaa,
Haluu hawd la joogaa,
Anna hawl nasiyahay,
Habartiiba lama hayn.

21) Heesta hoos ku qoran oo ka mid ah salsalka awrta, waxay muujinaysaa naxariista loo leeyahay awrta la raro iyo raaxada lala jecel yahay in kasta oo dhibaato ka soo gaarayso rarka la saaro:-

Yaa habarta kaa dila,
Oo hilayga kaa guba,
Ad horweyn hogob(250) la daaqdide,
Ood haleelo(251) la miratide(252).

22) Heestan labada beyd ah oo ka mid ah kuwa salsalka waxay caddeynaysaa in awrta rareeyada ah culeyska la saarayaa aanu dhib weyn ku ahayn, laakin rar xumadu ay waxyeello weyn ku tahay:-

Rar xumaa rag kaa reebtee,
Raagsiinyo(253) ceeb ma leh.

23) Heestanina waxay muujinaysaa dhibaatada ay ku sugan yihiin awrta rareeyada ah, gaar ahaan waqtiga dhaanka ama geeddiga, ee maalintii oo kul ah ay raran yihiin, habeenkii oo dhaxan ahna ay xidhan yihiin:-

Dhoohane Allaa dhibay,
Habeenkiina waa dhaxan,
Maalintiina waa dhadi(254).

24) Heestan labada beyd ah oo ka mid ah salsalka awrta, waxay muujinaysaa manaafacaadka gaadiidsi ee ay awrta rareeyada ahi leedahay, iyo kaalinta weyn ee muhiimka ah ee ay kaga jirto nolosha xoola dhaqatada reerguuraaga ah. Heestu iyada awrta ku masaalaysa naq roobaad oo dad iyo duunyo lagu nastay, waxay tiri:-

Nabadgalow naq(255) roobaad,
Oo lagu naaxay baad tahay.

25) Heestan oo ka mid ah salsalka awrta, waxay muujinaysaa ninkii leh awr toban jir ah oo xooggan oo raray ah, kalsoonida weyn ee uu leeyahay iyo qiimaha wacan ee uu ku leeyahay bulshadiisa:-

Talanteelliyoobow(256),
Talo waxay u toostaa,
Ninkaad tabar u leedahay,
Amaad toban u gaadhtaa.

26) Gabaygan hoos ku qoran oo uu tiriyey Askar Cali, wuxuu ka warramayaa, dhul durugsan oo roob ku da'ay inuu u guuri karo reerkii awr gaadiid ah leh. Ninkiise aan lahayni, ama ma haweysanayo, ama waxay ku khasbeysaa inuu baryo oo ka gaadiid ceshedo qof ama reer awrtood, kaddib markay iyagu ku guuraan ee naqa ku tagaan. Gabayaaguna wuxuu yiri:-

Geyiga(257) oo abaaroobay oo ciiddii gubaneyso,
Oo gaabanow adhiga iyo nugulku gaajo beelay,
Guud sare hillaac kaaga baxay guban adoo jooga,
Oo lagu guddoonsaday hayaan(258) beeshu wada guurtay,
Gaadiid ninkii aan lahayn loo gadaal celiye,
Guri lagu raryaa iyo ilmaha gurada saartaaba,
Isagaad ku gudubtaa halkii naqa ku gaadhsiine.

27) Rarka oo keli ah awrta gaadiidsi ahaan looma adeegsado. Waxa kaloo loo adeegsadaa fuullimaad iyada oo laga dhigayo rakuub oo sida fardaha inta koore la saaro qofi fuulo. Habkaas rekuubnimo oo waagii hore caan ku ahaan jiray dhulka aan farduhu ku dhaqmi karin, waa mid weli raadkiisu sii qoyan yahay oo dad badani isticmaalo. Askar Cali oo arrinkaas ka gabyey, wuxuu yidhi:-

Geyi kaa fog meel dheer marbay kaa gashaa daniye,
Inkastaad gaadiidkiyo hadhkiyo guura soconayso,
Oo aanad geed qudha hadh gelin ama gabbaad(259) seexan,
Gabbal-dhiciyo waabberi haddii aad gucle(260) u roorto,
Halkii aanad dhawr godol orod ku gaadhaynin,
Mid loo gaatay(261) fuullaan markaad keeno soo geliso,
Ee aad garbaha kaga dhacdee cidhibta gaadhsiiso,
Waa gelin intuu kula socdaa aad ku gudubtaaye,
Rabbi naguma gaabsho e nin raga quruxdi waa geele.

28) Heestan oo ka mid ah salsalka geela, waxay ka warramaysaa kadeedka(262) uu la kulmayo kaliil la kala hayaamay reer ama qoys aan gaadiid lahayni:-

Iyadooy kaliil tahay,
oo dadku wada kadeed qabo,
Ninkaan kebed la xiimeyn,
Oon koran raranin waa ba'ay.

29) Heestan oo ka mid ah kuwa salsalka waxay caddeynaysaa marka dhaanku oomanaha yahay sababta awrka iyo qofka wadaaba socodka u dheereeyaan:-

Adigana gartaa weeyoo,
Guul(263) oomman baad tahay,
Anigana gartay weeya oo,
gaadiidkaygi baad tahay.

30) Heestan oo ka mid ah salsalka awrta, waxay tilmaan ka bixinaysaa in waqtiyo dhibban oo ah guure(264), jarmaado(265) ama boqoole, la guddoonsado(266) in dhaanka la raro, si waqti cayiman loo gaadho meeshii loo socday, Waxay kaloo muujinaysaa awrta in loo kala doorto socotada dheer ee dhibaatada badan leh:-

Ha la raro rag baa yidhi,
Anna waa ku raalliyey.

31) Dhawrka beyd ee hoos ku qoran oo uu tiriyey Yuusuf Cabaade, oo kana mid ahaa gabay dheer oo uu waxtarka geela kaga warramayey, gabyaagu wuxuu si gaar ah beydadkaas ugu sheegayaa sida awrta loo raro, culeyska weyn ee ay muddada dheer sidaan, iyo socodka dheer ee ay leeyihiin. Arrimhaas oo uu geela ku amaanayo wuxuu yidhi:-

Soortii badneyd iyo haddii minan(267) la soo saaro,
Seben(268) kuma maqnaada e berriyo saaddambuu imane,
Waa waxa siddeed lagu raroo saadka noo sida e.

4. Adkeysiga

Adkeysigu wuxuu ka mid yahay qoddobbada muhiimka ah ee geela loo dhaqdo. Sida uu ugu adkeysto abaaraha kulkulul ee oonka iyo gaajada badan ayaa ka mudnaysay(269) xoolaha kale oo dhan. Suugaan badan ayaana laga tiriyey adkeysigiisa iyada oo la barbardhigayo xoolaha kale.

1) Dalka Soomaaliyeed, siiba dhulka xoolaha lagu dhaqdo, abaaruhu waa wax ka dhaca. Mararka qaarkoodna xoolaha ku reeba diif(270) xun. Sayid Maxamed, hees kebdood uu tiriyey, wuxuu is barbar dhigay adkeysiga iyo manaafacaadka geela, lo'da iyo adhiga. Wuxuu geela ku ammaanay adkeysiga uu abaaraha u leeyahay. Wuxuuna yidhi:-

Guulla Eebbahayow,
Geel nimaan dhaqin,
Faciis(271) gacanta haw gelin;
Adhi gun baa dhaqatoo,
Gara(272) naf laga waa,
Hadduu seben gadiidsado(273);
Giirna(274) miis(275) ma leh,
Gidir(276) ilmihi diid,
Haddaan guno(277) la siinaynin;
Gooha(278) reen(279) badaneey,
Hal baan abid(280) gablooleyn(281);

Guri bilaay(282)
Geri la moodyeey,
Illeyn waa gob xoolaad;

Luqun gardhaaley(283),
Gucuri(284) weyneey,
Karuur gulungulcaaleey(285);

Gucun marooraay,
Good(286) qabiilooy,
Ninkii gawracaa ba'ay.

2) Abaaraha xumi markay dhacaan ee lo' iyo adhiba lee'daan, ayaa suurowda in geelu jiilaal dhalo oo caanihiisa lagu baahi beelo, dhashiisana si wacan u korsado ilaa laga gaadho waqti roob. Arrinkaas waxa si wacan u tilmaamaya heestan:-

Seeban adhi go'ay,
Sacna weyl gabay(287),
Suubeey lagu sidig.

3) **Cumar Xuseen (Isteelliye)**, gabay uu tirshay, wuxuu kaga warramay adkeysiga geela iyo nugulsanaanta adhiga iyo lo'da. Cumar Isteelliya, wuxuu gabaygiisaas ku caddeeyey in dhaqashada dhaxalgalka ah ay tahay geela. Wuxuuna yidhi:-

Adhi waa dhallaan iyo haween dhimaradiisiiye(288),
Dhaldhalaalka iyo ciirtu waa dhuubka(289) karameede(290),
Dhaqaalaha haweenka iyo guryaha siima dhaafsana e,
Lo'da dhiiqda(291) laga maalayo dhayda iyo xoorka,
Dhudhunkay biyaha kula jirtiyo dharabka(292) weeyaane,
Mar hadday abaaruhu dhacaan dhimatay geesleey,
Ragga laxaha sii dhawrayow dhaqasho waa geele.

4) Gabayaagii Saalax - ma-laydiray, mar uu ka hadlayey adkeysiga geela xilliyada abaarta iyo sida xoolahu u siman yihiin manaafacaadkooda waqtiyada barwaaqada, wuxuu yidhi:-

Cirka oo mir da'ay dooxada oo rahu madiixaayo(293),
Afartiisa maysin adduun weysku wada maadhe(294),
Marse hadday jidhaamuhu(295) madhtaan midigtu waa geele.

5) Gabayaagii Cabdi-Galayax oo gabayo badan ka tirshay qiimaha geela, ayaa wax ka sheegay adkeysiga, isaga oo ku tilmaamay lo'da iyo adhiga kuwa aan abaaraha iska xejin karin, wuxuuna yidhi:-

Maalintii sabaan xumi dhaco oo uunku(296) wada seemo,
Ama sedo(297) magaalo iyo arlada siinad laga waayo,
Sabuullada(298) haruurka iyo haddii saracu aafoobo(299),
Sac ninkii lahaa waa inuu sulufka(300) raacaaye,
Caanaha sibraarrada ku jira Suubey adigaa leh.

6) Geelu in uu abaaraha kulul u leeyahay adkeysi aanay xoolaha kale u lahayn maahmaahdan Soomaaliyeed ayaa sheegeysa ee tidhaahda:-

"Geelu abaaraha wuu ka sarreeyaa,
Laakin duunyada kale se kama sarreyso".

7) Axmed Caynoosh, gabay uu leeyahay ayaa isna wax ka sheegay adkeysiga geela iyo jileec ama nuglaanta adhiga iyo lo'da. Wuxuuna yidhi:-

Markii adhi tirsiimadii hadhtay een dhaqasho loo tooyan(301),
Ee tacab ninkii moodayow lo'i tabaalowday(302),
Ee Nugul tubaha(303) ceelka iyo taagan yahay goob xun,
Ee waxa duleeddada(304) laf togan tacajib loo yaabo,
Toobkaha(303) hadhuubka ah ee la shuban Teeyoy adigaa leh.

8) Gabyaagii Ismaaciil Xayd (Aflow), ayaa isna isbarbar dhigay geela iyo xoolaha kale. Wuxuuna sheegay in abaaraha kulul ee nacfi laga helo adhi iyo lo' daayee ay dabargo' ku sigtaan, waxa reerguuraagu ku dhaqnaa ee caanahooda balaxsanayeen ahaa Geela. Wuxuuna yidhi:-

Abaar muruxday(306) jiilaal malkaxay(307) geedo midhif(308) beelay,
Kolkii adhi maqaar buu noqdaye lo'ina meermeertay,
Mergiyaalaha weehad(309) baa kuu manfac ahayde.

9) Nuglaanta adhiga iyo lo'da iyo sida midba ku dambeeyo xilli abaareed oo xun, iyo adkeysiga geela iyo dheeftiisa, waxaana si cad u tilmaamaya gabaygan hoos ku qoran oo ninkii tiriyey cid noo sheegta aannu weynay.

Abaar laga fajacay(310) oo arlada fidho(311) ka duulayso,
Oo lo'i waddada foorartoo ceel ka fuli weydey,
Oo adhiga fooruhu(312) legdayoo haadku faganaayo,
Ma fakhriyo ninkii boqol halaad meel ku foofsadaye,
Feedh keliya goortaad cuntay kugu fillaataaye,
Allow faraha noo geli adduun waw filroon yahaye.

10) Adkeysiga geela xilliyada xunxun iyo nacfiga laga helo, halka xoolaha kale, sida adhiga iyo lo'du caato iyo cudur la lee'daan, waxa caddeynaya heestan oo lahjadda MAAY ku qoran:-

Barbaka(313) maddi humaaddo,
Baadki yaraado,
Baareyta loo(314) i,
Baryaraaga erin(315),
Bedeti(316) maddi fadheedaan,
Bartiyo la ka diimo(317),
Bur kuusan i,
Biddin(318) nuurow,
Adi ha la bati(319).

11) Oonka ama harraadka sida geelu ugu adkeysto waxa sheegaya heestan oo ka tirsan kuwa waraabka:-

Suudigii(320) shalay,
Cawsha socotiyo,
Sagaarada diley,
Waa la soconnoo,
Safay wadatiyo,
Seenyo ma hadh gelin.

12) Soddon casho iyo ka badan ayaa la sheegay in geelu biyaha ka qadi karo. Taasina waa tusaale muujinaya adkeysigiisa xagga oonka. Sidaasna waxa caddeynaya heestan:-

Soddon inaad qadi,
Sool(321) inaad tegi,
Saa biyaha ku cab.

13) Jiilaallada dheer iyo adkeysiga geela, waxa heestani barbardhigtay adkeysiga wiil xoog leh, kuwa aan u loodsamaynin dhibaha jiilaalka:-

Jiilaalkii dheer,
Jaadsankaagiyo,
Wiilki jamalaa(322),
Jiidhku ku hadhaa.

14) Labadan beyd oo hoos ku qoran oo ka mid ah gabay uu tiriyey Cumar Xuseen (Isteelliye), waxay ka warramayaan adkeysiga geelu u leeyahay dabiicadda, isaga oo ku tilmaamay dhagax naf leh:-

Haddii aannu dhadhaab(323) adag ka bixin laguma dhaateene
Waa dhagax nafloo hayjaddaa(325) dhigay ilaahaay e.

15) Heestan oo ka mid ah kuwa geela, waxay muujinaysaa waqtiyada xunxun ee abaaraha ah ee xoolaha kale wiiqmaan in geelu adkeysi darteed durdurro iyo cayaar ku jiro:-

Abeerkeedaa,
Abaar laaliyo,
Awr la boodda leh.

16) Labadan beyd ee hoos ku qoran oo ka mid ah gabey uu tiriyey Sayid Maxamed, waxay ka warramayaan in adkeysigu geela u yeelay qiimaha uu xoolaha kale dheer yahay:-

Waxa geela qaaliga ka dhigay qiimuhuu yahaye,
Qorfa(326) hawd ah waxa loogu wadi waa qatimayaaye(327).

17) Isaga oo geelu adkeysi u leeyahay harraadka oo ugu yaraan biyaha ka maqnaan kara muddo soddon maalmood ah waqtiyada jiilaalka, ayaa sida ay caddeynayso maahmaahda hoos ku qorani uu ka badsan karaa muddadaas. Maahmaahdu waxay tiraahdaa:-

"Hal bil qadday, beryo kuma dari weydo".

18) Guud ahaan isaga oo geelu adkeysi badan u leeyahay abaaraha, ayey qabaan xoola dhaqatada Soomaaliyeed, in geela cadcadi oonka iyo kulka uga adkeysi badan yahay geela midabyada kale ah. Sidaasna waxa caddaynaya tixaha gabayga ah ee uu tiriyey Samatar Baxnaan:-

Jiilaalka qaalmaha cadcadi kuuma jebiyaane,
Mar hadday jidh adag leeyihiin jooharad(328) weeyaane,
Jeelkiyo(329) harraadka yaa madow jilicsanaadaaye.

19) Sababta ugu weyn ee geela lagu jecel yahay, shaki wuxuusan ku jirin, inuu yahay adkeysiga uu u leeyahay duruufaha adag ee jiilaalku keeno. Maxamed Cali Beenaley, oo isku masaalay geela iyo maroodiga xagga adkeysiga, gabay uu arrinkaas kaga warramayo wuxuu ku yiri:-

Milicdiyo(330) abaartii markay murugtay jiilaalka,
Markii adhi mashquulkiyo ahaa moodhka(331) iyo doonka(332),
Ee ay Lo'i malkada(333) daadsanayd loona muhanaynin(334),
Waa kii madoobow ratigu Mudha(335) ku qooqnaaye,
Waa tuu markaha buuxin jirey maycaskuu(336) dhalaye,

Maroodiga cagaha weyn leh yey mili(337) wadaagaane,
Waxaan kula maseeyaa ma jiro malaha geelow e.

20) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha geela, waxay muujinaysaa muddada dheer ee bisha iyo dheeraadka ah ee geelu biyaha ka qado, iyo calaamadaha markaas oonku ka muujiyo oo bog-yarada ama calool madhnaantu ka mid tahay:-

Waa iyadiiyoo,
Bil maqnaydoo,
beer yarowdaye,
baadi socotiyo,
baylah(338) haw qabin.

21) Xoola-dhaqatada Soomaaliyeed, siiba geeljiruhu waxay rumaysan yihiin in midabyada kala duwan ee geelu leeyahay u kala adkaysan badan yihiin kulka iyo harraadka. Midabka cad ayaa la sheegay inuu ugu adkaysan badan yahay, ka madowna ugu adkaysan liito. Sidaasna waxa caddeynaya heesta hoos ku qoran oo ka mid ah kuwa shubaasha ah:-

Madowgaagiyo,
naag magaalaba,
Waa maqaafoo(339),
Waa ku meelgaadh;
May caskaagiyo,
Wiilki muruqlana,
Waa ma guuraan.

22) Tixaha gabayga ah ee hoos ku qoran oo uu tiriyey Yuusuf Jaamac, waxay ka warramayaan adkaysiga geela, oo muuqda xilliyada xunxun. Maxaa yeelay xilliyada barwaaqada wax walba, dad iyo duunyo iimahoodu waa qarsoonyihiin:-

Jiilaal barraahsaday(340) abaar bedenku qiiqqaayo,
Wax waluba barwaaqada ku roon beri samaadkiiye,
Waxaad tahay Baryareey(341) sidii ceel birqoda e maaxo.

23) Heesta hoos ku qoran oo ka mid ah kuwa shubaasha geela, waxay ka warramaysaa sida geela looga jecel yahay xoolaha kale adkaysiga uu leeyahay dartiis:-

Daaduf(342) waa adhi,
dawlo waa faras,
Dadna waa wiil,
Duunyo waa geel.

24) Gabaygan oo qofkii tiriyey aan cidina noo sheegin, wuxuu isna ku saabsan yahay adkeysiga geelu u leeyahay duruufaha adadag ka dhasha abaaraha, iyo sida xoolaha kale ee adhiga iyo lo'du ka mid yihiin ugu nugul yihiin dhibahaas, uguna hoobtaan:-

Kaliishii Turmaag(343) naga heshee maalka tubayoobay(344),
Ee Xay(345) tallaabada gabay ee adhi tabaaloobay,
Toomaha waxa lagu fadhiyey timacaddow geela,

Takaraale(346) maahee ragguu taabsin dheer yahaye,
Allahayow tolkay kaa ku badi kala tag maalkiiye.

25) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ee geela, waxay caddeynaysaa, xilli kasta oo roob la waayo iyo jiilaal kasta oo dheeraada, halka xoolaha kale ka lee'daan ama caata la luudaan(347) in geelu xooggiisu is dhimin, oo adkaysi u leeyahay duruufahaas qallafsan:-

Dayr la waayiyo,
Diraac dhahataba,
Soo durduri Dugul(348),
Oo dadka ha layn.

26) Dhawrka beyd ee hoos ku qoran oo ka mid ahaa gabay uu tiriyey Yuusuf Cabaade, waxay tilmaan wacan ka bixinayaan adkeysiga geelu u leeyahay abaaraha, iyo muddada dheer ee uu biyaha ka qado.

Nimaan Saqadhiyow geel lahayni, seexan kariwaaye,
Sibi(349) kama arooraan lo' iyo saanyarow adhiye,
Soddon buu qodaa xoola kale sidaa ma yeelaane,
Waa waxa abaaraha so'diyo soolka loo furaye.

27) Heesta hoos ku qoranoo ka mid ah kuwa shubaasha geela, waxay ka warramaysaa sida abaar xun oo kululi oo geelba sigtay, sida adhiga iyo lo'da oo nuglaantooda la yaqaan ay uga soo baxeen:-

Sabaankii dhacay,
Adba sigataye,
Sac nin maaliyo,
Sabool(350) adhi leh,
Sidee uga baxay?

28) Adkaysiga geelu u leeyahay abaaraha xunxun iyo jiilaallada dhaadheer, waxa muujinaya heestan oo kuwa shubaasha ka mid ah. Heestu waxay tilmaan ka bixinaysaa halka xoolaha kale caata iyo cudur la lee'daan, in geela xooggiisa iyo cadkiisu is dhimin.

Werdi(351)-xadhiglaay,
Waaga(352) jiilaal,
Weyrax(353) mooyee,
Weydi kaa dheer.

# III. Waxtarka bulsho ee geela

Sida geelu u leeyahay waxtarka dhaqaale ayuu u leeyahay waxtar bulsho. Guud ahaan, xoolaha oo dhan waa ay wadaagaan ama ka siman yihiin waxtarka dhaqaale. Laakin waxtarka bulsho kama wada sinna. Geelu xoolaha kale wuxuu kaga mudan yahay, waxay u badan yihiin xagga qiimihiisa bulsho. Taas macnaheedu ma aha in aanay xoolaha kale lahayn qiimo bulsho. Mid waliba taagtiis iyo waxtarkiis. Hase yeeshee, qiimaha bulsho ee geela sida uu u muuqdo uma muuqdo qiimaha bulsho ee meesiyada kale.

Kala mudnayntaasina waxay sababtay in dhaqashada geela iyo xoolaha kale la kala jeclaado, oo nin waliba hiyigiisa(354) geliyo inuu geel dhaqdo, si uu bulshada qiimo ugu yeesho. Kii ay sidaasi u meel mari weydana, hanti kasta oo kale ha yeeshee, wuu ogsoon yahay in ninka geela lihi bulshada kaga magac iyo maamuus(355) roon yahay. Maxaa yeelay, sida geelu u soo jiito bulshada, oo ay ugaga baxaan dhibo badan, uma soo jiitaan xoolaha kale. Qiimaha geelu leeyahay darteed, iyo sida isaga wax kasta oo qaali ah loogu helo, dhib kastana lagaga gudbi karo ayaa ka faddishay(356) isaga iyo ninka lehba xoolaha kale oo dhan iyo dadka dhaqda. Taas macnaheedu waxa weeye, bulshada xoola dhaqatada ahi, waa ay ku kala qiimo weyn yihiin nin geel badan leh iyo nin leh adhi badan ama lo badan. Qof walibana waxa lagu qiimeeyaa xoolaha uu dhaqdo iyo tirada ay yihiin. Ninka geela badani, xagga bulshada waa kaga magac weyn yahay ka geel tira yar leh, ama ka lo' yar leh ama adhi dhaqda. Runtiina waxa la odhan karaa ninba, ninka uu ka geel badan yahay ka magac weyn. Ninka geela badan leh, siyaabo badan ayaan looga maarmin oo lagu qiimeeyaa. Garashadiisa iyo dadnimadiisu, xitaa haddey hooseyso, waxa daboola geeliisa badan, oo lagu xisaabtamayo in maalin uu loo baahanayo, oo lagaga gudbayo dhibaatada jirtey.

Sidaa darteed, qiimaha bulsho ee geelu waa kuwo muuqda oo duruufaha iyo degaannada dalku abuureen oo ka sarreysiiyeen qiimaha bulsho ee xoolaha kale oo dhan.

## 1. Tolleey

Manaafacaadka bulsho ee geela waxa ugu muhiimsan wadaagga waxtarkiisa iyo waxyeelladiisaba, oo tolleey(357) loo yaqaan. Manaafacaadkiisa dhaqaale kuma eka qofka ama qoyska leh. Wuxuuse gaadhaa oo shafeecsada dad badan oo xidid iyo xigtoba leh. Ninka leh, magaciisa uun baa raacay. Laakin dheeftiisa kale, cad, caano iyo gaadiidsiba, waa ay gaadhaan xidid iyo xigtoba. Sida waxtarkiisa dad badan u wadaagaan ayaa hawshiisa iyo dhibkiisana loo wadaagaa. Sidaas darteed, geelu waa xoolaha keli ah oo dad badan oo dhalasho ka dhaxayso ama aanay ka dhaxaynin isku xidha oo xidhiidh adag oo bulsho ka dhex sameeya.

Dhaqashada geela oo sideedaba aad u dhib badan kama maaranto bulsho ku gadaaman(358). Taas oo hawlihiisa faraha badan la xiriirta dhaqaddiisa iyo difaaciisaba ka qeyb gasha. Ninna keligii geel ma dhiqi karo, oo wuxuusan keligii ka bixi karin hawlihiisa badan. Had iyo goor,

xilli kasta oo la joogo waxa uu u baahan yahay garab iyo gaashaan. Suugaanta kala duwan ee hoos ku qoran ayaa muujinaysa sida geelu u abuuro xiriir bulsho oo wada manaafacaadsiiyeed.

1) Xikmad ama maahmaah Soomaaliyeed, waxay tiraahdaa "Geel waxa la helay maalin la yidhaahdo ILA". Taas micnaheedu waxa weeye dhaqashada geel waxay ku xidhan tahay garabsi gacmo iyo awood dad kale. Maxaa yeelay hawlihiisa ayaa ka culus wax qof keli ah ama dad yari qaban karo. Wuxuu geel ku dhaqmaa oo aan looga maarmi karin:-

b)- Ila lis ; oo ah in laba qof ugu yaraan lista si caana badan looga helo.

t)- Ila waraabi ; oo rag badan oo xoog iyo adkaysan leh looga maarmi karin, si uu dhakhso ugu cabbo.

j)- Ila kaxee ; oo qof keli ahi ay dhib ku tahay, una baahan dad kale oo la kaxeeya oo meesha la rabo la geeya.

x)- Ila qal ; oo qof keli ah aanu awoodi karin, laakiin laba nin iyo ka badan ay qaban karaan.

kh)- Ila dhac ; oo ah hawl xoog iyo xiribba(359) u baahan oo qof keli ahi aanu si wacan u fulin karin.

d)- Ila dhici ; oo marka la qaado u baahan rag badan oo soo dhiciya.

2) Maahmaah kale ee Soomaaliyeed, waxay tidhaahdaa "Geeljire geela waa wadajirtaa, waana kala jirtaa". Taas macnaheedu waxa weeye in raysimo(360) badan ama kadinno(361) badan oo geeljire ah meel isugu yimaadaan oo dad, dugaag iyo darxumo kalaba ka wada ilaashadaan geela sidii uu yahay xoolo nin keli ah. Isla markaana geelasha la sii kala leeyahay oo geel walba cidda ama qofka lihi uu ka masuul yahay xannaanayntiisa hoose ee raacidda, lisidda iyo oodiddu ka mid tahay, taasina waxay muujinaysaa in geelu ku dhaqmi karo habkaas guud ee wada ilaalin iyo kala ilaalin.

3) Geelu inuu yahay xoolo toleed ee aanu ahayn hanti qofeed oo keli ah, waxa muujinaysa maahmaahda Soomaaliyeed ee tidhaahda "Tol waa hal la qalay". Sida la isu bar-bardhigay tolka iyo hawsha, waxay caddeynaysaa xidhiidhka ka dhexeeya. Kaas oo ah sida aanay u kala maarmin xubnaha hashu, ayaanay u kala maarmin xubnaha tolka ee reerguuraaga Soomaaliyeed.

4) Heesta hoos ku qoran oo ka tirsan kuwa waraabka, waxay si cad u qeexaysaa sida geelu u yahay wax dhib iyo dheefba tol ka dhexeeya:-

Markay tubantay,
Amay kala taal,
Ama lala tago,
Waa tolleeyoo,
Looma kala tago.

5) Saddex sababood oo kala duwan oo muujinaya in geelu yahay xoolo toleed oo dad badani xilna iska saaro, xulquunna(362) ka fisho, ayey

tilmaamaysaa heestan hoos ku qoran. Saddexdaas sababood oo kala ah; Dhalasho, Dhuuni(363) ama hunguri iyo dhaqasho ama lexjeclo(364), waxay ka mid yihiin waxyaalaha isku xidha beelaha xoola dhaqatada ah:-

Ninna dhalashuu,
Kuugu dhabandhigay;
Ninna dhuunuu,
Kuugu dhaadhacay;
Ninna dhaqashuu,
Kuugu dhiidhiyey(365).

6) Dhibka iyo dheefta geelu waa wada socdaan. Xilliyada barwaaqada ee dheeftiisu badan tahay, dad badan hareero deggen oo caanihiisa habacsanaya(366) lama waayo. Xilliyada kululse, ee xoog badan oo difaaca ama waraabiya, in yar oo xilkaas ah mooyaane, dad badan agagaarkiisa lagama helo. Heestan ayaa arrinkan ka warramaysa.

May rasaaseey,
Mee raggeedii,
Marka roob da'o
Ama ramag(367) dhalo,
Soo rucleyn(368) jirey.

7) Heesta hoos ku qoran oo ka mid ah kuwa shubaasha ama waraabinta geela, waxay sheegaysaa in hawlaha geela ay iska kaashadaan dad wada dhashay. Haddii la waayana xididka la kaashado. Taasina waxay caddeynaysaa sida dhaqashada geelu ay isugu xidhto xidid iyo xigtaba:-

Wadaantii weyn,
Walaalaa shuba,
Hadday weydana,
Wiil iyo abtigi.

8) Heestan oo kuwa shubaasha ka mid ah, waxay si cad u sheegeysaa in curiyaheedii geela uu waraabinayey halna ku lahayn, dheeftiisana aanu dhadhamin oo aanu habeenna u hoyan, qoyska geela lehna aanu gabdho ka qabin. Haddana hawshiisa waraabinta ahayd ay qabsatay. Taasina waxay muujinaysaa sida geelu u yahay xoolo dad badan isku xidha:-

Hablo kama qabo,
Halna kuma lihi,
Habeen uma hoyan,
Wuu i helayoo,
Weygu habsaday.

9) Shubaasha oo keli ah ma muujiso sida geelu u yahay xoolo tol ama dad badani tirsado. Heesta hoos ku qorani, waxay si weyn u caddeynaysaa in geelu ku dhaqmi karo tol badan oo guutadooda laga cabsado. Laakiin aanu nabadgelyo ku helayn xero kasta oo adag oo loo dhigo. Sidaas darteed, geel xerediisu waa tol ku gadaaman oo ciddii hungureyn lahaydba ay ka baqdo.

Gaaf(369) madoobow,
Gaan(370) tolkaa iyo,
Guuto mooyee,
Geed ku qarin waa.

10) Xero toleed oo kasta, si wacan geelu uguma dhaqmo. Tolka is jecel ee naftooda u hura helidda ama daafacaadda geela, ayaa agtiisa si wacan geel ugu dhaqmi karaa. Sidaasna waxa caddaynaya heestan:-

Haddaan wada dhalad,
Walaala is-jecel,
Warmaha u dhigan,
Wiirsi(371) mooyee,
Wareer bixi waa.

11) Labadan beyd oo uu tiriyey Cilmi Carab, waxay muujinayaan lahaanshaha iyo dhaqidda geelu in aanay ku ekeen qof iyo qoys keli ah, ee uu u baahan yahay beel dhan oo ka daafacda dad iyo dugaag wixii hungureeya. Hadduu geelu waayo tol uu dugsado, waa nasiib uun sida uu u dhaqmo. Arrinkaas waxa si wacan u qeexaya labadan beyd:-

Xejin waayey geel nimaan tolkii lagu xurmaynayne,
Kol hadday xigtadu kugu yar tahay kuu xasili(372) waaye.

12) Hawsha geelu waxay had iyo goor u baahan tahay dad badan. Qof keli ahi ma dhiqi karo. Sidaas darteed, geel waluba waa inuu yeeshaa dad wada dhashay ama is kaashaday. Sidaasna waxa caddeynaya heesta hoos ku qoran:-

Dhawr walaala ah,
Oo nin wada dhalay,
Dhawratooy Dhebi(373).

13) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ee geela, waxay muujinaysaa in ragga waayeelka ahi aanay ku habboonayn inay qabtaan hawlaha kala duwan ee geela. Qofkiise ay ku kellifto, dani waa seeto. Haddiise ayba dhacdo in la arko oday weyn oo geel waraabinaya waxa loo qaadanayaa in odaygaasi aanu wiilal dhalin ama xigto wacan lahayn. Geelii labadaas waayaana aanu si wacan u dhaqmaynin. Heestan ayaa arrinkaas sheegaysa:-

Gadhcaddaha shubay,
Muu gablamayoo,
Ma gabdhuu dhalay.

14) Dhaqidda wanaagsan ee geela waxa saldhig u ah inuu leeyahay oday taliye ah iyo wiilal badan oo taladiisa oggol. Labadaas hadduu geel helo, waa dhaqmi karaa. Sidaasna waxa caddaynaya heestan:-

Oday wiilalliyo,
Nin walaallaad,
Ku wanaagsantahay.

15) Manaafacaadka geela laga helo ee ay ka mid yihiin cadka, caanaha iyo gaadiidsigu kuma eka oo keli ah qofka leh, laakin waxay si aan hagar lahayn ugu gudbaan dad kale oo ah ehel, qaraabo, deris, marti iyo masaakiin. Waxaana suuragal ah, iyada oo kii lahaa ka baahan yahay in manaafacaadkaas loo gudbiyo hadba dadkii kale ee ag jooga. Taasina waxay muujinaysaa sida nacfiga geel dad badani u wadaagaan. Dhaqankaas oo aan guud ahaan xoolaha kale la wadaagin waxa tilmaan wacan ka bixinaya

beydadka hoos ku qoran oo uu tiriyey Faarax Cali Gammuute, wuxuuna yidhi:-

> Markihii guduudnaa markii Gaydha(374) laga buuxshay,
> Gurboodkiyo(375) nin gaajaysan iyo gacalka mooyaane,
> Anigiyo ninkii ila gudboon waa ka garanuuge(376),
> Afkaygana ma gelin meesha iyo garashaday-diiye.

16) Manaafacaadka dhaqaale iyo bulsho ee geelu hadday yihiin wax aan ku koobnayn qofka ama qoyska mulki(377) ahaan geela iska leh, ee ay u gudbayaan dad badan oo kala duwan oo beesha ka mid ah, waa lama huraan in dhibkiisana la wadaago.

Sida geelu xoolaha uga manaafacaad badan yahay ayuu uga dhib iyo hawl badan yahay. Howlaha qaarkoodna ma aha kuwa uu qaban karo qoyska ama qofka lihi. Hawlahaas oo ay ka mid yihiin shubaasha iyo ka ilaalinta cadowga isku daya inuu dhaco, waxa qaban kara dad badan oo heegan(378) u ah. Geel aan dugsanayn cudud ragna meelna si nabadgelyo leh uguma dhaqmi karo. Maxaa yeelay, kii aan haysani wuxuu raadinayaa xoog iyo xeeladba siduu ku heli lahaa.

Halxiraalahan oo ka mid ah suugaanta maandhugadka(379) ah wuxuu muujinayaa sida rag badani u wadaago dhibka iyo dheefta geela, iyo sida geelu cudud rag la'aanteed aanu u dhaqmi karin, iyo sida geel heliddii ay tahay sababta ugu weyn godobta(380) iyo colaaddu uga dhalato.

Halxiraaluhu wuxuu dadka weydiinayaa:-

"Geel xeradii, rag gogoshii iyo garow(381) iidaankii".

Furihiisuna waa sidan:-

i) Geel xeradii waa guuto rag ah goonyaha(382) ha ka joogto oo dhibkiisa iyo dheeftiisa wadaaga.

ii) Rag gogoshii, waa godob la'aan. Qofkii aan dhagar(383) qabin ee dad iyo duunya toona loo tirinaynin, meel walba si deggen oo nabadgelyo leh ayuu u tegi karaa oo welwel la'aan ku ledi (384) karaa. Laakin qofkii dad dilay, ama duunya dhacay, waxaa had iyo goor, meel kasta ha joogee la socda dambiga uu galay, kaas oo xasilloonida iyo deggenaanta ka luminaya una diidaya in aanu meelna si wacan u ledin.

iii) Garow iidaankii, waxa weeye qof goomoon(385) ama baahan oo la siiyo. Taas oo macnaheedu yahay, reerguuraagu baahi xun oo ka kallifta mooyaane, cadka iyo caanaha xoolaha ayey ka jecel yihiin wax kasta oo la beero. Markiise ay labadaas waayaan, ooy gaajo hayso, waa ku khasban yihiin inay cunaan, waayo waa dani ku keentay.

17) Geelu inuu yahay Tolleey, ama hanti ka dhaxayso dad badan, oo sida ay nacfigiisa u wadaagaan ay waajib ku tahay inay dhibkiisana, nooc kastaba ha ahaadee, u wadaagaan, waxa si wacan u qeexaya maahmaahda hoos ku qoran: Maahmaahdu waxay faraysaa bulshada reerguuraaga ah in aanay faraha ka laaban meel kasta oo ay kula kulmaan hawl geel ku saabsan, xataa haddii ay goobtaas joogaan dad kale oo hawshaas ka xiga dhalasha ahaan ama dhawaansho ahaan. Maxaa yeelay, nacfiga geel kuma koobna in wada dhalatay oo keli ah, ee wuxuu u gudbaa dad kale oo ama la degaan

ah ama daniba u keeni karto. Maahmaahdu waxay tiraahdaa:-

> "Hal laba iyo toban nin dhaxalkeeda kaa xigto,
> dagaalkeeda lama hagrado(386)".

18) Awrta gaadiidka ah ee la rarto, manaafacaadsigoodu kuma koobno qofka ama qoyska leh. Dhaqan ahaan, qofkii baahi adagi u keentaba, looma diido ee waa la siiyaa, si uu ugu guuro oo meel baad leh ama biyo leh ugu tago, ama uu ugu dhaansado. Isa siinta awrta gaadiidka ah oo loo yaqaan "gaadiidcelis", waa xeer aad ugu weyn bulshada reerguuraaga ah oo ilaa hadda si aad ah u sii jira. Waxana halkaas ka muuqanaysa in awrka magaciisa lahaansho qof loo og yahay, nacfigiisana la wadaago. Waana ceeb in loo diido qof soo doontay gaadiid celis. Xataa haddii baahi adagi kellifto, waxa xeerku farayaa in loo qalo marti wax kale loo waayey. Maahmaahdu waxay tiraahdaa:-

> "Gaadiid ninkii ku weydiiya, ama hoggaankiisaa
> la siiyaa, ama hilibkiisa ayaa la siiyaa".

19) Waxa la sheegay in nin shan wiil oo korran lahaa uu saboolay, Shantii wiilba intay ka tageen ayaa midba meel u xoogsi tegay. Dhammaantoodna waxay noqdeen reer miyi xoola-dhaqata ah. Muddo dheer markii ay ka sii maqnaayeen, ayaa mid waliba goonnidiis aabbihii ka codsaday inuu u yimaado oo la dhaqmo. Mid walbana wuxuu ugu warceliyey inuu u iman doono. Wuxuuna ku talagalay odaygu, in waqti roobab da'een oo dhulka la isaga socotayn karo, uu wiilashiisa, midba meesha uu joogo ugu tago.

Kii ugu weynaa ayuu ku hor maray, wuxuuna ugu tegay isaga oo haysta geel fiican. Wuxuuse odaygii wiilkiisii ku yidhi:- Aabbe geel dhaqashadii adiga waa kuu dhib, tolkana waa u dheef ee la ag joog oo nacfigana ha kula qeybsadeen nacabkana ha kaala celiyeene.

Kii Labaad ayuu ku xejiyey, wuxuuna ugu tegey isaga oo ido badan haysta oo aad u ladan. Wuxuuna ku yidhi:- "Aabbe bakhaylnimo ayaad tacabtaye, bananka ayey si wacan ugu dhaqmaane ha ka dheeraan".

Kii Saddexaad ayuu u tegey isaga oo lo' dhaqday oo caanaheedii kala shubshubaya, wuxuuna ku yidhi:- "Barwaaqada ayey xoolo u eg tahaye ciirteeda dadka ha kala fogaan aad wax ka siiside, si sannadka xiga marka aad caydhowdo wax laguu taro".

Kii Afraad buu u tegay oo riyo badan haysta. Isna wuxuu ku yidhi:- "Carruurtaadu caana waayi mayside, laba tog dhexdood la ogow, gudintiyo hangoolkana ha dhigin, geedka raggu ku shirana ha isku tegin".

Kii Shanaad oo farda dhaqdayna, wuxuu ku yidhi "Xoolo ma hayside, xarragaad ag joogtaa. Qayladaase maalin wax lagaga helaaye, yaanay ku dhaafine jaraha ha ka sii deyn".

Talooyinka odaygu jeediyey waxa laga garan karaa in geelu xoolaha kale ka waxtar badan yahay, oo weliba waxtarkiisu aanu ku koobneyn ka leh oo keli ah, ee uu gaadhayo beesha kale. Waxa kaloo ka muuqanayso in geelu si wacan ugu dhaqmi karo meel ay joogaan dad ilaashada oo ka daafaca ciddi hungureysa oo dhan.

Sheeko murtiyeedkuna waxay ina baraysaa in geelu yahay tolleey ama wax dhibkiisa iyo dheeftiisaba dad badani wadaagaan.

20) Heestani waxay sheegaysaa sida nin isaga iyo ciddoodu aanay geel lahayn, aanay uga baxayn baahi iyo baryo. Labadaasina dhibaatadooda ka

sokow, bulshada reerguuraaga ah, waxay uga mid tahay ceebaha ilaah laga magansado:-

Bayla(387) yuusaay,
Nin baryaa ba'ay
An bahdi lahayn.

2. Magta

Magta(388) ama bixinta diyada, waxay ka mid tahay xubnaha waaweyn ee waxtarka bulsho ee geela. Laba beelood ama tol oo reerguuraa ah oo colaadi dhex martay, dadna iska laayey, waxa keli ah oo dhexdooda nabad ka dhalin kara, oo lagu ilaawi karo dakanooyinkii(389) hore oo dhan, waxa weeye mag laga bixiyo dadkii la laayey. Adhiga iyo lo'da, mag looma bixiyo, loomana qaato. Geela oo keli ah ayaa xoola dhaqatadu magta ku kala qaadataa. Nin aad u qiima badnaa oo tolkii ama beeshiisu aad u jeclayd, lana diley, waxa lagu illaawi karaa, waa iyadoo laga bixiyo ugu yaraan boqol halaad oo mag ah.

Bulshada reerguuraaga ah oo dilku aad ugu badan yahay, colaadaha dhex mara waxa tirtiri kara, oo nabadgelyo iyo walaalnnimo abuuri karaa waa bixinta geela, mag ama qaan(390) ha loo qaatee. Ma jiraan xoolo kale oo nabaddaas xidhi kara ama lagu illoobi karo dakanooyinka beeluhu isu tirsanayeen. Qiimahaasna waxa geela siiyey manaafacaadkiisa faraha badan ee xoolaha kale aanay lahayn.

1) Gabayaagii Cabdi-Galayax, oo gabay uu leeyahay kaga faalloonayey sida geela oo mag loo bixiyaa ay heshiis iyo nabadgelyo uga dhex dhisto tolal colloobay oo rag iska laayey, wuxuu yidhi:-

Ninkii se quursadow geelu waa qaniyaddeenniiye,
Rag is-qalay qabiilo is-dishiyo qaan la bixin waayey,
Iyadaa wax lagu qaybsan jirey qadar(391) la mooddiiye,
Maalintii qisaas(392) lagu gasheey Qawl(393) ku furataay,
Qasaare iyo faydaba raggay Qalas ku raacdaaye.

2) Heestan oo lahjadda MAAY ka tirsan, kana mid ah adarta(394) ama amaanta geela, waxay ka warramaysaa rag la dilay, tira kasta oo adhi iyo lo' ah oo mag loo keeno, inaan lagu heshiin karin; Laakin, kolkii magtii ragga dhintay geel laga bixiyo, in nin kasta oo la jeclaa laga samro, oo halkaas nabadi ku dhex marto labadii dhinac ee dadka iska laayey.

Muranka maddi(395) lisla waayo,
Maadhiinka i mariidka,
I maarreega(396) waran,
Maddi ninis(397) qaadiddi,
Miirrane(398) madi'ii la gooyi,
Ragga maroor(399),
Maddii lisla dhiyo(400),
Murraada(401) billaawe bahaato,
Maylan(402) maddi qoroti,
Mariidka(403) marki saarati,
Megel(404) miirle na,
Madi'ii la waayi,

Muslimiin kale,
Maddi koyti(405),
Sabeen mada midow,
Marki la ha hiri,
Maslaho maddi dhiidi,
Hal meg dhawadooy,
Maddi la erri(406),
Minyin yaraha erin,
I mudwiinta(407) loo he,
Meylle(408) maddi la he ka hiri,
Maslaho maddi qaadaddo waayi,
Miid Galool(409),
Qeerma(410) meyshey(411) midooyyi(412),
Meylle maddi la ha ka hiri,
May isla miirsinne?
Maslaho may qaadne?
Miirrane walaalkay,
Adle ma i hilmaansine,
Midow dhaay.

3) Gabayaagii Cumar Xuseen (Isteelliye), oo tiriyey dhawr gabay oo ka warramaya qiimaha iyo waxtarka geela, gabayadiisa mid ka mid ah wuxuu kaga faallooday, sida geela oo mag loo bixiyaa ay samir iyo ammaan uga dhex dhaliso dhinacyadii colaadda xumi ka dhexeysey. Gabaygaas waxa ka mid ahaa:-

Rag saldamay(413) sokeeye is-dilay oo sabada(414) meyd yaallo,
Odayaal wax saysaamayiyo(415), culimo loo saaray,
Sidee baan idhaahdaa talo haddii laysu sooyaamo(416),
Sergo(417) dheer haddii lala dhex galo Seenyo xeradeeda,
Sidka dhalay marcurad suur ahiyo sibir madow qaalin,
Samay uu sidkeedii go'ay iyo Seeri(418) iyo luuli(419),
Sade awrka laga dhaamiyo oo sagal baruuroobay,
Soddon haysku dhimatee haddii ugub(420) la soo sooco,
Samir iyo ammaan baa gacmaha la isu saaraaye.

4) Heestan oo ka mid ah kuwa geela, waxay ka warramaysaa , nin waayeel ah oo magac iyo maamuusba ku leh beeshiisa, kolkii la dilo, sida ay u gashi baxaan kuwii dilay, una samir qaataan kuwii laga dilay markii magtiisa geel lagu baxsho:-

Nin gadh madow leh,
oo la gawracay,
gashi(421) bixiyaay.

5) Gabaygan oo uu tiriyey Askar Cali, wuxuu ka warramayaa rag la dilay, oo godobtood muddo dheer la isu dabo socday, sida geela magta loo bixiyaa u heshiisiiyo labada dhinac oo nabad lagu gam'aa u dhalato:-

Gadhmadoobeyaal iyo haddii geesiyo ad layso,
oo guutaday wada dhasheen adi ku gaadayso,
Geed aad istaagtiyo haddii guri laguu diido,
Goobtaad(422) maraysaba haddii gaas(423) ku daba joogo,
Gashi kaama bixiyaan wax kale qaanta godobeede,

Waxa gogosha kuu dhiga horweyn galab ad dhiibtaaye,
Isagaa ku gaadhsiiya nabad aad ku gama'daaye.

6) Tixahan gabayga ah oo uu tiriyey Cumar Xuseen (Isteelliye), waxay caddaynayaan sida geela magta loo bixiyaa loogu illaawo qof la dilay oo uu u heshiisiiyo labadii qolo ee colaaddu dhex martay:-

Ajal dhimatay oy laba qabiil eedi kala gaadhtay,
Boqol awrku dheer yahay kolkii oodda laga qaado,
Markaasaa ninkii iilka(424) galay lagu illaawaaye.

3. Yaradka

Yaradku waa xoolo laga bixiyo gabadh la guursaday. Qoyska ama reerka gabadha guursaday ayaa xoolaha bixiya oo siiya qoyskii ay gabadhu ka dhalatay. Tirada iyo tayada xoolaha yaradka loo bixiyo waxay ku xidhan tahay haynta qofka wax guursaday iyo kalsoonida labada qoys ka dhaxaysa. Hase yeeshee, dhaqanka reerguuraagu waa in la bixiyo yarad wanaagsan oo sharaf leh, si qoys cusub oo wanaagsani u dhismo, xidhiidh wacan oo xididnimona u dhex maro labada qoys iyo labada beelood ee ay ka kala tirsan yihiin.

Yaradka wanaagsani, ayay qabaan reerguuraaga xooladhaqatada Soomaaliyeed, waa geel wanaagsan tiro ahaan iyo tayo ahaan oo la siiyo qoyska inanta. Yaradka wanaagsan ee geela ah ee la bixiyo wuxuu qiimeeyaa oo sharfaa inanta, qoyskooda iyo beesha qoyskoodu ka tirsan yahay. Muran kuma jiro, sida ay la tahay reerguuraaga, in gabadh yarad sharfeed laga bixiyey ay ka magac iyo maamuus weyn tahay gabadh aan waxba laga bixin, ama laga bixiyey yarad aan fiicnayn.

Yaradka aan fiicnayn waxa loo yaqaan, ka aan geel ahayn, ee lagu bixiyo Lo' ama adhi. Sidaas darteed, Inan kasta oo guurdoon ah iyo qoyskoodu waxay fishaan in yarad wanaagsan oo geel ah uu ka bixiyo qofkii ka guursada. Dhaqankaasina waxa uu caddaynayaa sida guurku qaali ugu yahay reer guuraaga xoola dhaqatada ah. Sidaas awgeed, ninkii geel leh oo weliba quudhi kara ayaa guursan kara gabadh qurux iyo qiimo leh oo kii arkaaba haweysto.

Waxyaalahaas oo dhami waxay muujinayaan sida geela yaradka loo bixiyaa uu yahay arrin kale oo tilmaamaya waxtarka bulsho ee geela. Maxaa yeelay, gabadh xoola kasta oo kale lagu baayacay, waxa si fudud oo sharaf leh loogu heli karaa geel bixintii.

1) Qiimaha iyo waxtarka uu geelu leeyahay darteed, bixintiisa ama xero-ka-saarkiisa waa lagu adag yahay. Waxa geel xerada ka saara oo laga bixiyaa waa wax ka qaalisan, sida gabdhaha la guursanayo. Heesta hoos ku qorani waxay tilmaamaysaa gabadha ku habboon in geel yarad looga bixiyo:-

Naag la gaatiyo,
Gaari(425) xidhantaba,
Adaa gooyoo,
Lagaa geeyaa.

2) Gabadh qaali ah oo nin madax ah oo sharaf leh dhalay, waxa goosan kara nin geeliisa qaaliga ah u huray oo yarad uga baxshay. Sidaas waxa ka marag kacaya gabaygan oo uu tirshay gabyaagii Cabdi-Galayax:-

Suldaan gabadhii sawjadaa gobta ah saxarladaan dooni,
Sabcatacashar inantii jirtoo timaha saydhaysa,
Waxaan sahal isaga qaadan karo, Suubey adigaa leh.

3) Heestani waxay caddaynaysaa gabadhii geel loo quudho laga bixiyaa, in aanay ahayn gabadh caadi ah, laakinse ay tahay mid qoys wacanna ka dhalatay, qiimo dheeraad ahna leh:-

Baari(426) gabadhii,
Laga bixiyaa,
Waa mid baasoo,
Waa mid boqor dhalay.

4) Gabaygan oo uu tirshay Cabdi-Galayax, wuxuu isna ka warramayaa in gabadh kasta oo qaali ah oo qoyskoodu ku fara adag yahay, in uu fudeyd ku heli karo ninkii yarad uga bixiya geela rag wada jecel yahay:-

Naagaha middii quruxsan ee qaali lagu sheego,
Amuu aabbaheed qarinjiroo qawlad lagu oodo,
Sahal buu u qaataa ninkii qaalmo bixiyaaye.

5) Heestan oo ka tirsan lahjadda "MAAY", waxay ka faalloonaysaa gabadh qurux leh oo qaali ah, oo lo', adhi iyo lacagba lagu baayacay oo lagu waayey, sida fudud ee uu u heli karo ninkii ka bixiya geela qaaliga ah.

Geberti baar la taawiye(427),
Baalliye(428) la ka dhawaadi waayi,
Baftahaan(429) i eddaayti,
Bilbil(430) wiinti loo he i,
Baryaraaga erin,
Baalliyo lanki roogi,
Boodka(431) lala beri,
Beesaleyna beyntin la erri,
Baroor anoo niin dirna,
Baroor anoo niin dirna,
Baar midow,
Bidhaan fayllahey,
Ballan adi iin ku goyti,
Boyddiyeey(432) iin barshiidi,
Boqolba sheegatoo,
Baarqabsho in ka daraay.

6) Heestani waxay caddaynaysaa in gabdhaha kuwa ugu qiimo badan ee u qalma in geel laga bixiyo, aanu hungureyn karin wiil muddayac(433) ah oo aan u go'doomin geel dhaqashadii:-

Qaalma diircada,
Oo duqii dhalay,

Wiil an daba gelin,
Doorka(434) naagood,
Dumaal(435) mooyee,
Doonis kuba waa.

7) Heestanina waxay muujinaysaa qiimaha geelu leeyahay darteed, in aan laga bixin karin gabadh baali ah oo uskag iyo wasakh badan:-

Naag aan siigada,
Ka sii simanoo,
Sariir dheer iyo,
Salli ka lahayn,
Anna kuma siin,
Adna kuma samid.

8) Heestani, iyana waxay muujinaysaa ninka geela lexjecladiisu ku adagtahay, hadduu guurba haweysto, naagaha aanu ka bixin karin ee aan u qalmin in geel yarad looga bixiyo:-

Gosol(436) geenyooy,
Naag aan gob ahayn,
Garoob(437) laba dhala,
Gashaanti(438) cirroole,
Kaama geyn karo.

9) Heestan oo ka mid ah kuwa geela, waxay ka warramaysaa nin lexjeclada geelu aad ugu dheereyd oo aan weli guursan, inuu goostay inuu guursado oo geel yarad u bixiyo, si uu goblanka uga baxo, koluu gabadhna dhalo:-

Good(439) habbooneey,
Goblan waa belo,
Bal an guursado,
Kulaan gabadh dhalo.

10) Gabaygan hoos ku qoran oo uu tiriyey Askar Cali, wuxuu ka warramayaa sida geela loogu helo gabadh kasta oo qaali ah:-

Gadhkaan weli ku marin adiga oo giijey cududdaada,
Guur haddaad u xiisto(440) oo gabadhi kuu laacdo,
Oo gaar tashiga kii ahaa suurageli waayo,
Waxaad gaafwareegtoo(441) in badan aad galgalatooba,
Inaad guurti kulantaan haddii lagu geyeysiiyo(442),
Oo gole la maageero(443) ooy gobi ku xaajooto,
Guul waxa ku gaadhsiiya iyo sharafi waa geele.

11) Labadan beyd ee hoos ku qoran oo uu tiriyey Xiireey Jaamac, waxay ka warramayaan in gabadh kasta oo la koolkooliyo, aabbaheed damacsan yahay inuu geel ka qaato marka la guursado:-

Kinsiyeey(444) nin kadin geel leh baan kuu kobcinayaaye,
Waxaan dhiisha(445) kooxda ugu shubaa waa kalgacalkaaye.

12) Gabaygan oo uu tiriyey Cilmi Carab, wuxuu ka warramayaa in inanta habla oo dhan u sidata, oo ka soo dhalaashay waajibaadkii gabadhi lahayd

oo idil uu heli karo nin geel yarad uga bixiyey, sidaas darteedna habboontahay in geela si wacan loo dhaqaaleeyo:-

Inan toosan oo aan gaabni lagu tilmaamaynin,
Dhexduna taako ay leegtohoo toobin(446) yahay naasku,
Oo timaha labadeeda garab tahan(447) la dhaafsiiyey,
Tafeennadana(448) aan dhuubnayn oo taagan tahay qoortu,
Tukhnina(449) ay yihiin madow dibnuhu, tay(450) ma ay noqone,
Ay teedsan yihiin aan ilkaha laga tabaalaynin,
Tiriig midabki-leeyeey midaan baalinnimo taaban,
Oo aan tafuu(451) kala qubnayn toobka(452) ay sidato,
Oo tacab haween iyo farsamo taabka loo geliyey,
Tallaabada midaad ugu bogtoo uu rag wada toyday,
Tolka iyo miday derisyadii uga tudheen ceebta,
Oo aan talada waalidkeed kala tageyn waana,
Oo tiirisoon hooyadeed tacab khasaaraynin,
Oo Tawlan(453) loo bixyey oo qurux la tiicaysa(454),
Aan tegin cayaaraha gabdhuhu tumanayaan leylka,
Oo uu ninkii tamar yaraa taabi kari waayey,
Oo tira ku soo hoysa oon adhi tosoobeynin(455),
Oo toban da'deeduna malaa ay toddoba dhaaftay,
Toga(456) iyo waxaa lagu helaa Teeyo sidigteede,
Ma tixgeliyo kii dhalay ninkaan soo hor tubin geele,
Maandhow tabaalada ku dhawr daaqna yuu tabanin(457).

13) Labadan beyd oo uu tiriyey Axmed Caynoosh, waxay ka warramayaan gabadh qaali ah oo qof xoola yari goosan kari waayey, inuu si dhib yar oo weliba sharaf leh uu u helo ninkii geel ka bixiya:-

Taaniga(458) adduun yari qofkuu taabi kari waayo,
Tabantaabo(459) meher loogu xidho Teeyoy adigaa leh.

14) Gabdhaha qurux iyo qiimaha sheeggan leh, waxyaalaha lagu helo waxa ugu muhiimsani waa geela. Ceeb ama iin kasta oo ninka gabadha doonayaa uu leeyahayna waa qarsoomi kartaa ama lama tixgelinayo haddii uu geel ka bixiyo. Taasina waxay muujinaysaa qiimaha geela. Hees cayaareedkani waxay si cad u muujinaysaa sida iimaha ragga geela lihi aan loo tixgelin kolkaa ay rabaan inay gabadh guursadaan:-

Waa gaaban yahay mooyee
Geel ma leh ma lagu yidhi,
Waa foolxun yahay mooyee,
Waa fulay ma lagu yidhi.

## 4. Magaca iyo Sharafta

Bulshada xoola dhaqatada ahi, waxay rumeysan tahay ninkii yeesha kadin geel ah, oo boqol halaad ama ka badan uu u gaadho, inuu hodan yahay. Sida ay u kala geel badan yihiin ayey u kala hodansan yihiin.

Helidda ama lahaanshaha boqol halaad ama ka badan ma aha arrin fudud. Sida heliddiisu u adag tahay ayaa hayntiisa ama dhiqiddiisu u dhib badan tahay. Si kasta ha ku helee, ninkii geel badan lihi, beeshiisa

magac iyo maamuus weyn ayuu ku leeyahay. Lahaanshaha geela badanina, bulshada xoola dhaqatada ah dhexdeeda wuxuu ku yeeshaa cod la qaddariyo, oo hadduu maqan yahay iyo hadduu joogaba lagu xisaabtamo. Qiimahaas qofnnimona waxa siiyey hantidiisa, geela badan ah. Taas oo beesha uu ka tirsan yahay col iyo nabadba aaney ka maarmi karin.

Dadka tirada badan, ee xidid, xigto, sabool, culimo iwm. ah ee had iyo goor aan agtiisa laga waayin, oo ah xil uu beesha kaga gudban yahay darteed, loogama maarmi karo. Haddii beeshiisu rag ka disho beel kale, ninka geela leh lagama maarmo. Maxaa wacay, waxa khasab ah in geeliisa iyo geelasha kale ee beeshaba laga bixiyo magta ragga la laayey. Taasina waa qiimeyn kale oo geelu u soo hooyey.

Lahaanshaha geel badan haddii uu keeno xushmo iyo magac aad loo tixgeliyo, aadna looga dambeeyo, oo mararka qaarkood arrin uu ka maqan yahay aan go'aan laga gaadhi karin, waa lagama maarmaan nin waliba inuu raadiyo siduu geel u yeelan lahaa. Ragga geela hodanka ku ah, sida badan, qab(460) iyo is-weyneyn ay la hagoogtaan ayaa hantidaasi ku abuurtaa. Waxaana dhacda inuu dadka kale ka faano ama mararka qaarkood ku adyadoodo(461). Dhaliil kasta oo uu yeeshona, waxa daboola hantidiisa waqti kasta beeshu u baahi qabto. Waxaana dhacda rag kale oo ka ra'yi iyo talo wanaagsan, in la is hilmaansiiyo, oo ninka geela badan lagu daro ragga xaaja-galka ah. Waxa awooddaas siiyeyna waa lahaanshaha geela, qaaliga ku ah bulshada xoola dhaqatada ah.

1) Tixaha gabayga ah ee hoos ku qoran oon la garanaynin ninkii tiriyey, waxay ka warramaysan dhaqanka iyo awoodda ninka geel badan lihi:-

> Ma isbiday(462) ninkii boqol lahaa, Baasha(463) ma is-mooday,
> Ma ka baanay(464) geedaha intuu badali(465) xaajooday.

2) Gabyaagii Ismaaciil Mire oo wax ka sheegay ninkaan geel lahayn, kuna tilmaamay nin aan sharaf lahayn oo aan hureyn inuu ka shaqeeyo hawlo la liido, wuxuu gabay ku yidhi:-

> Ninkaan Shiriyo(466) Heemaal(467) lahayn sharaf ka dheeraaye,
> Karuur shawleh caanaha Shamaal(468) looma soo shuba e,
> Shacabkana(469) ma dhaafo oo badduu shabag ku tuurtaaye,
> Shuqulka gaalka kama maarmo oo shaahu kariyaaye.

3) Cabdi-Galayax oo faalleeyey qabka iyo isla-weynida nin kadin geel ahi xero uga buuxo oo marti iyo mudanaba caanihiisii ka bateen, wuxuu yidhi:-

> Markay xerada qooqaarka(470) weyn Qadow(471) ka reemayso,
> Ammaan ubadka qooraansadiyo awrka lagu qooqsho,
> Ama duul qariibiyo martida Qaabbil(472) lagu sooro,
> Qosol iyo hagoog baan maryaha qam isku siiyaaye.

4) Dhaqashada xooluhu waa ka siman yihiin magaca iyo manfaca. Hase yeeshee, sida ay manfaca u kala bursadaan ayey magacana u kala bursadaan. Qof walbana magaciisu bulsho wuxuu ku xiran yahay dadnnimadiisa ka sokow, hadba xoolaha uu leeyahay nooc ahaan iyo tiro ahaanba.

Marka la qiimeeyo xoola-dhaqatadana, waxa loo kala qeybiyaa sidan:- Geeljir waa nin, Lo'jir waa nin barkii, Adhijirna nin ba ma aha.

**(i) Geel-jiraha,** waxa loo yaqaan nin rag ah oo meel mar ah oo xumo iyo samaba rag wax la qeybsan kara. Kaalintaas sharafta lehna wuxuu ku gaaray dhaqashada geela oo ku barbaarisay, bartayna adadayg, geesinnimo, dulqaad iyo deeqsinnimo aanay kuwa kale lahayn.

**(ii) Lo'jirka,** waxa loo yaqaan nin barkii. Qiimeyntaasna waxa siiyey lo'da uu dhaqdo oo ku barbaarisa nugeyl, jilayc iyo dhabcaalnimo.

**(iii) Adhijirka,** waxa loo yaqaan in aanu ninba ahayn, maxaa yeelay, adhi dhaqiddiis shaqa rageedba ma aha ee waa shaqo dumar. Qiimeyntaasuna waxay muujinaysaa sharafta iyo magaca uu bulshada dhexdeeda ku leeyahay ninka geela dhaqda.

# IV. Dhaqashada geela

Waxtarka dhaqaale iyo bulsho ee geelu leeyahay darteed, ayaa qof kasta iyo qoys kasta oo reer-guuraa ah ku jeclaaday geela, kuna dadaalaa sidii uu weliba tiro badan uga yeelan lahaa. Waxaynna qabeen in raaskaan geel fadhiyin, kala dhiman tahay sharaftiisu, noloshiisuna aanay hureynin(473) qaxar iyo qalalaase(474). Xalaal iyo xaaraan, si kastaba ha ku xero galo e, wuxuu qof waliba waajib iskaga dhigay sidii uu ku hantiyi lahaa.

Jacaylka loo qabay geel lahaanshihii iyo dhaqashadii kuma koobneyn qofkii aan lahayn ee waa laga sinnaa. Kii aanu xeradiisa ku jirin, baadigoobkiisa ayuu hayey, kii lahaana wuu ku fara adkaaday. Wuxuuna noqday geelu, hanti qaali ah, heliddiisu dhib tahay, xero-ka-saarkiisuna adag tahay. Qiimahaas loo yeelay, raacdadiisa loo wada guntaday, iyo sida uu ugu fara adkaa kii godolkiisa iyo gaadiidkiisa wax ka hayey, waxay ahayd xaajo dabooshay qiimaha iyo qaayaha xoolaha kale, isagana ka dhigtay meesiga keli ah ee hunguriga lagu wada hayey. Waxa la sheegay, habaarka ugu weyni inuu ahaa "Geel iyo wiilba beel", ducada ugu weynina ahayd "Geel iyo wiilba ilaahay ku sii".

## 1. Geel jacaylka

Geel jacaylku waa ku weyn yahay qof kasta oo Soomaali ah oo xoola dhaqato reer guuraa ah. Heliddiisa oo keli ah ma jecla, ee hayntiisa ayuu aad u jecel yahay. Waana ku adag tahay in uu xeradiisa ka saaro. Si kasta oo qof uu jecel yahay ama ka xishooda u weydiiyo, kama suurowdo inuu si hawl yar uu u siiyo. Dadka caynkaas ah ee bixinta geelu ku adag tahay, mararka qaarkood, waxa lagu tilmaamaa in ay dhabcaallo yihiin. Suugaanta muujisa geel jecaylkana waxa ka mid ah:-

1) Waxyaalaha muujiya sida reerguuraaga soomaaliyeed u jecel yahay dhaqashada geela, waxa ka mid ah maahmaahda tidhaahda "Geel adiguna ha bixin, nin lehna ha u dayn", taas oo looga jeedo, haddii aad geel leedahay, ku fara adeyg, oo cidna wax ha ka siin. Geelii aadan lahayna, xumo iyo samaba ku dadaal sidii aad u hantiyi lahayd.

2) Gabayaagii Xaaji Aadan Af-qallooc, oo muujinayey jacaylka uu u qabay lahaanshaha iyo dhaqashada geela, gabay uu tiriyey wuxuu ku yidhi:-

> Badda jiidhayaa iyo berri jaanta(475) mariyaaba,
> Wallee geel jacaylkaan u qabo waw jirrabi(476) ruuxa.

3) Lexjeclada geela loo lahaa waxa kaloo muujinaya maahmaahda tidhaahda "Nimaan bakhtiinin ma baxnaanin(477)". Ujeeddaduna waxa weeye, jacaylka loo qabo geel darteed, markuu jirrado ee dhuunyeedhiyo(478), ee ninkii lahaa u quudhi waayo inuu gawraco, ayuu siduu u dhawrayo oo u sugayo in Ilaahay caafimaad u siiyo, ayuu ku bakhtiyaa, oo nolosheedii daaye, hilibkeediina waayaa.

4) Iyada oo la wada ogsoon yahay sida reer-guuraaga soomaaliyeed u aaminsan yihiin diinta Islaamka, iyo sida ay u ixtiraamaan qawaaniinteeda iyo rukunmmadeeda, ayaa mararka qaarkood waxaa dhacda in dad lexajaclada geelu ku dheer tahay, meel fogna kaga mudan tahay, gudashada waajibaadka diiniga ah (sida tukashada salaadda) iyo hawlaha geela inay hormariyaan hawsha geela. Sidaasna waxaa caddaynaya heesta hoos ku qoran, oo sheegeysa waqtiyada qaarkood salaadaha la tukado in la qalleeyo haddii ay la kulanto hawlaha geela:-

Salaaddiyo Suub,
Salaadaha daran,
Suub hadday timid,
Salaad la qallee,

5) Marka neef geelu wax tabanayo oo uu harraado, gaajoodo ama dhashiisa waayo, ee tiiraanyada(479) iyo goohu(480) ka baxo, ninka lihi wuu la tiiraanyoodaa oo calooshiisu waxay noqotaa marba caloosha geelu sida ay tahay. Arrinkaas oo muujinaya jacaylka geela loo qabo, waxaa caddeynaya heestan:-

Xalaan Goodeey,
Goohi kaa baxay,
Gam'i waayoo,
Xalaan gogoshii,
Gaar isaga dhigay.

6) Waxaynnu hore u soo sheegnay in bixinta geelu adagtahay dhibaatada laga maro heliddiisa darteed. Sidaana waxa caddeynaya heestan:-

Maydho weetooy(481),
Mulki nin u dhaqay,
Meel xunse u maray,
Maal uu u bixiyiyo,
Muquuno u diid.

7) Deeqda oo ka mid ah qiyamka(482) reerguuraaga soomaaliyeed, aad u qaddariyo, ayey haddana ku adag yihiin bixinta geela. Taas oo caddeynaysa sida loo jecel yahay, waxa tilmaamaya gabaygan uu tiriyey Xaashi Cali (Indhoole):-

Xidid kuugu rooniyo walaal ku xiga mooyaane,
Xakowdaadu(483) waagay go'dee lagu xabaalaayo,
Xawadaada wiilkii ah oo ku xusi mooyaane,
Xisaab li'i ragow yuu ku bixin geel xaqi cuslaaye.

8) Bixinta geela sida ay u adkayd, waxa kaloo muujinaya gabaygan hoos ku qoran oo uu tiriyey Samatar Baxnaan. Gabaygu wuxuu sheegayaa in adhiga iyo lo'da ay ku fiican tahay in lagu baxsho qaan ama deeq ahaan loo bixiyo, geelse bixinta laga daayo oo nafta lagu ilaasho.

Adhi iyo Lo'baa lagu baxshaa aana kuu timide,
Aarlaaga geela ah naftaa lagu ilaashaaye,
Kolay aabbahaa tahay nin kale looma aamino e.

9) Guurka iyo yaradka geela ah oo reerguuraaga qiimo weyn u leh, ayaa Cabdi Galayax gabay uu tiriyey ku sheegay in uu guurba ku daayey si aanu geel yarad ugu bixin. Taasina waxay caddeynaysaa sida Cabdi u jeclaa geela, wuxuuna yidhi:-

Barbaarnimo ma fiicnee waxaan buul u geli waayey,
Oo aan dumarka baal uga maroo baarid(484) iga yeelay,
Basar(485) kale ma fiirine hashaan baaji leeyahaye,
Barooddada(486) ninkii ogi dad waa kaga bakheylaaye.

10) Heestani waxay muujinaysaa, lexjeclada geela darteed, sida ninka lihi guurba isaga daayey oo tacabkiisa oo keli ah uu u go'doomay:-

Gobow baan ahay,
Oo ma gada(487) yari,
Oo ma guursado,
Yaadan gabin(488) baan,
Guur isaga nacay.

11) Geelu jeclaan keli ah laguma helo, kumana dhaqmo. Heliddiisuna ma fududa, dhaqiddiisuna ma hawl yara. Sidaasna waxa ka marag ah maammaahda Soomaaliyeed ee tidhaahda "Caana geel ninkii dhaweystaa waa ka dheeraadaan". Macnuhuna waxaa weeye, ninkii fududeysta dhaqidda iyo xannaanada geela, wuxuu mutaa geel la'aan. Geel la'aanina waa caana la'aan. Caano la'aannina waa nolol la'aan.

12) Manaafacaadkiisa bulsho iyo dhaqaale, iyo adkeysiga uu u leeyahay dhibaatooyinka ka dhasha dabiicadda dalka ayaa geela lagu jecel yahay. Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha, waxay tilmaamaysaa jeceylka loo qabo geela iyo sida uu wed maahaane uu wax kale oo dhan uga adkaaday:-

Weynidaayoo,
Wanaagsanidaa,
Waxse kuu dhiman,
Adoo waaroo(489),
An wedba lahayn..

13) Jeclaanta loo qabo geela darteed, qofkii aan lahayni ama haysani ma joogi karo. Subax iyo galabba waa inuu socdaa, si uu ku helo. Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ayaa arrinkaas si cad u qeexaysa:-

Geel nin waayaa,
Gundhay(490) oo gubay,
Oo galba carrow.

14) Si kasta ha lagu helee, beesha xoola dhaqatada ahi waxay maanka ku haysaa gaar ahaan kuwa aan geel lahayni, in geel mulkidood noqdo. Ninka geesiga ahi, geerida horteed, kama wahsado, kamana dhawrsado meeshii uu geel heliddii u mari karo. Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ah ayaa arrinkaas qeexaysa:-

Goodey geesigu,
Geerida horteed,
Gaadasheeyoo(491),
Geel la'aan diid.

15) Gabaygan oo uu tiriyey Ayjeex Cali Beenaley, wuxuu ka warramayaa jacaylka uu u hayo geel dartiis, in waliilkiina ku dheh e, aanu qofna geel weydiin karin oo aanu bixin karin:-

Waa waalan yahay geel ninkii wax iga moodaaye,
Waaciidsi(492) aan wax kala helliyo weheshi mooyaane,
Walaalnnimo ninkii doonayow haba i weydiinin.

16) Cabdi-Galayax, geeraar uu kaga faallooday dhaqidda geela, oo beydadka hoos ku qoran ka mid yihiin, waxay ka warramayaan jeclaanta uu geela u hayo, iyo gaar ahaan sida uu nirgihiisa u xannaaneeyo ama ula dhaqmo. Wuxuuna yiri:-

Nirgaheeda Dhammaysna(493),
Carruur baan ka dhigtaayoo,
Dhabtayday ku gam'aanoo,
Hadba waan dhunkadaa.

17) Sida geela loo jecel yahay darteed, iyo si aanu qofka leh gacantiisa uga bixin ayaa dad badan ku guur beeleen. Maxaa yeelay, qofkii gabadh haweystaa, waa inuu geel ka bixiyaa. Arrinkaas, Cabdi-Galayax ayaa geeraar uu tiriyey kaga warramay oo yidhi:-

Intaan dhaafsaday naagana,
Kama dhiibin haweenoo,
Dhacaas wawga tudhaa.

18) Geela waxa xoolaha kale ka kor mariyey manaafacaadkiisa badan iyo adkaysigiisa. Qiimahaasina wuxuu gaarsiiyey in lagu xiriiriyo kartida badan ee raggu leeyahay iyo deeqda Eebbe ee aan waxba lala masayn karin. Maahmaahdanina waxay muujinaysaa qaddarinta iyo jeclaanta loo kala qabo dhammaantood:-

Rabbi iyo Rag iyo geelba waa la tuugaa.

19) Bulshada xoola dhaqatada ahi markii ay u aqoonsatay in geelu yahay saldhigga nololeed ee jiristooda, waxay kaloo u caddaatay in dhibaatada badan ee la xiriirta dhaqashada geela uu ka bixi karo ragga oo keli ah. Maahmaahdani oo is raacinaysa geela iyo ragga adadaygooda, iyo haweenka iyo lo'da nuglaantooda, waxay muujinaysaa in beesha xoola dhaqatada ahi sida ay u jeceshahay ragga si la mid ah loo jecel yahay geela. Maahmaahdu waxay tiraahdaa:-

Abaal raaga rag iyo geel baa leh,
Abaal baaqdana haween iyo lo'baa leh.

20) Jeclaanta geela siyaala badan oo kala duwan ayaa loo muujiyey. Beydadka hoos ku qoran oo ka mid ah masafo Sayid Maxamed tiriyey, waxay tilmaamayaan hasha geela ah, siiba ta markaas irmaan oo lagu masaalay hooyo, iyo ratiga oo laga dhigay halbawlaha dhiigga. Taas oo looga jeedo, in sida aan hooyada iyo halbawlaha looga maarmin, ayaa geelana looga maarmin. Masafadu waxay tiri:-

Hali waa nin hooya leh, dad ninkii ka haystow,
Awrna waa halbawlaha naftu ka hataq leedahay.

21) Gabaygan hoos ku qoran oo uu tiriyey Cabdi Aw Aadan, waxuu si aad ah u sheegayaa sida geela loo jecel yahay. Waxuuna tilmaamayaa in geelu, wedka baajintiisa mooyee, uu wax kale oo dhan waxtar ka yahay. Gabyaagu isaga oo waxtarka badan ee geelu leeyahay barbardhigaya mar wadnaha jidhka, marna dhabarka jidhka, marna waalid dhallaankiisa u roon, wuxuu yidhi:-

Allaa waaxidee geelu waa wadanaheenniiye,
Waa waafigii dhabarka iyo waaxyaha kugu yaalle,
Waa waalid kuu roon markaad wax iska tawdaaye(494),
Wed ma baajee sida kaluu kuu waxtarayaaye.

22) Geela laga dhaafo dayaca iyo darxumada oo xannaanadiisa loo hagar baxo, shaki kuma jiro inuu si wacan u dhaqmayo. Gabaygan hoos ku qoran oo uu tiriyey Cadde Samakaab, wuxuu ka warramayaa geela xannaanada wacan hela sida dhashiisu u korto, ilaa la shafeecsado:-

Gugey dhalatay geed,lagu xidhyeey, xadhigga loo gaabi,
Gugii xigeyna goofaadho(495) badan, maraqa googoyso,
Gugii xigeyna uur gulun-gulcooy, geelasha hormeerto,
Gugii xigeyna gaaleemo(496) weyn dhogorta qaar gooyso,
Gugii xigeyna awr garabsatooy gooja la hudeeca(497),
Gugii xigeyna gaban loo lisyooy, gaawa laga buuxi.

23) Reerguuraaga Soomaaliyeed ee xoola dhaqatada ahi, dhammaantood waa muslimiin si aad ah u rumeysan diinta islaamka ah. Xushmadeeda, iyo ilaalinteedana aad bay isaga xilsaaraan. Hase yeeshee aad bay u adagtahay inuu shanta waqti tukado qof xoola-dhaqata ah oo ka dheer dhulka biyaha leh. Gaar ahaan, qof geel la joogaa, tukashadu waa adagtahay sida ay ugu suuragasho.

Waxaa la sheegay in laba nin walaala ahi geel wada raaci jireen, oo midkood tukan jiray, ka kalena aanu tukan jirin. Kii aan tukan jirin ayaa dhibsaday tukashada walaalkii, gaar ahaan maqribkii, oo ah waqtiga geelu ugu hawl badan yahay. Lexjeclada uu geela u leeyahay darteed, ayuu la adkeysan kari waayey, oo maalin dambe ku yidhi walaalkiis:-

"Walaalow geela salaadda ka daa; oo haddii aadan ka deyneynin
ka daa salaadda maqrib; oo haddii aadan ka daynaynin
ka daa nuunuuda dambe".

Codsigaasi inkasta oo aanu qummanayn shareeco ahaan, wuxuu muujinayaa sida nin tukadaa aanu u bogan karin hawlaha la xiriira xannaanaynta iyo dhiqidda geela. Maxaa yeelay inta badan geel wuxuu si wacan ugu dhaqmi karaa dhul aan biyo ka dhaweyn. Nin biyo ka fogaadayna salaad ka fogaa.

24) Waxtarkiisa faraha badan iyo sida dhibka badan ee lagu helo laguna hayo, waxay khasab ka dhigtay in aad loogu fara adeego, oo bixintiisa qofkii hayaaba ka maago. Gabaygan oo uu tiriyey Xaashi - Indhoole, wuxuu ka warramayaa lexjeclada geelu heerka ay ka joogta, iyo sida qof kasta oo xidid iyo xigtaba leh ama xurmaba mudan, aanu siin karaynin geel. Wuxuuna yidhi:-

Wadaad iyo wiil iyo nimaan waana iga heysan,
Seeddigaa wanaag kaa fisha iyo waafi iyo xoolo,

Ninkii kuu wax celinayaa hal lala wadaagaaye,
Warays(498) nimaan u dhiibaa ma jiro waaxidkayna lehe.

25) Gabyaagii Khaliif Xareed Maxamuud, oo ka mid ahaa dadka sida aadka ah u jeclaa lahaanshaha geela, ayaa gabaygan hoos ku qoran oo uu tiriyey, ka faallooday quruxda geela iyo nacfiga lagu qabo. Gabyaagu isaga oo geela ku tilmaamaya inuu xoolaha kale oo dhan ka sarreeyo, wuxuu yidhi:-

Cagta siman Saruureey(499) indhaha sarinta(500) loo yeelay,
Luqun samaya saabkiyo candhada Eebbe kala seerey,
Afar suul sakaarka iyo miskaha saynta dabadeeda,
Iyo dhegaha siisiiban ee soofaha ad mooddo,
Saabada(501) adduunkoo dhan bay ugu sarraysaaye,
Sac ninkii ku iibshow Allow aanad salaamoobin.

26) Dadka geela jecel waxa u caada ah inay ammaantiisa aad u badiyaan. Yuusuf Cabaade, gabay uu tiriyey, ayuu si weyn ugu soo bandhigay sifaha geel iyo sida xubnaha jidhkiisu u samaysan yihiin. Wuxuuna yidhi:-

Cagta saafan(502) suulkiyo dhegtiyo, sibirta(503) loo yeelay,
Bawdyaha sallaanka u noqdiyo, saydhtankaa dabada,
Maraqsaarka kala soocan iyo kuruska loo saaray,
Mudka(504) siman sakaarkiyo candhada laga salaaxaayo,
Saableyda iyo feedhihiyo samayadaa duudka(505),
Saddexda farood ee duudkiyo summadda loo yeelay,
Qoor samaya dhego soogan(506) iyo madaxa loo saaray,
Sanqaroorka dheer iyo debnaha saanta laga yeelay,
Haddaan gawska saafi u ahayn saac ma gurateene,
Sayruuq la tuuriyo indhuhu waa siraad shidane,
Seedaha adkaadiyo mergiga sarada loo taagay,
Sancadaa Ilaah baa baxshiyo Sulub abuurkeeda,
Kolkay socoto laafyaha Surdhooy(507) saarku ii qabaye.

27) Gabayaagii Qawdhan Ducaale oo geela aad u jeclaa gabay uu tiriyey oo uu ku soo qaaday lexjeclada weyn ee uu hayo geela, isaga oo tilmaan ka bixinaya manaafacaadka, badan ee geelu leeyahay, wuxuu yidhi:-

Ammaanka iyo kuruska ayaa dadkiyo ubadku quutaaye,
Ugubkeeda dhalay baan karuur ka intifaacnaaye,
Allaa igu oge geel nimaan lahayni eel(508) ka bixi waayey.

## 2. Dhaqidda Geela

Geela heliddiisa waxa ka dhib badan hayntiisa. Wuxuu u baahan yahay xannaano badan oo la'aanteed aannu si wacan u dhaqmi karin ama u tarmi karin. Ugu horreyntii waa inuu leeyahay oo dugsanayaa ciidan ama cudud xoog leh oo ka daafacda xoog kasta oo isku daya in uu dhaco. Waa tan labaade, waa inuu leeyahay dadkii ku habboonaa dhaqiddiisa, oo uu ka mid yahay waayeel u arriminayey, barbaartii xoogganeyd ee dad iyo dugaagba ka ilaalinayey; meelaha biyaha leh ka waraabinayey, dhulka daaqa wacan leh geynayey iyo wiilashii kureyada ahaa ee raacayey. Hawlaha muhiimka ah ee la xiriira dhaqidda geela, marka laga reebo arrimaha na-

badgelyo, waxa ugu muhiimsan waraabinta iyo daajinta. Kuwaasina, waxa fulin kara dad xilkas ah oo u heegan ah, oo geela xannaanadiisa mooyee, raaxa kasta iyo dan kasta oo kale iska dhaafay. Arrimahaas suugaanta muujinaysa waxa ka mid ah:-

1) Dhaqidda geela oo dhibo badan loo maro, laba wax ayaa saldhig u ah. Waa mide in geelu leeyahay ama uu wado nin waayeelnnimo iyo waaya-aragnnimoba leh, xilkas ah, xoog iyo caafimaad wacan leh, oo si wacan u yaqaan ugana bixi karo hawlaha geela. Waa ta labaade, waa inuu geelaasi leeyahay rati baarqab ah si wacan loogu xulay tayo ahaan, oo dhal wanaagsan iyo fir wacnaanna loogu reebay geela. Geelii aan labadaas qodob lahayn waa kala dhiman tahay tayada tarantiisu. Sidaas waxaa caddaynaya heestan:-

Haddaan oday dhiqin,
Awrse loo hayn,
Abuur-adageey,
Eebbe mooyiye,
Yaa askumi kara?

2) Dhaqidda iyo xannaanada geela waxaa kale oo ka mid ah in la geeyo dhulka iyo degaannada ku habboon ee uu ka helayo daaq wacan. Heestani waxay ka warrameysaa dhawr degaan oo kala jaad ah oo dadka geela lihi ku kala dhaqaan.

Soddon magacley,
Sagaal midabley,
Siddeed suulley,
Ninba si u dhaqay;
Midkood sibi gee,
Oo surmi u laa;
Ninna sarinkiyo(509),
Siiqda(510) webi geli,
Oo biyaha sii,
Oo sibra caddayd.

3) Heesta hoos ku qoranina waxay ka warrameysaa degaammada ku habboon dhaqidda geela, kaas oo ay leedahay, haddaan lageynin ma joogsado geela.

Xas jadeerliyo(511),
Haddaan xagar(512) jiqa(513),
Looga xero dhigin,
Cuudku(514) ma xasilo.

4) Heestan hoos ku qoran iyana waxay sheegeysaa sida loogu hagar baxo geela oo loo naq-raaciyo waqtiyada xun xun.

Haddaan hiirtiyo(515),
Meel habeennimo,
Hillaac ku onkoday,
Haweys(516) loo dhigin,
Looma hagar bixin.

5) Degaannada ku habboon geel-dhaqidda, haddaan geela la geyn oo weliba si wacan loo daajin, waxaa hubaal ah in dhibaato aanay gafaynin geela. Sidaas waxaa qeexaya heestan:-

Meel mareer(517) laba,
Miyaan lagu mirin(518),
Ammaan mayraca(519),
Lagugu miyirin(520),
Maxaa muruqiyo,
Mudka kaa faqay?

6) Sida ninka geela dhaqdaa u yaqaanno, ayaa geeluna u kala yaqaan dhulka ku habboon iyo dhulka aan ku habbooneyn. Sidaasna, waxa ka marag ah, xasilloonaan la'aanta geela ee meesha aan raalli gelin. Gabaygani wuxuu ka warramayaa nin geel leh oo isla doodaya, isaga oo iska dhigaya in ay la garnaqanayso hal geela ka mid ah, oo sheeganaysa in aan la geyn meeshii ku habbooneyd. Gabaygaas oo uu tiriyey Cawad Raarax, wuxuu yidhi:-

Anigiyo Madiix(521) baa dacwinay, maanta duhurkiiye,
Waxay tidhi, dix(522) iyo ceel xunbaa, diley nafteydiiye,
Waxaan idhi, daryeel waad qabtaa doogse kuma geyne,
Waxay tidhi, daruurahakan da'ay dacalka ii saar e,
Waxaan idhi, Amxaaraa deggan aan innagu deynayne,
Waxay tidhi; dagaal ula tag iyo danana(523) maadhiine(524),
Waxaan idhi, dirays(525) bay sitaan, danab rasaaseede,
Waxay tidhi, Darmaha(526) dhooddiyeed(527) daniba way geyne,
Waxaan idhi, adoo daallan oo diif qabaad tegiye,
Waxay tidhi, dalkaa meel i gee, daayey hadalkiiye,
Waxaan idhi dugsiga Caynabaa ugu dugaal roone,
Waxay tidhi, dugaag baa fadhiya, gabanta deyneyne,
Waxaan idhi, dab baan kaaga shidi, dogobbo(528) waaweyne.

7) Gabayaagii Cabdi-Galayax, gabay dheer oo uu tiriyey, oo ku saabsanaa geela, wuxuu ku soo qaaday sida aannu marna u fududeysan dhaqidda iyo xannaanada geela. Qeybtii ka warrameysay dhawrka siyood ee loo xannaaneeyo geela waa tan:-

Haddaan baawar kama waayayee bila dhaqaaleeyo,
Berrimada caleenta leh haddaan beriba meel geeyo,
Markay balaxsi(529) doontana haddaan dhanaha(530) boobsiiyo,
Bartii uu faran(531) ku yaallana haddaan baalash kaga jiido,
Middii aan dhukaan(532) bido haddaan biimo(533) ku ogaado,
Goortii ay biskootana haddaan bari ka fuud-siiyo,
Haddaan baanto(534) xooluhuba waa badan xumaadaane,
Baadida lumeysa iyo haddaan baylah ka ilaasho,
Bahalkiyo waraabaha haddaan baar ka celinaayo,
Haddaan beytimaal(535) kuma gashee buro xannaaneeyo,
Inay bulanto(536) mooyee haddii bixinta loo diido,
Haddaan naago kuma baayacee baali kaga dhiibin,
Barbaarnimiyo doobnimo haddaan baaqi ku ahaado,
Anigoo basaas qaba haddaan bowdka(537) hore seexdo,
Haddii aanan bashlaynine xarrago baal isaga tuuro,
Boqoole iyo guuraba haddaan baadi la ahaado.

8) Dayaca ama u hagar bixid la'aanta ayaa ka mid ah arrimaha kala dhantaala dhaqidda iyo xannaanada geela. Dayacaasna waxa keeno maaweelo iyo sheeko jeclaysi. Wiilka geela la jooga hadduu maaweelo ku jeesto ama hablo la sheekaysto, shaki kuma jiro in geelii dayacmayo. Wiil ama nin barta sheekada haweenka ama gurya joogga, ma dhaqo geel, ee wuu lumiyaa. Heestani, waxay si gaar ah u muujinaysaa in aannu geel dhiqi karin wiil jecel sheekada hablaha:

Xaluska hablaha,
Wiil xantoobsaday(538),
Oo xarrago jecel,
Wallee Xiiseey(539)
Kaama dhamo xoor.

9) Heestan oo la xiriirta dayacidda geela, waxay sheegeysaa sida aanu geel u dhiqi karin wiilka jecel gurya-joogga iyo sheekada hablaha:-

Wiil malaasta(540) cad,
Maalin weyntii,
Inta loo milay(541),
Hablo u mariyeen,
Wallee Minaweey(542),
Kaama maarmine,
Waa u maan(543) xumo.

10) Maaweelo jacaylka oo iyana ka mid ah waxyaalaha geela lagu dayaco ayey heestani ku saabsan tahay:-

Wiil caweyskii,
Kaa cayaar guday,
Adna ciil iyo,
Cadhuu kuu dilay,
Asna ceeb iyo,
Caydh u halis noqoy.

11) Shaxda iyo shirar tegiddu, waxay ka mid yihiin waxyaalaha geelu ku dayacmo. Wiilkii labadaas caadeystaana, geel la'aan ayuu ku dambeeyaa. Sidaas waxaa caddeynaya heestan:-

Wiil Shabaaboo,
Shax la jeexiyo,
Shirka kaa tegey,
Caana shawliyo,
Kaama shubo xoor.

12) Xannaanada iyo dhaqidda geelu u baahan yahay aad bay u tiro badan tahay, waxana ka mid ah ka ilaalinta in aanu daaqin dhul ragaad iyo cagaag leh. Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ayaa arrinkaas tilmaamaysa.

Runtu siday tahay,
Ragaad(544) meelliyo,
Rafan(545) kuma galo.

13) Hawlaha badan ee la xiriira xannaanaynta geela, kama bixi karo, amase si wacan uma gudan karo nin haween qaba oo guriga iska hadhsada iyo wiil hooyadii ka ilaalinayso dhibaha. Labadaas oo aan ka maarmin guryajoogidda, si wacan uma dhaqi karaan geel. Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ayaa arrinkaas caddaynaysa:-

Hooyo wiilliyo,
Nin haween qaba,
Oo hadhsaday guri,
Kuuma hagar bixin.

14) Daajinta geelu waxay badanaa ku habboon tahay dhulka hawdka ah ee uu ka heli karo dhir dhaadheer oo uu laaco oo uu jecel yahay. Heestan ayaana arrinkaas tilmaamaysa:-

Markuu himirtiyo(546),
Hareeriga(547) cuno,
Habeedin(548) ogeey.

15) Xannaaneynta geela oo hawl culus ah kama bixi karaan wadaad, oday iyo wiilal da'doodu yar tahay. Waxase ka bixi kara rag xoog iyo waaya-aragba leh. Heestan ayaa arrinkaas ka warramaysa:-

Wadaad weynoo,
Waayo jiray iyo,
Wiil yar kuuma galo.

16) Dan oo ku khasabta mooyee, ma habboona in geela lagu dhaqo ama la-gu hayo dhulka reeruhu daaqaan ee adhiga iyo daaqsintu ku badato. Si-daasna waxa caddeynaya heestan:-

Meesha adhigiyo,
Awrtu daaqaan,
Anaa ku ogoo,
Ayro(549) kuma samid.

17) Dhulka ku habboon daaqidda, ee uu cayil iyo caafimaadba ka heli karo gu' iyo jiilaalba, waxa si wacan u tilmaamaya gabayga hoos ku qo-ran oo uu tiriyey Cali Maxamed Faarax:-

Anigoo carruuriyo anoo guudka ka cirroobay,
Caweereey(550) ma jirin meel kalaan ciidan u ahaaye,
Cidna kuma aaminin intaan caajis jiifsadaye,
Cuunkiyo(551) darmaha Dhooddiyeed ciidda iyo Hawdka,
Caleen laacday meel caws lahoo aad bur ka cantuugto,
Cosob meel leh dhaaxaan ku miray goor cawaysinahe,
Weligaaba meel adhi ka ciyey doog kamaad cunine,
Cagna weligaa maad dhigin arlada meel cagaag(552) badane,
Caska waaga dhaaxaan wax badan ceelka kuu shubaye.

18) Geel iskama dhaqmo ee wuxuu ku dhaqmaa idan Eebbe, iyo awood rag-eed oo habeen iyo dharaar heegan u ah hawlihiisa faraha badan ee wada halista ah. Sidaasna waxuu muujinaya maahmaahdan:-

"Hali nin iyo Eebbe ayey ku dhaqantaa".

19) Dabiicadaha adag ee dalka ka jiraa waxay xoola dhaqatada soomaaliyeed bareen in qoyskii ama qofkii aan geel lahayni noloshiisu weligeed halis ku jirto. Ninkii aan markaas geel tabcin, oo markuu dhintona aan ubadkiisu geel ka dhaxlinna, in uu adduunka ceeb kaga tegey, ubadkiisana kaga tegey baahi dili karta. Sidaas waxa caddeynaya maahmaahdan:-

"Nimaan wiilkiisa hal uga dhimani,
geeridiisaa waa ogaa"...

20) Awrta baarqabka ah ee geela loo reebo, qeyb weyn ayuu ku leeyahay dhaqidda iyo taranta geela. Xagga tayada dhasha ka sokow, waxa looga baahan yahay awrka inuu geela dhaqaaleeyo oo aanu dhibin. Sidaasna waxa muujinaya heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha:-

Awrka riixaa,
Asaan riminini,
Rafan meelliyo,
Ragaad uga daran.

21) Dhaqidda ama daajinta geelu, waxay ku habboon tahay dhulka cidlada ah ee aan reeruhu deggeneyn, ee dugaagga iyo ugaadhta oo keli ah ku nool yihiin. Dhulkaas ayuu badanaa ka heli karaa daaqa ku wacan. Joogista dhulka noocaas ahna waxa muujinaya heestan:-

Sidii bahalkii,
Baabusha lahaa,
Oo wax badan jiray,
Meel bannaan iyo,
Boodh is legeddooy.

22) Dhul wacan oo deegaan iyo biyo leh oo keli ah geelu kuma dhaqmo. Xilli kasta oo uu joogo, iyo meel kasta oouu joogo, wuxuu u baahan yahay dad xoog leh oo fulin kara waajibaadkiisa dhibka badan ee ay ugu muhiimsan yihiin waraabinta, daajinta iyo ka daaficidda wixii hunguriyeeya; dad iyo dugaagba. Sidaas waxaa caddeynaya heestan:-

Haddaan curaddada,
Aanu cudur dilin,
Amaan cadow qaban,
Cosob meellaba,
Wallee cawleey(553),
Ciyoon(554) waad tegi.

23) Dhulka daranta iyo biyaha leh oo kaalin weyn ku leh dhaqidda geela, marka geelu u socdo, sida badan ilaa uu gaaro waa socod bataa oo waa hawl bataa. Caana fiicanna lagama helo oo waa yareeyaa. Heestan ayaa sidaas caddeynaysa:-

Jeeruu darantiyo,
Jidhaamada tago,
Jeel hadduu qabo,
Jaar(555) uu buushiyo,
Joogsi laga waa.

24) Ratiga qoodhka ah ee geela loo reebo, taran ahaan waa muunadda geela. Xulashadiisana si weyn ayaa looga fekeraa iyada oo la tixgelinayo firkiisii hore iyo muuqaalka jidhkiisaba. Si weynna waa loo ilaaliyaa loona dhaqaaleeyaa. Gabaygan hoos ku qoran oo uu tiriyey Samatar Baxnaan, ayaa si wacan uga warramaya sida Samatar u dhaqaaleeyey rati baarqab ah oo uu lahaa, wuxuuna yidhi:-

Dhaqaalaha sidii waalid baan kuu dholmamiyaaye(556),
Dhulka meesha ugu fiican baad dhibicda daaqdaaye,
Waataan wadaad kaaga dhigay dhidib(557) qardhaaseede,
Oo aan sabeen dhogor cad iyo bixiyey dheeraade,
Dhabboosahaa(558) duqa ah iyo qaalinkii eegga dhibiyeystay,
Dhangadeeyey awrkii kaloo Dhaayin(559) roorsadaye,
Kugu dhawray Dhega-jeexanow Dhebi hashaydiiye.

25) Marka geelu biyaha u kallan yahay ee uu oomo, aroor ha ahaado ama ha daaqayee, wuxuu u baahan yahay in si gaar ah loo dhaqaaleeyo oo qorraxda laga hadhiyo waqtiyada ay aad u kulushahay. Geeraarkan oo u tiriyey Cabdi-Galayax ayaa ka warramaya arrinkaas:-

Maalintay Dhudi(560) oonto,
Dhuubatee ololeysa oo,
Caloosheedu dhinnaatana,
Kuma dhawro rafaadkee,
Dhir baan hariyaa.

26) Marka geela ceelasha loo arooriyo, dadka dhaqaalihiisa yaqaani, waxay u kala dooraan noocyada biyaha ee ceelasha. Waxana badanaa laga dhawraa ceelasha uusan biyihiisa si wacan u cabbin iyo kuwa biyahoodu wasakhda iyo fidhada leeyihiin. Heestan ayaana arrinkaas tilmaan ka bixinaysa:-

Markuu suruqdiyo(561),
Arko saxarrada,
Sanka mariyoo,
Surka kor u taag.

27) Dhaqaalaynta iyo xannaaneynta geelu waxay ku habboon tahay meel uu deegaan wacan oo nuxur leh ka daaqo, dulin iyo dugaagna kaga nabadgalo. Intaas hadduu helo wuxuu yeelanayaa cayil iyo caafimaad uu la cayaaro. Arrinkaas waxa ka warramaya heestan:-

Caweereey ilmaha,
Caleemada doog,
Cayaarin ogeey.

28) Reer guuraaga oo dhaqidda geelu sal u tahay, oo xilli kasta hawl ku jira, raggooda qaarkood magac iyo maamuus ayey ku helaan gudashada waajibaadkooda hawleed. Qaarna canaan iyo ceebeyn ayey muteystaan. Hawshaasi sida ragga kartidooda ay u kala qaybisay waxa tilmaan ka bixinaya heestan:-

Wiilna murankiyo,
Maadda giriguu,

Ku milaaq(562) yahay;
Wiilna muruqiyo,
Maalistaaduu,
Ku milaaq yahay.

29) Xulashada meesha geela la daajiyo waxay ka mid tahay tiirarka muhiimka ah ee dhaqaaleyntiisa. Waxaa ugu wacan inuu inta badan daaqo oo joogo dhul dhir badan oo dugsi leh oo carro jilicsan oo aan dhagax lahayn. Dan oo ku khasabta mooyee, buuraha iyo dhulka dhagaxa leh looga wanaagsan. Hees cayaareeddan ayaa si wacan u qeexaysa in aanay habbooneyn in geel lagu hayo dhul dhagax leh:-

Geela mamac(563) laguma furo,
Inkastooy madyuhu(564) ku curtaan,
Maraqsaarkuu ka hoolmaa(565).

# V. Dhibaatooyinka geel-dhaqashada

Sida hawl kastaa u leedahay dhibo ayaa dhaqashada ama tabcashada geeluna dhibaatooyin lagala kulmaa. Waxaana la odhan karaa, xoola-dhaqashadu waa ka dhibaatooyin badan tahay xirfadooyinka ay ka mid yihiin; Beerafalashada, iyo sancooyinka kala duwan. Waxaa kaloo jirta in geel tabcashadu ka dhibo badan tahay tabcashada xoolaha kale oo dhan. Waxaana la sheegaa in geelu sida uu xoolaha kale uga waxtar badan yahay uga dhibaato badan yahay. Dhibaatooyinkaasina ma aha kuwo lagu naco oo lagu dhaafo dhaqashadiisa, ee waa kuwa lagu illaawo waxtarkiisa badan ee reer-guuraagu aad u qiimeeyo. Dhibaatooyinka lagala kulmo geel dhaqidda, waxaa ugu muhiimsan dhibaato uu gaadhsiiyo jidhka dadka iyo xasilloonida iyo nabadgelyada qofka iyo bulshada oo uu halis geliyo. Dhibaatada jidhka, xoolaha kale waa ay la wadaagaan. Laakin, dhibaatada xagga nabadgelyadu, geela ayey u gaar tahay.

## 1. Dhibaatada Jidhka

Shaki kuma jiro in hawl kasta oo aadamuhu qabto, jidhkiisa dhibi ka soo gaadhayso. Hawlaha xoola dhaqashada, gaar ahaan ta geelu, waxay ka mid tahay hawlaha lagala kulmo daalka iyo rafaadka badan. Geel-dhaqashadu kuma badna hawl maskaxeed, kamana madhna. Waxay u badan tahay hawl muruqeed. Raacidda, raadinta hadduu lumo, aroorinta iyo waraabinta hadduu oomo, oodidda, kaxeynta ama wadidda, iyo caana ka lisiddu waa hawlaha caadiga ah ee xoolaha oo dhami ka siman yihiin. Hase yeeshee, jaad kasta oo ka mid ah hawlahaas, ta geelu waa ka dhib badan tahay kuwa xoolaha kale. Raaciddiisu waa ka dhib badan tahay raacidda xoolaha kale. Waraabintiisu waa ka culus tahay oo ka adag tahay waraabinta xoolaha kale.

Oonka badan iyo gaajada ay geeljiruhu la kulmaan xilliyada qaarkood, lama kulmaan dadka dhaqda lo'da iyo adhiga. Maxaa yeelay, halka dadka dhaqda adhiga iyo lo'du ay ka joogaan meel biyo leh, geelu waa ka fog yahay dabeecaddiisa iyo daryeelkiisa ayey ka mid tahay inuu daaqo meel ka durugsan agagaarka dhulbiyoodka oo sida badan xaaluf ah, uuna tiigsado dhul keyn ah oo oomana ah oo isaga u roon, laakin u daran dadka ilaalinaya.

1) Suugaanta ka warranta dhibaatooyinka lagala kulmo geel dhaqidda, iyagoo aad u badan, waxaynu tusaale u soo qaadanaynaa heestan oo kuwa waraabka ka mid ah, waxay muujinaysaa dadka waraabinaya dhibaatada ay gaadhsiiso biyo-cabka badan ee geela loo yaqaan:-

Jeeruu sacabbada,
Sarta(566) kala baxo,
Amuu sararrada(567),
Suuman adag iyo,
Seedo kala jaro,
Sidaa kuma tago.

2) Heestan oo kuwa waraabka ka mid ah, waxay wax ka sheegaysaa, waqtiga shubaasha, hawsha adag ee ragga geela waraabinaya ay qabtaan, ee labadooda dhafoor ka keento dhidid. Taas oo calaamad u ah hagar baxsanaanta ragga iyo sida ay daacadda uga yihiin gudashada hawlaha dhibka leh ee ay geela u qabanayaan.

Jeeroon laba dhidid,
Oo dhafoorka ah,
Midba dhan u rido,
Kuuma dhaartoo,
Kuuma dhiidhiyin.

3) Heestan oo iyana ka mid ah kuwa waraabka, waxay ka warrameysaa xubnaha jidhka ee waraabinta geelu dhibaatada gaarsiisay. Kuwaasoo xannuunkooda uu ka cabanayo meesha hal kasta oo geela ka mid ihina ku dadaaleyso in ay biyo badan cabto oo caloosheeda ku kaydsato, si aanay dhaqso ugu harraadin:-

Feedha dhiman bay,
Dhaami leedahay,
Anna dhabarkiyo,
Meel dhexdaasoon,
Jeer u dhacay baan,
Dhawr(568) is leeyahay.

4) Daalka iyo dhibaatooyinka badan ee shubaashu leedahay darteed, ayey heestani tilmaameysaa xubnaha jidhka ee ragga geela waraabinaya daalka iyo xanuunku ka dhaco.

Hadba garab baan,
Kuu gundhinayaa,
Hadba gacan baan,
Kuugu gurayaa.

5) Heestan oo iyana kuwa waraabka ka mid ah, waxay wax ka sheegeysaa waqti-dheer rag geel waraabinayey oo markii jidhkiisu ku daalay, arkay geelii oo weli cabbaya halkii uu ka dhawrayey inuu fulo:-

Feedha beelaye,
Saw nagama fulo.

6) Heestani iyana waxay muujinaysaa cirweynida geela iyo dhibka waraabka:-

Calool weynaa,
Oo cir badanaa,
Caska waagiyo,
Casar dabadii,
Waa cabbaysaa.

7) Bilaha Ramadaan ee Islaamku sooman yahay, ee cuntada iyo cabiddu maalin oo dhan ka reebban tahay, ayaa geelu doonaa in la wadwado oo uu joogo ama meel uu biyo ka cabbo ama deegaan ka cuno. Taas oo muujinaysa, in geelu raaxo iyo dhereg ka dhawrayo dadka la joogo oo Rammadaanta darteed gaajo iyo harraad la luudaya. Sidaas waxaa muujinaya heestan oo ka

mid ah kuwa waraabka:-

> Bila Rammadaan,
> An raggu afurin,
> Roob u da'a iyo,
> Raaxa doonaay!!

8) Heestan oo kuwa waraabka ka mid ah, waxay ka warramaysaa hawlaha ad-adag ee joogtada ah ee geelu leeyahay, ee ninkii u adkeysan waayaa uu ceebaysan yahay:-

> Maalin hawleed,
> Oo rag kala hadhay,
> Wiil hagoogtay,
> Waa habaar-qabe.

9) Heesta hoos ku qoran oo ka mid ah kuwa shubaasha, waxay ka warramaysaa hawsha badan ee uu qabto qofka geela wax ka hora, ee marna darka(569) yimaada, marna meesha geela lagu horaya taga, ee labadaas meelood dhexdood, inta geelu cabbaya oo dhan isaga dhex ordaya, si uusan geelu darka u dhaafin oo u lumin. Qofka hawshaas qabta, ayaa weliba la canaantaa ama la habaaraa. Heestu waxay tiraahdaa:-

> Hore(570) yaa hawl qaba,
> Habaarna u dheer.

## 2. Cabsida

Helidda nabadgelyo waarta, waa dhibaatada ugu weyn ee geel dhaqashadu leedahay. Manaafacaadkiisa badan iyo waxtarkiisa joogtada ah, ayaa ku kallifa ragga inuu raadsado. Hadduu si fudud oo nabadgelyo leh ku waayo, dantu waxay ku kalliftaa inuu si xun oo naftiisa iyo nafaf kalaba halis geliya ku raadiyo.

Qofkii haysta oo ku iimaan qaba tirada u xereysan, wuu jecel yahay in uu si nabadgelyo u leh u noolaado. Laakin wuxuu ogsoon yahay in aan rag deyneyn, oon ina rag laga waayeyn mid hiyigiisa geliya inuu dhaafiyo halaha uu haysto. Sidaas darteed, lahaanshaha geelu waxay xambaarsan tahay dhibkeeda oo cabsi iyo colaad ayaa u joogta ah. Qofkii aan isu diyaarin hab nololeedkaas, si hawl yar u dhaqan maayo geel, oo manaafacaadkiisa calfan maayo(571). Qofkii feeyig(572) ee xoog iyo xiribba u leh, ayaa kalsooni ku qabi kara; inuu dhaqan karo oo rag, xumo iyo samaba wax la qeybsan karo.

Nolosha geeljiruhu, waa mid dhibaatooyin badan leh, oo raaxaysigu aad ugu yar yahay, waa cabsi ku-nool habeen iyo dharaar ka wal-walsan inay la kulmaan wax dhiba naftooda iyo maalkooda. Cidlooyinka ay ku noolyihiin darteed, waxay ka cabsadaan dugaagga ku nooli inay wax yeello gaarsiiyaan. Bahalaha yar yar ee xammaaratada ah sida: Halaqa waxay ka qabaan cabsi weyn. Dhirta badan ee ay dhex jibaaxayaan ee qodxanta fiiq-fiiqan leh, waxay ka baqaan inay muddo oo dhaawac gaadhsiiso.

Cabsidu kuma koobna dugaagga oo keliya. Dadka laftiisa waxay uga cabsadaan siyaalo badan. Tuug waqti xun soconaya oo doonaya inuu geela ka xado waxay ka qabaan wel-wel weyn, oo feejigaan joogta ah ayey ka

leeyihiin. Arrimahaas oo dhammi waxay tusaale u yihiin nolosha qallafsan ee cabsida badan leh oo geelleyda iyo geeljiruhuba ku nool yihiin.

1) Suugaanta soomaaliyeed ee tilmaamaysa cabsida ku jirta geel dhaqashada iyadoo badan, waxaa ka mid ah maahmaahda tiraahda "Nin geel lihi guri kuma nagoodo(573)". Maahmaahdani, waxay ka warramaysaa dadka geela dhaqdaa xasilloonaan la'aanta ay ku jiraan, iyo sida cabsidu ugu kallifto dagaal isu diyaarin joogta ah.

2) Heestan hoos ku qoran oo ka mid ah kuwa shubaasha geela, waxay ka warrameysaa cabsida joogtada ah ee ay leedahay geel dhaqashadu, iyo feejignaanta geel jiruhu leeyahay:-

Suub ninkii dhaqay,
Seexan waayoo,
Soodh(574) la goday iyo,
Siiqa(575) la horsocay

3) Gabayaagii weynaa ee Cabdi Xirsi, ayaa gabay uu leeyahay kaga warramay hab nololeedka geeljiraha iyo geelleyda, noloshaasoo aad u adag. Dad iyo dugaagna cabsi joogta ah laga qabo, waxaa gabaygiisa ka mid ahaa:-

Ammin(576) khoof alleyl iyo habeen, uunku(577) wada jiifo,
Abrisiyo(578) ma jiireen libaax, ayda yuurura'e,
Ulo xoog leh uma fiiqeen, arodka Seeshiiye(579),
Awaaruhu ma duuleen sidaan, aasi gacalkeeye,
Ma adduun kalaa jira, Ururtu waa geel ragow!!

4) Manaafacaadka badan ee geelu wuxuu keenay in lahaanshihiisa la wada jeclaado. Jeceylkaasina wuxuu dhaliyey in qofkii si hawl yar ku waayaa, uu ku doono si kasta oo dhib leh oo uu ku hantaba. Haddaba kii helaaba dhib ayey ku tahay inuu si nabadgelyo leh u hayo. Maxaa yeelay, nin waliba wuu ku hungureynayaa, oo wuxuu rabaa, xoog iyo xeeladba, tii u suuragasho inuu ku hantiyo. Heestan ayaa arrinkaas si cad u tilmaamaysa:-

Halay heliddaa,
Hoodo(580) loo lehe,
Yaa ku hayn kara.!

5) Qofka aan geel lahayn, waxa dhibay oo uu habeen iyo maalinba ku welwelaa siduu geel u hanan(581) lahaa. Kii lehna waxa uu ku welwelaa sidii uu uga ilaalin lahaa dadka iyo dugaagga tirada badan ee u hanqaltaagaya. Halkaasna waxa ka muuqanaysa dhibaatada iyo hawsha faraha badan ee la xiriirta dhaqashada geela.

Beydadkan oo ka mid ah gabey uu tiriyey Cali Maxamed Faarax, waxay ka warramayaan rafaadka lagu qabo dhaqidda geela:-

Dhaaxaan dhurwaa kaa ceshiyo aarka coofka(582) lehe,
Dhaaxaan carraaboo wax badan ceelalyo(583) ahaaye,
Aan cagacaddaan kugu wadiyo calallo jeex jeexan,
Cadka suulku dhaaxuu i go'ay caaraddaa hore e.

6) Dhibaatooyinka ka dhasha dhaqashada geela, qofba si bay ugu iman karaan. Beydadka hoos ku qoran oo ka mid ah gabay uu tiriyey Samatar Baxnaan, waxay muujinayaan sida geela looga ilaaliyo dugaagga iyo tuugta iyo sida heeganka loogu yahay dhicintiisa haddii la hungureeyo:-

Haddaan tuugga siiba iyo libaax kaga saloollaado(584),
Oo aan ku sawlaxo(685) kolkay samadu dhiigowdo,
War sifnaha geel maxaa iiga dhiman waw samaysnahaye.

7) Dhibaatooyinka geela lagala kulmo xannaanadiisa waxa ka mid ah, isaga oo socod dheer ku jira oo gabbal u dhacay oo ciidan wacan oo oodi karana aan wadan. Shaki kuma jiro inuu welwelo iyo orod badan gelayo qofkii xaaladdaasi la kulanto. Heestan ayaana arrinkaas tilmaan ka bixinaysa:-

Goortu waa galab,
Wiilku waa gaban,
Kuuma sido gudin(586),
Guullow kaa magan(587).

8) Ceelasha geela laga waraabiyo qaarkood si xun ayey u sameysan yihiin. Shubaashooduna aad bay u dhib badan tahay oo ciriiriga ay leeyihiin dartood, ayaa muddo yar ka dib lagu daalaa. Biyo ka keenidda ceel noocaas oo kale ah iyo dhibaha la xiriira waxa soo bandhigaysa heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ah:-

Way caddibi jiray,
Meel cidhiidhiya,
Oo rag ka cabsaday,
Waygu celin jiray.

9) Gabyaagii Faarax Cali Gammuunte, ayaa gabay dheer uu lahaa kaga faallooday dhaqashada geela. Beydadka hoos ku qoran oo aannu ka soo qaadannay, waxay ka warramayaan dhibaatooyinka lagala kulmo dhaqashada geela, ee ay ka mid yihiin, harraadka badan, shubaasha dhibka badan ee jidhka ku reebta arami badan, soojeedka badan ee lagaga ilaalinayo dad iyo dugaagba. Wuxuuna yidhi:-

Sida gorayadii Riinji(588) iyo Garane(589) daaqaysey,
Waataan biyaha uga go'ay ee geeri lay bidaye,

Goblamahan tuug iyo dhurwaa gaadayaa jira e,
Wax dhaaxay intay daba galeen gurada jeexeene,
Gam'imayno oo waa inaan gaadh ka qabannaaye.

10) Xoolaha la dhaqdaa, gaar ahaan geela, dhibaatooyinka lagala kulmaa aad bay u fara badan yihiin. Xilliyada roobabku da'aan mooyee, sida badan gaajo iyo harraadba waa lagu qabaa. Kamana maarmaan inay socoteeyaan, ama guurguuraan si ay xoolahooda ugu raadiyaan daaq wacan iyo biyo. Dhibaatooyinka xooladhaqidda lagala kulmo, gabay uu leeyahay waxa wax kaga sheegay Lafcambe(590) oo yidhi:-

Geel iyo ninkii adhi dhaqday gaajo dilataaye,
Geeddiga ha looyaamiyeen(591) sida gabraareede(592).

11) Nin ka cabsanaya dhaawac, dhib iyo xitaa dhimasho, geel si wacan uma dhaqan karo. Qof kasta oo geel leh ama damca inuu yeeshaa, waxa khasab ah inuu isku diyaariyo dagaal joogta ah. Haddii fuleynnimo iyo in yar oo baqdin ahna laga dareemo, cid waliba waa ku dhiirranaysaa inay dhaafsiiso hantidiisa. Waxaa keli ah ee geel dhaqan karaa waa geesinimo iyo xoog lagaga baqo ninki leh. Heestan ayaana arrinkaas si cad uga warrameysa:-

Birmad(593) Xiitooy(594),
Bir nin ka cabsaday,
Waa nin baqayoo,
Barya mooyiye,
Biidna kugu waa.

12) Geesinnimadu waxay ka mid tahay qiyamka wanaagsan ee reerguuraaga xooladhaqatada ahi aad u qiimeeyo. Gaar ahaan, waxa meel cidhiidhi ah oo rag ka cabsaday ama ku dhintay geel kala bixi kara, ama ha dhacayo ama ha laga dhacayee, nin geesi ah oo nolosha iyo dhimashada aan kala jecleyn. Dadka geela dhaqdaana, dhaqankaas guud ahaan waa wada leeyihiin. Heestan ayaana si weyn arrinkan u qeexaysa:-

Haddaan dirirtaa,
Ragga daba maro,
Allow lay dilo,
Oo aan la i deyn.

13) Sida badan, geelasha waxa cololku galaan oo qaadaan waqti casar ah, oo la filayo in aanay cidda geela lihi si degdeg ah ugu tabaabushaysan karin dhicinta geela. Waqtigaas xun, geela la qaado dadka la joogaa, waxay noqdaan ama wax cararay oo lafahooda la baxsaday oo ciidan doonta, ama waxay noqdaan kuwa markaa horeba heegan ahaa oo hubkooda sitay oo isla markiiba geelii ku dagaallama oo dhacsada. Qofkii feejig ee dhib kasta u diyaar ahna waa adag tahay sida looga guuleysto, oo hantidiisa looga qaado. Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ayaa si weyn uga warrameysa feejignaanta iyo dagaalyahannimada dadka geela dhaqda:-

Casar kulay tahay,
Uu cadceedsaday(595),
Duul ka cararaa,
Caweer laga helay.

14) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha waxay tilmaan cad ka bixinaysaa, in geelu yahay waxyaalaha colaadda iyo dagaalladu ka dhashaan ee dadka iska hor keena. Maxaa yeelay, waxtarkiisa badan ayaa qof waliba ku rabaa, kuna hungureeyaa, kuna dagaallamaa.

Qooryareey Qalin,
Qooray joogtaba,
Qoora go'an iyo,
Qaar rag baa yaal.

15) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha, waxay soo bandhigaysaa in geelu yahay wax sababa dagaal dhexmara laba beelood oo hore aani godobi uga dhexayn. Dagaalkaasna waxa dhalinaya qolo hungureysa geela qolada kale, oo isku dayda inay geelooda la wareegaan, raggoodana dilaan. Ujeeddaduna waxa weeye geela oo ah wax nacfi weyn oo qof waliba jecel yahay. Kii si wacan ku waayaana, ku dadaalayo inuu si xun oo halis badan ku helo:-

Qayib(596) laba qolo,
Oo qabiilo ah,
Oon wax kala qabin,
Qaata-qaatiyo,
Qaylo geliyaay.!

16) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha, waxay muujinaysaa marka laba dhinac ama qof ku dagaallamaan, sida ninka geesiga ahi, aanu dagaal u joojin ilaa uu ka dhimanayo, ama uu guusha la wareegayo oo geela hantiyayo. Caada ahaanna, qof geeliisii loogu yimid oo lagula dagaallamay, laguna dhex dilay, wuxuu dhexdooda ka mudan yahay magac iyo maamuus. Laakin kii aan ku dagaallamin ee ka nabadgala geerida, xaggooda ma tirsana oo waa ceeboobaa. Arrinkaas ayaa heestanina sheegeysaa:-

Tummaatida(597) waran,
Oon wadnaha tegin,
Wallee Tiireey(598),
Lagaagama tago.

17) Hees cayaareeddan, waxay si weyn uga warramaysaa halista badan ee dhaqashada geela la socota. In kasta oo dadka intiisa badani aanay ku deyn ee ugu badheedhaan, ma jiri la'a qof qof naftiisa eexeysta oo dheeftiisa iyo dhibkiisaba ku xisaabtamin. Heestu in kasta oo ay qirayso waxtarka geela, waxay soo bandhigeysaa waxyeelladiisa oo colaadda iyo dilku u badan yihiin:-

Saddex baan geela ku nacay,
Gaashaanka dhiigga leh,
Gebogebo(599) ka ololkii,
Ina Hebel shaluu go'ay.

18) Gabayga hoos ku qoran oo aan la sheegin qofkii tiriyey, wuxuu si cad u tilmaamayaa dhibaatada iyo halista ku laran dhaqashada geela, wuxuuna muujinayaa cabsida uu leeyahay hayntiisa iyo hanashadiisa. Gabaygaas oo intaas laga heley waxaa ka mid ah:-

Waa lagu dhintaa geel ninkii, dhaq is yiraahow e,
Waa dheemman(600) iyo Luul(601) ku jira, dhib iyo aafoode,
Dhayal iyo cayaar laguma helo, sidigta Dhoorwiile(602).

19) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha geela, waxay sheegeysaa cabsida ay leedahay geel dhaqashadu iyo dhibaatada ay leedahay geel la'aantu. Labadaas cabsiyood ee lays bar-bar dhigey, waxay heestu muujinaysaa in geela maahaane aanay jirin xoolo kale oo lahaanshahoodu cabsi iyo baqdin abuuro. Hase yeeshee geel la'aantu ama hanti la'aantu cabsi-

da ay leedahay ee caydhnimada iyo baahidu ka mid tahay waa wax la wada og yahay oo caadi ah:-

Geel nin badiyana,
Geeri baw dhow,
Kuu ku gaabtana,
Gaajo waw halis.

3. Colaadda

Geelu wuxuu ka mid yahay waxyaalaha dhaawaca nabadgelyada, oo isafgaranwaaga iyo colaadduna ka abuuranto. Manaafacaadkiisa dhaqaale iyo bulsho ayaa ku abuura dadka laxajecladiisa iyo hantiyiddiisa. Taas oo abuurta ninkii wanaag ku waaya inuu xumo ku doono.

Sidaas macnaheeduna waxa weeye in ninkii dhaqdayba aan loo dayne loo dabagalo, oo lagu dadaalo xoog iyo xeeladba sidii lagu dhaafin lahaa. Dantuna waxay ku khasabtay ninkii geel dhaqdayba inuu hantidiisa hanqalka(603) loo wada taageyo ka ceshado asaaggii. Geelu wuxuu markaas noqday hanti qiimo leh oo rag wada hungureeyo. Naftana ha lagu waayee inaan ninna ka gaabsan dirirtiisa. Ragna wuxuu u kala baxay nin leh oo xoog iyo xabbad ku ilaalinaya, iyo nin doonaya inuu xero ka buuxsado xoolo aanu tacban. Taasina waxay muujinaysaa in geelu yahay meesiga ama xoolaha laba qof ama laba beelood dhexdood ka dhalin kara colaad.

1) Suugaanta soomaaliyeed oo si weyn uga hadashay colaadda ka dhalata geela waxaa ka mid ah heestan oo kuwa shubaasha geela ka mid ah, caddeynaysana, sida jaceylka geela loo qabo, laba degmo ugu colloobaan.

Deerooy(604) laba duul,
Aan dal wada degin,
Oo dab wada shidan,
Dagaalamiyaay!!

2) Heestan oo iyana kuwa shubaasha geela ka mid ah, waxay muujinaysaa in sida keliya ee geel lagu heli karo ama lagu heysan karo ay tahay dagaal iyo difaac u foognan.

Xarbi nimaan tegin,
Oo xabbado ridin,
Soo xereeyn waa!!

3) Heestan oo iyana ka mid ah heesaha shubaasha geela, waxay muujinaysaa sida geel heliddii ama heyntii dhiig badan loogu qubo oo dad badani ugu dhinto.

Haddaan dhiig quban,
Amaan loo dhimman,
Miyey dhaqantaa??!

4) Heestan oo iyana kuwa shubaasha ka mid ah, waxay iyana ka warramaysaa inaan geel lagu heli karin laguna dhaqi karin baryo ee uu hantiyi karo kii dagaalkeeda had walba u diyaar ah.

Amlay(605) danantiyo,
Dagaal mooyiye,
Wiil durraansaday(606),
Daawad(607) ma hantiyo.

5) Heestan oo iyana ka mid ah heesaha shubaasha, waxay ka warrameysaa in geela aannu dhaqan karin ama heysan karin nin kasta oo dirirteeda u diyaar ah. Laakin ninkii xoog leh oo tol badan ka dhashay uu yahay kan keliya ee aan la dhaafin karin xerediisa uu ku dambeeynayo.

Feyd(608) nin faralaa,
Faruurta qabsaday,
Oo nin faras laa,
Feerta ka eryaday.

6) Heestan oo iyana ka mid ah heesaha shubaasha, waxay is-weydiinaysaa haddaan geel loo dagaallamin oo loo dhiman, sida lagu helayo. Taas oo macnaheedu yahay ninkii geel u dagaallami waaya, uu yahay nin baqay oo sugaya inuu mag u qaato oo sidaas oo keli ah ku helo.

Wiilaan muruq iyo,
Maagis kugu helin,
Maalin se u dhiman,
Macnalaawuhu,
Ma mag buu sugi.

7) Gabyaagii Cabdi-Galayax, oo gabayo badan oo uu leeyahay kaga faallooday dhaqashada geela, tixaha hoos ku qoran wuxuu ku sheegay in sida keli ah ee geel lagu dhiqi karaa ay tahay iyadoo si xoog leh dirirtiisa loogu hagar baxo.

Bilaash iyo Cayaar looma helo Bogiyo(609) Heemaale(610),
Nimaan sabarka baaruud ku xiran Baar(611) ma foofsado e,
Rag bireysan buun iyo rasaas boohin iyo qaylo,
Iyo Laba bahood maalin ay boqol ku ruuxweydo,
Belo iyo col baa lagu tabcaa Baarax(612) weligeede.

8) Bulshada Soomaaliyeed, siiba reerguuraaga xoola dhaqatada ah, aad bay u qaddariyaan xididnnimada. Waxayna xididnnimadu leedahay xeer adag oo la isku dhaafsado, salaan wacan, sooryo joogta ah, xishood badan iyo xoola isasiin. Dadka xiriirkaas wacani ka dhexeeyo, waxa suurowda in ay geel isku qabtaan, ama isku hungureeyaan, oo dhexdooda uu ka dhaco dagaal rag badani ku dhinto. Ma aha arrin si caadi ah u dhaca, laakin hunguri loo qabo lahaanshaha geela, wax kasta waa keeni karaa. Heestan ayaa arrinkan ka warramaysa:-

Saddex seeddi ah,
Oo salaantiyo,
Sooryo isku leh,
Suuf(613) ka xooraay.

9) Gabay hoos ku qoran oo uu tiriyey Cali Maxamed Aadan, wuxuu muujinayaa sida colaad iyo qaxar ku-nool uu u yahay ninka geela dhaqdaa.

Cidina kama jecla raaxo iyo nabadgelyo ee dad baan laga helayn, oo waxaan loo deynaynin hantidiisa. Waxtarka badan ee geelu leeyahay ayaa qof waliba rabaa. Gabyaagu wuxuu yidhi:-

Hashii aan magliga(614) rag ula dhacay muruqyadii gooyey,
Hashii aan makalay(615) kii lahaa, aniga oo maagay,
Hashii aan maqaawir(616) tolkeya uga maqnaan waayey,
Maadhiin qarxaayiyo hashaan cudud ku soo meershay,
Hashii aan mataanaha u siday maalintiyo leylka,
Muslin gooruu jiifaba hashaan daba maluugnaaday(617),
Mirta iyo habeenkii hashaan mayracow badiyey,
Inaad midab haldhaaleey nin kale mahiibsiiso(618),
Oy igu ag maalaan marnaba miinka kuma hayne,
Adigaa masqaro(619) moodayiyo Maahir(620) shay fudude,
Muskuun baad ku aragtee ma ogid hawsha loo maraye,
Ma hantiyo abidkii ninkaan mayd u jiidhine.

10) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ah, waxay ka warramaysaa meel geel joogo, sida dirir iyo dagaal u joogo, rag ugu xarbiyo, meydkiisuna u yaal. Qiimaha iyo waxtarka uu xoolaha kale dheer yahay dartood, ayaa la isku dilayaa iyada oo qof waliba rabo inuu isagu hantiyo geela, ha lahaado ama hunguri ha kaga jiree. Heestu waxay tidhi:-

Meel xabbada badan,
Oo xinjiri taal,
Oo rag ku xarbiyey,
Xayaad(621) ololaay.

11) Dhaca geela, iyo dagaallada ka dhasha, ma aha wax dhawaan bilaabmay. Dadka dhaqdaa waxay qabaan, sidii geel loo arkayba in la isugu dilayey, oo marba qofkii haya lagula dagaallamayey. Dhicii iyo dilkii waagaas fog bilaabmay, ayaana weli socda. Maxaa yeelay, weli qiimihiisii ayuu leeyahay, sidii horena weli waa loogu baahan yahay. Heestan ayaana arrinkaas tilmaan ka bixinaysa:-

Sidii loo helay,
Loogu hadalyoo,
Laguma heeshiin.

12) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha ah, waxay iyana ka warramaysaa, dhaqashada geela ama lahaanshihiisu sida uu ugu xidhan yahay qof hubaysan oo geesi ah, oo waqti walba diyaar ah inuu si badheedh ah uga hor tago dhibaatooyinka faraha badan ee ka hor imaanaya. Taas oo macnaheeda guud yahay, qofka geel heli kara ama haysan karaa inuu yahay kan cududna u leh, ee hubkana u sida. Heestu waxay tidhi:-

Weynow nimaan hanan,
Oo hubkow dhigan,
Hayga kaa siin.

13) Geeljacaylka, reerguuraagu waa ka wada siman yihiin. Laakin jacayl keli ah geel laguma heli karo. Sida ugu dhow ee lagu heli karaa geelna, waa sida ugu dhibaata badan uguna halis badan. Qofkii ama kooxdii is

miidaamiso, ee hollisa inay dagaal iyo xoog kula wareegaan geel si xoog leh loo ilaashanayo, sida badan waxay la kulmaan guuldarro weyn. Geel ay keenaan daayee, sida badan, waxa ku dhaca dhaawac iyo dhimasho. Halkii ay faa'iido ka doonayeenna, waxay korodhsadeen khasaare. Marmar dhif ah, oo dagnaan ay helaan ayey suuragal noqotaa in arrinkoodu u meelmaro, laakin si fudud uma hirgalo. Arrinkaasna waxa tilmaan ka bixinaya maahmaahdan hoos ku qoran:-

"Geel doono, waxay leedahay geeso dhiig leh".

14) Dhaca geela ama xoolaha kale, ma aha wax xalaal ah oo reerguuraaga caada u ah. Wuxuuse ka mid yahay dembiyada waaweyn ee bulshada. Qof walbana ma sameeyo, ee waxa sameeya qof dambiila ah oo xishood ka tegey, xaaraanta iyo xalaashuna aanay u kala duwanayn.

Reerguuraagu isaga oo dhaca geela u haysta inuu yahay xaaraan oo in la ceebeeyo mooyaane, cidina aanay dhiirri gelin, ayuu haddana dhacu jiraa, oo qofkii hunguri qaadaaba ku kacaa. In la ceebeeyo oo la neceb yahayna, waxa kuu muujinaya maahmaahdan:-

"Hal booli(622) ahi, nirig xalaal ah ma dhasho".

15) Dadka duula ee hawada iyo hungurigu wado, kuma tala galaan had iyo goor inay soo guuleysanayaan oo heleyaan, waxay rabaan. Kama diimoona, in aanu jirin geel sidii ugaadh, meel cidla' ah iska daaqaya. Waxay ku xisaabtamayaan in geela rag la joogo, oo weliba, laga yaabo in raggaasi hub haysto. Haddii loogu tagana dhiig daadanayo. Intaas oo dhan iyada oo dareenkeeda la leeyahay, ayaa loo badheedhayaa halistaa, iyada oo la rabo in geelaas la helo dhib kasta ha lagala kulmee.

Maahmaahdanina waxay tilmaamaysaa sida ay isu barbar socdaan hunguriga iyo ajasha qofka duullaanka ah. Labadoodana, mid uun baa sida badan guuleysta, ee ma wada guuleystaan. Maahmaahdu waxay tiraahdaa:

"Nin duuley ama hali weddey, ama hadi(623) weddey".

16) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha, waxay caddayneysaa in helidda geel ay ku jirto dhibaato iyo halis badan dhexdeed, oo aan si hawl yar oo baryo iyo ducayn ah lagu heli karin. In kasta oo ay jirto in wadaaddada geel lagu siiyo duco iyo Qur'aan akhris, ma aha wax meelmar ah oo lagu helo geel badan oo baahi-reeb ah. Ujeeddada weyn ee heestu waxa weeye, in geel waxa lagu helaa oo haddii la helo lagu hayn karaa ay tahay xoog iyo xabbad:-

Dab nin qaatoo,
duula mooyiyo,
an duceeyiyo,
Diin quraan iyo,
Diiqa(624) lagu waa.

17) Saddexda beyd ee hoos ku qoran oo ka mid ahaa gabay geela ku saabsanaa oo uu tiriyey Cali Maxamed Faarax, waxay ka warramayaan dhibaatada lagu qabo dhaqashada geela, iyo sida uu gabyaagu ku hantay ama iskaga waabiyey oo ugu jilib dhigay colal duullaan ah, oo marar badan holliyey inay xoog kaga qaadaan geeliisa. Wuxuuna yidhi:-

Cadowga iyo dhaaxaan wax badan tuugga caabbiyaye,
Intay caaradhuub igu rideen saanad(625) la cabbeeyey,
Col duullaana dhaaxaan dagaal kaaga caydhsadaye.

18) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha, waxay muujinaysaa sida colal ka kooban tiro badan oo lug iyo farasba noqon kara ay duulaan si ay u helaan. Waxa colalkaasna ugu halis badan colka faraska ah, maxaa yeelay, orod kuma gaadhi karto lugtu. Waxaase gaadhi kara waa col kale oo far-dooley ah. Faraskuna ma aha hanti laga wada siman yahay, ama sidiisaba ku dhaqmi kara oo joogi kara dhulka dhirta badan ee geela sida badan la-gu dhaqo. Heestu waxay caddaynaysaa in col noocaas ah ay adag tahay si-da loo dhiciyo, sidaas awgeedna, Ilaah uun lagaga magan geli karo:-

Allow Suubeey,
Col siddeetana,
Oo sengiyo(626) luga,
Hayna solansiin(627).

19) Labadan beyd ee hoos ku qoran oo aan cidina noo sheegin qofkii tiriyey waxay muujinayaan, sida uu u daba socdo nin geel laga dhacay ka maqan yahay. Waxaana halkaas ka caddaanaysa in nin dhacan, oo dhicii-sii u muuqdo, nabadda ama waanwaanta laga helaa aanay kal iyo laab ah-ayn, ee ay tahay af keli ah. Markii suuragal ay u noqotana uu qalqaa-linayo duullaan uu ku soo dhacsado hantidiisii. Gabyaagu wuxuu yihdi:-

Inta geelu kadinkii fadhiyo kaalka dhigimaayo,
Nabaddaan kal iyo laab ahayn laygu kari maayo.

20) Ismaaciil Mire, wuxuu ka mid ahaa dadkii sida xoogga leh uga qaa-dan jiray qalqaalaha colalka iyo duullaamada geela lagu soo qaado ama lagu dhiciyo. Beydadka hoos ku qoran oo ka mid ahaa gabay uu kaga faa-lloonayey dhaqidda geela, oo uu tiriyey markii uu gaboobay, wuxuu ka warramayaa dhibaatooyinka uu u mari jiray helidda geela, iyo sida marka uu taag gabay aanu waxba uga taraynin. Wuxuuna yidhi:-

Intaan haalig(628) u ridahayuu igu habboonaaye,
Dirirteeda anigoon holayn(629) ka hirqo(630) waa ceebe(631),
Heensaha(632) intaan daba sidee horor(633) ku qaadaayey,
Aan kii hayaba dhaafin jiray kama harraadnayne,
Hadduun baan hawaarsaday(634) sidii habaryartay Dhoole(635),
Wiilyahow hadhuubka iga daa yaan huqdow dhimane.

21) Heestan oo ka mid ah kuwa shubaasha, waxay muujinaysaa dhibaatoo-yinka tirada badan ee la xiriira dhaqidda iyo lahaanshaha geela. Waxay-na ka warramaysaa sida qof kasta oo ku dadaala xannaanaynteeda iyo ilaa-linteeda aanu u sugi karin, ee goor ay ahaataba, maruun loo awood shee-ganayo oo lagala wareegayo. Wuxuuna hanti u yahay oo xeradiisa ku jiraa marba kii u xoog roon. Heestu iyada oo arrimahaas tilmaan ka bixinaysa, waxay tiraahdaa:-

"Ninna kuma leh,
Oo iskuma kaa luro(636)".

## 4. Dhaca

Markii geelu noqday hantida ugu magaca iyo manfaca weyn nolosha xoolo dhaqatada, ayaa kii lahaa ku mintiday(637) sidii uu u ilaashan lahaa, kii aan lahayninna ku adkaystay sidii uu xoog uga qaadi lahaa ninka leh. Taasina waxay bulshada ka dhex abuurtay dhac joogto ah iyo gabagabo colaadeed.

Dhaca geela waxaa samayn kara qof keli ah, dad koox ah iyo beel is urursatay. Dad hubaysan oo noocaas ah waxaa hubaal ah kolkay diriraan in dhiig badani daadanayo oo maydku tiro beelayo. Geel dhiciisa ama daaficiddiisa waa arrin aad ay u qiimayso bulshada xoolo dhaqatada ahi. Waana arrin ay caadaysteen oo dhiciddeeda lagu talagalo, waxaana halkaas ka muuqanaysa in inta geelu nabadda dhiso, uu in ka badan dumiyo nabadgelyada bulshada.

Qof kasta ama koox kasta oo dhac qalqaaliye kuma xisaabtamo inuu si fudud u helayo geela uu doonayo. Guul iyo guuldarroba waa fishaa. Hase yeeshee, labaduba khasaaraha iyo dhibaatooyinka dad iyo duunyaba leh oo lagala kulmo ma yara.

Dhaca, diin ahaan iyo dhaqan ahaanba wuu la xun yahay bulshada xoola dhaqatada, haddana waa wax dhiciddiisu aanay yareyn oo weliba dadka falaa ay ku faanaan. Dadka qaarkii oo caadaystay dhaca waxay ka dhigteen arrin xarrago leh, oo nin xoog lihi oo keliyi fali karo, aakhirana leysku xisaabayn.

1) Gabyaagii weynaa ee Cabdi Gahayr, oo ka mid ahaa dadka caanka ku ahaa dhaca geela, ayaa la sheegay in wadaaddo waaniyeen oo uga warrameen if iyo aakhiroba dhibaatada dhacu leeyahay. Cabdi Gahayr, oo ka warramaya dhibaatada geel la'aanta ee isaga haysatay iyo qiimaha geelu aadanaha u leeyahay, gabay uu ka tiriyey waxaa ka mid ahaa:-

Idiin'bacas(638) awrkay dhashiyo, aarankay wadatey,
Asxaabihii horaba, Waa ku intifaaceene,
Aakhiro ninkaan geel lahayn, Looma ammaanayne,
Maxaan idinla awlaadsadaa(639) awgayow, Awr ma dhaansado'e.

2) Gabyaagii Cali Dhuux, beri uu geel ka dhacay niman culima ah ayaa xigtadiisii aad ugu canaanatay uguna ceebeysay dhacaas. Cali-Dhuux, oo daafacaya falkaas, sheegayana in caalinkii culimada (Sayid Maxamed) jideeyey dhaca geela wuxuu gabay ku yiri:-

Sayidkii wadaad oo dhan xiray, Waris(640) xalaaleeye,
Xaaraan hadduu yahay Xula(641) ma qaadeene,
Xoolaha keleetiyo isaga waaba kala xeere,
Nin kastoo xadreeyaaba, wuu u xusul duubaaye,
Haddaan xaajiyadu weerareeyn xer uma duuleene.

3) Gabyaagii Jaamac Faarax Aadan, oo isna u haystay Dhaca geela fal aan xumayn, sheegayana in Sayidkii iyo daraawiishtiisii oo ahaa Urur diini ah ay dhici jireen geela. Faarax oo ku doodaya dhaca geelu in aanu xaaraan ahayn wuxuu yiri:-

Wadaadkii Xadeed(642) iyo fadhiyey, xarun daraawiisheedka,
Ee Xodayo(643) geyn jiray intuu Xamar u heenseeyo,

Xaafidal-Quraan buu ahaa, Soo xajiyey dhowre,
Isagaba xaq'iyo baadil waw kala xarriiqnaaye,
Xaaraan hadduu yahay fardaha kuma xarraansheene,
Anna way xalaal Xaawis(644) iyo xagalo awryaale.

4) Waa tii hore aannu u soo sheegnay in geelu ku dhaqmi karo meeshii ama beeshii uu ku haysto xoog aan la loodin karin. Ducaale Cali (Fagaase), oo sheegtay geel badan iyo tol xoog leh oo ilaashada, ayaa u faanay Sayid Maxamed, iyo daraawiishtiisii. Wuxuuna ku dooday Fagaase fardaha iyo xoogga tolkiis in daraawiishtu ka baqday oo ay ku dhici kari waayeen inay geeliisa ka dhacaan. Arrinkaas isagoo gabay ku sheegayana wuxuu yidhi:-

Sayidkuba ka fiig geelayaga Inuu faduushaaye,
Ma facaysto laangaabka iyo tuugga fiirsado'e,
Faataxa wadaad iyo burduhu Fanax(645) ma beeraane,
Faras xoog leh baa lagu dhaqiyo Geesi fool adage,
Fulayada Daraawiish iyo Maxamed faankiisa,
Hadduu faral islaan iyo jahaad faro ku doodaayo,
Ararsamaha faanay ee arlada culus ku soo foofshay,
Muu foos la xulay iyo dagaal foori kaga yeelo,
Muu goolashaa fiiga baxay fuquraduu loogo,
Fiqiyada ku lumay xarunta muu fiixa ka hibaadsho,
Oo foodhi laasimo sidii faranji reer loodh ah.

5) Jabkii Daraawiishta kaddib, ayaa Ismaaciil Mire iyo rag kale oo badan u duuleen beelo aad uga fog, si ay geel uga soo dhacaan, masaafo dheer markay socdeen gaajo iyo oon badanna la kulmeen ayay waayeen geelii. Dabadeed Ismaaciil, wuxuu tiriyey gabay uu ku sheegayo dhibaatooyinkii ay la kulmeen ee caadi ah inuu la kulmo qofkii ama ciddii uu galo damac iyo dhac duunyo aanay dhaqan. Isla gabaygaas oo Ismaaciil ilaahay kaga baryayo inuu tuso geel ay dhacaan waxaa ka mid ahaa:-

Gadiidkii(646) baqoolaha hashaan gaafka sare meeray,
Saalada gabowga ah hashaan, gelin dhow moodaayey,
Guuriyo carraababa hashii galowga eedaamay,
Raggii wada gammuurraa(647) hashuu golongolee dhuubtay,
Hashii kabaha gaadhkooda sare dhaguxu googooyey,
Guntigayga maradii hashuu igu galoolaaday,
Gob(648) caddaysa iyo dheen(649) hashaan, guranayee xaabay,
Hashaan uurka uga soo gingimay(650) tobanka geed qaaqle(651),
Wax kastaba aan goostee hashaan, Labada gaws daashay,
Gaadiidka xoogga leh hashaan gawrac ugu jiiday,
Gurradhigaha haamaha hashaan garangarshee xooray,
Gurgurshaaga(652) awrka ah hashii garabku naafoobay,
Ragga gobolkii wuxuu moodayaa inaan la gaadhayne,
Guullow allahayow adaa lagu galliintaaye(653),
Inay taladu kugu goonni tahay garay kas-gaabkiiye,
Garaadeysanoo la iska daa gaf iyo beentiiye,
Iyadoo hillaac gallalac yidhi, Garawo(654) soo raacday,
Iyadoo daruuraha gabdhabey bilo u soo guurtay,
Allow nagu galladi waa fogaa, gurigi caymeede,
Oo kama gayoonee rabbow gacanta noo buuxi.

6) Aadan Carab, oo la sheegay inuu la hadlayey wiil yar oo uu dhalay oo waqti walba caana geel u ooyi jiray ayaa gabay uu tiriyey kaga warramay dhibaatooyinka lagala kulmo dhaca geela. Aadan oo ay la ahayd in dhacu yahay sida keliya ee lagu heli karo, mar keliya, geel badan oo laga heli karo caano badan, is-barbar dhigayana dhibaatada dhaca iyo caanaha wiilku doonayo, waxaa gabaygiisa ka mid ahaa:-

Geel ninkaan dhibaatiyo u gelin dhac iyo boob toona,
Oon dhaan wareego(655) leh u rarin webiga dhuuxiisa,
Aan suu dhabbaha ugu tagnaa dhuuban sabarkiisu(656),
Aan dheelmatiin(657) iyo u gelin dhaxan aroortiiya,
Oon rareyga dhoomaha u sida boqonta dhiidhiibin,
Oon hilibka dheecaan ku cunin, dhamac intuu saaro,
Oon wuxuu dhul maaxaba jufeyn Dhuuba xeradeeda,
Oon sida dhireed ugu tuman dhaawac iyo meydka,
Oon goobta kaga soo dhugsiin dhaanto(658) iyo siidhi,
Oon aan saami(659) dheeraad ku jiro gacanta loo dhiibin,
Hadduu yidhi dhanaan iyo qabow igu dharaar(660) siiya,
Anigaa dheg weyn ehe i geli dhiiqo iyo ceebe.

7) Beri Aadan-carab, beeshoodii lagu soo duulay oo lagu dadaalay in laga dhaco geelal badan oo ay haysteen, ayaa beeshi Aadan iska caabiday dhacaas, iska horimaadkaas oo dad badani ku dhintay ayaa Aadan Carab gabaygan ka tiriyey. Wuxuuna kaga warramayaa ciddii damac ka galo geeloodaba dhibaatada ku dhacaysa, waxaa ka mid ahaa gabaygiisii:-

Geelii dhalaaliye muxuu, dhaabad(661) rag u geystay,
Dhabbihii uu qaadaba maxaa dhiig rag lagu daadshay,
Ma dhuftay yiraahdaan horweyn dhamac kulaalaysa,
Ma rag dhimanayaa geelayaga, dhaxal u soo doontay.

8) Sayid Maxamed iyo daraawiishtiisii, sida beelaha soomaaliyeed geela u kala dhacaan ayay iyana u dhici jireen loogana dhici jirey. Hase yeeshee, Sayidka iyo daraawiishtiisa oo dhici jiray beelaha aan daraawiishta dagaalka ku raacsanayn ee gumeystaha la jirey ama iskoodba u madax bannaanaa, wuxuu qabay Sayidku isagoo cuskanaya shareecada Islaamka, in ciddii diidda ka qeybgalka jihaadka, uu dhaca xoolahoodu bannaan yahay. Sidaas darteed, mar daraawiishtu geel soo dhacday oo dadkii geelaas laga soo dhacay ergo ahaan ugu yimaadeen sayidka, waydiisteenna in geeli loo celiyo, ayaa la sheegay madaxdii daraawiishta qaarkood inay jeclaysteen in geela loo celiyo. Sayid Xaxamed, oo arrinkaa ku gacan saydhay ayaa gabaygan kaga warramaya dhibaatadii daraawiishta ka soo gaadhay dhaca geela iyo sababaha ugu diidayo geela in loo celiyo nimankii laga soo qaaday, waxaana gabaygaas ka mid ahaa:-

Hashaan dhamaca jiilaal jahaad Dhooddi(662) ugu saaray,
Dhuuniga wareegaha hashaan goolalka u dhaatay,
Dhaxantii habeennimo hashaan Dheelka(663) ugu guuray,
Hashii uu dhuyucu(664) ii muday, dhuundhastiyo(665) jiiqa(666),
Hashii uu dharkii igala hadhay dhiraha baarkoodu,
Dhagta waaga goor hore hashaan dhuumasho u diiday,
Dhagax-waaq(667) hashaan kaga dhigee Dhuun ka soo didiyey,

Ninka iga dhaqaaqoo kufriga dhaliga weyn raacay,
Inkastuu dhawaaqoo baryada kor ugu dheereysto,
Ka dhaartaye haddaan siiyo waa dhalafalluuqoobay(668).

9) Gabaygan oo ninkii tiriyey aan naloo sheegin, waa farriin uu dirayo nin geeliisii la dhacay. Qolada dhacdayna wuxuu u sheegayaa in geelu yahay xoolo xerada ugu jira marba ninkii u xoog roonaada wuxuuna kula dardaarmayaa inay geela si fiican u dhaqaaleeyaan ilaa inta uu ka tabaabushaysanayo oo uu soo dhacsanayo. Gabaygaa oo intiisii badnayd maqan tahay waxaa laga helay dhawrkan beyd:-

Dhinbiliisha(669) meeshii leh, Dhaayin la ogaado,
Dhaqaaleeya dhaha geelu waa innaga dhexeeyaa,
Haddaad nirig ka dhaylaysataan(670) Dhagar ka faalleeya.

# VI. Suugaanta cusub iyo geela

Cutubyadii(671) hore waxaa lagu soo bandhigay tusaalooyin suugaaneed oo muujinaya sida maansayahannadii hore ee Soomaaliyeed, ee xoola-dhaqatada ahaa u arkeyeen geela, iyaga oo sheegaya dhib iyo dheefba waxa lagu qabo. Dhammaantoodna waxay ku qotomaan dhaqanka faca weyn ee qarniyada badan ay dadkaasu ku soo dhaqmayeen.

Hase yeeshee, qarnigan 20-aad billowgiisii, iyo ka horba, waxa dhaqankii bulshada Soomaaliyeed soo dhex galay dhaqammo badan oo shisheeye. Waxayna ku soo galeen habab kala duwan oo diin, ganacsi iyo gumeysiba leh. Inkasta oo magaalooyin aan hore u jiri jirin abuurmeen, meherado ama xirfado cusubna dhaqammadaasi la yimaadeen, haddana is beddel weyn oo meelmar ah kuma aanay samaynin hab-nololeedkii bulshada xoola-dhaqatada ah.

Dagaalkii Labaad ee dunida kaddib, shacbiga Soomaaliyeed, meel uu joogaba, wuxuu dareemay dhibaatada gumeystaha. Waxana u kacay halgamayaal u doodaya midnimo iyo xornnimo Soomaaliyeed. Taasina waxay dhalisay in maansayahannada Soomaaliyeed ay ka maansoodaan fikradda wadajirka Soomaaliyeed, oo ahayd arrin cusub. Maxaa yeelay, hore waxa u jiri jiray beel waliba inay iskeed isu kaashato. Laakin, xukun dhexe oo Soomaalida oo idil mideeyaa ma jirin.

Suugaantaas, fikrad ahaan ayey cusub tahay, laakin qaab ahaan isbeddel kuma dhicin. Midnnimada iyo xornnimada Soomaaliyeed ma ahayn fikrad dadweynuhu u wada bislàa. Qaarkood waaba ku adkeyd suuragalnnimadeedu. Hase yeeshee, suugaanleyda soomaaliyeed iyagoo adeegsanaya noocyada maansooyinkooda ayey ku dadaaleen sidii ay dadka uga dhaadhicin lahaayeen habnololeedkaas cusub ee qarannimo.

Suugaanleydaasi iyagoo ogsoon qiimaha geela, ayey xornnimada loo halgamayeyba ku meteleen tulud ama hal geel ah, si uu dareen u galo dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan xoola-dhaqatada ku nooleyd meelaha ka durugsan magaalooyinka. Taasina waxay muujinaysaa in qiimihii geelu aanu yaraan, ee uu soo kordhay markii lagu matelay xornnimadii. Suugaanta habkaas loo adeegsaday oo tira badneyd waxaynnu tusaale ahaan u soo qaadanaynaa kuwa hoos ku qoran:-

1) Maansoyahannadii ummadda Soomaaliyeed ku guubaabinayey xornnima u halgankii, waagii axsaabta siyaasiga ahayd bilaabmeen, waxa ka mid ahaa Yuusuf Xaaji Aadan, oo tirin jiray suugaan sarbeeb(672) ah oo si xoog leh u kicin jirtey dareenka(673) dadweynaha.

Sida badan, Yuusuf wuxuu adeegsan jiray geela oo uu ku matalo xornnimada ama gobannimada loo halgamayo. Wuxuuna u arkayey ku halqabsiga geelu inuu yahay waxa ugu habboon ee bulshada soomaaliyeed dareenkeeda waddaninnimo lagu dhaqaajin karo.

Heestan oo ka mid ah heesihii ugu horreeyey ee xornnimadoonka ee la tirshay 1940-kii, waxay muujinaysaa muuqaal(674) nin harraad iyo gaajaba qaba oo loo diiddan yahay inuu hashiisa irmaan maalo, oo uu iska reebo baahida uu qabo.

Hadhuub nin sitoo,
harraadan oo,
hashiisa irmaan,
laga horjoogaan ahay.

2) Heestan waxay ka mid tahay beydadka heesta caanka ah ee "Soomaaliyeed Toosa", oo lagu tiriyo inay ka mid tahay heesihii guubaabinta xornnimada ee 1940-kii, oo la sheegay in ay si wadajir ah u sameeyaan Cali Mire Cawaale iyo Yuusuf Xaaji Aadan, laakiinse weli dad badan ka murmayaan:-

Heestu waxay soo bandhigaysaa sida curiyayaasha oo geela qiimihiisa weyn og, ay u barbar dhigayaan xornnimada. Taasoo dulucdeedu tahay, neef-af geel ah oo la dhacayba, dadka lihi waa u dhintaane, maxaa Soomaalidu ugu dhiman weyday dalkeeda gumeystuhu ka dhacay.

Tuldo geeloo dhacan baa,
Toban toban u dhintaane,
Ma dhulkaa tegey baan,
Dhagaxna loo tuureyneey?

3) Wuxuu Cali Xuseen ka mid ahaa maansoyahannadii soo if baxay billowgii halgankii xisbigii S.Y.L. Maansooyin tiro badan oo uu ka tirshay munaasabadooyin badan ayuu halgankaas kaga qeyb galay. Sida suugaanleyda kale, Cali Xuseen marar badan oo uu doonayey inuu guubaabiyo shacbiga Soomaaliyeed, wuxuu adeegsaday geela, oo uu u arkayey inuu yahay hantida soomaalida, ka ugu qiimaha badan.

Gabaygan hoos ku qoran oo ka mid ah gabayadii uu tiriyey 1950-kii, gumeystaha wuxuu ku mateley dhurwaa; xornnimadiina wuxuu ka dhigay hal geel ah. Cali Xuseen isaga oo u dhaaranaya dhurwaaga hashiisii cunay, wuxuu yidhi:-

Dhurwaayahow hashaydii cunaye gegida(675) dhiidhiibshey(676),
Sidaad dhaqatay shalay qaalintaad dhereridii(677) gooysey,
Dhulka inaad ku noolaatid baad kaga dhabayseene,
Dhan aan uga wareegaba marbaan dhaadka(678) kaa xidhiye.

In dhirbaaxa kugu siibataa baan ku dhaar galaye,
Raggiise geela dhaqay baa hurdee dhawr ma qalateene,
Dhallinyaro haddaan helo kuwaad shalay dhibaataysay,
Daraan(679) laba gu' weli caana dhamin urugana(680) u dhuubtay,
Oo ciil dhadhamiyaa ku heli daaman-dhagaxow e,
Godobtii rag kugu dhawrayaa waa dhunkaal(681) maqane,
Mar uun buu indhaha kugu dhuftaa geesi dhididaaye,
Dhabbaan(682) ku hadlayaa doqon dhirfaa(683) dhiillo(684) hoyn jiraye.

Mar hadduuse dhiidhiyo wuxuu doonayaa dhagarti(685) weeyaane,
In dhiig cas kaa daadiyaa baan ku dhaar galaye,
Bal i dhawr dharaarahan intaan dhigayo hooggaa.

4) Markii Soomaalidu hanatay xornnimadeedii 1960-kii waxay suugaanleyda soomaaliyeed tiriyeen maansooyin badan oo farxadeed. Badidood, gaar ahaan kuwa ugu wacnaa, waxay ahaayeen kuwii xornnimada lagu mete-

lay hal geel ah oo dhashay oo lagu baahi beelay, ama geel la dhacay oo la soo dhacsaday.

Maansooyinka noocaas ah, waxa ka mid ah heesta hoos ku qoran oo uu curiyey Saxardiid Maxamed, ee loo yaqaan "Maandeeq".

- Wataa curatoo mataanaysee(686),
  An maalno hasheenna
  Maandeeq(687).

- Wataa magawdoo(688)
  candhadi gollaa marisee,
  An maalno hasheenna
  Maandeeq.

5) Gabyaagii weynaa, Cabdullaahi Suldaan (Timacadde), wuxuu maansooyin badan ka tiriyey halgankii dheeraa ee shacbiga soomaaliyeed u galay hanashada xorriyaddiisa iyo midaynta gobolladiisa gumeysiga kala qoqobay. Billowgii 1960-kii, markii laba gobol xoroobeen ee midoobeen, ayaa dawladda Xabashida oo halis weyn u arkatay dhalashada iyo jirista dawladda Soomaaliyeed, ku soo duushay oo la dagaallantay shacbiga iyo ciidanka soomaaliyeed.

Cabdullaahi Suldaan, oo garaysan waayey weerarkii gardarrada ahaa ee xabashida, una arkay inay xabashidu diiddan tahay xornnimada soomaaliyeed, gabay uu munaasabaddaas ka tirshay ayuu ku sheegay in xornnimada laba gobol oo soomaaliyeed heleen, ay tahay mid ay soo dhacsadeen kaddib markii ay halgan dhibo badan loo maray.

Timacadde, oo isagu ka mid ahaa dadkii qeybta weyn ka qaatay halgankaas, xornnimadii wuxuu ku meteley hal geel ah, isaga oo ogsoon qiimaha iyo qaayaha geelu leeyahay. Wuxuuna dadweynihii soomaalida u soo bandhigay muuqaal dhaqankooda la xiriira. Kaas oo ah; nin geeliisii laga dhacay, oo soo dhacsaday kaddib markii uu si geesiinnimo leh ugu daggaallamay, oo diihaal(689) iyo darxumo kastaba ugu adkaystay.

Gabaygaas Timacadde tirshey, oo ka mid ah suugaanta soomaaliyeed ee maguurtada ah, dareenka weynna ku reebtay shacbiga soomaaliyeed, farriinta weyn ee uu gudbinayey, waxay ahayd:
"Xornnimadii dagaalkeeda loogu badheedhay laba gumeyste oo waaweyn (Ingiriis iyo Talyaani) in aan looga tegeynin loogana cabsanaynin xabashida oo ka itaal iyo awood yar".

Maansadaas, uu Timacadde tirshay, ee geela uu ku metelay xornnimadii, waxa ka mid ahaa:-

Gumeysigu hashuu naga dheceen, gurayney raadkeeda,
Guyaal iyo guyaal badan hashii gama'a, noo diiddey,
Goobtey is taagtaba hashaan joogney, garabkeeda,
Guuraa habeennimo hashaan geed walba, u jiidhnay,
Waxaan soo gucleynaba hashaan rag isku, soo gaarney,
Gaashaandhiggeedii hashii galawgu(690) eedaamay,
Hashii geeddankeedii(691) rag badan goodku(692) ku casheeyey,
Hashay labada Gaal(693) ee is barkani gaydh(694) u dirirasey,
Gacmaa lagu muquunshaye(695) xornnimo noogumay garane,
Garre iyo guntane(696) maalintay gees isugu booddey,
Allaa noo gargaaraye markuu shicibku guuleystey,

Geeraarradeedii hashaan anigu, googooyey,
Galool(697) iyo maraa(698) iyo hashaan Kidiga(699) geylaanshay(700),
Gaajiyo harraad badan hashaan ugu garaacaayey,
Goortii sidkeedii(701) go'ay galabti ay fool qaadday,
Ayadoo candhada giijisay oo godol ku sii deysey,

Garaad nimaan lahayn bay la tahay waad ka gaagixine(702),
Annagoo gantaalaha(703) dhiciyo haysan qori gaaban,
Hashaan gaadda-weynow(704) libaax uga gabboon(705) waayey,
Inaan goroyo-cawl(706) uga tagaa waa hal soo gudhay.

6) Markii dadweynaha soomaaliyeed ay saluugeen hoggaamintii xornnimadii la hantay 1960-kii, gabyaaga waaweyn ee ka tarjumayey dareenka runta ah ee dadweynaha, waxa ka mid ahaa Maxamed Ismaaciil oo ku caan ah "Qaasim".

Qaasim, isaga oo garanaya hasha ama tuludda geela ahi ahmiyadda weyn ee ay u leedahay shacbiga soomaaliyeed, ayuu xornnimadii u yeelay muuqaal haleed. Wuxuuna ka dhigay hal uu daryeel kasta u sameeyey, diih-aal walba u maray. Taas oo uu uga jeeday, markay dhasho, in caanaheeda badan la shafeecsado.

Hase yeeshee, markii ay dhashay, hoggaamin xumo darteed, wax laga helo daayoo, iyadii ayaa si xun u nool oo aan la dhaqaalaynin. Taasna waxa ugu wacan, dad aan aqoon u lahayn wadiddeeda iyo dhaqaalaynteeda ayaa maamula. Muuqaalkaas murugada leh, Qaasim isaga oo ka dhigay xornn-imadii, ayuu ugu baaqayaa dadweynaha inuu halgankiisii sii wato, ilaa xukunka laga wareejiyo kuwa majara-habaabiyey(707), oo loo dhiibo kuwo xilkas ah. Taas oo uu ku tilmaamayo, in markii la helo, uu dadweynuhu ka baxayo ciilkii ay qabeen. Gabaygii Qaasim waxaa ka mid ahaa:-

Hashaan gaaxinaayaan(708) lahaa gorofka way buuxin,
Geyaxaba(709) hashaan kaga xidhay gabanti nuugeysey,
Ceelkii ganuunaba(710) hashaan uga galaydhyaayey(711),
Geedkii magoolaba(712) hashaan uga garaacaayey,
Gaaroodigii(713) iyo hashii Laba-gar(714) daaqaysay,
Gaaleemadeedii hashii kurusku goobeystey,
Guudaan(715) hashii aan ka gubay iyo garaabiide(716),
Awrkii gulaaniyo(717) hashaan gubadlahow(718) diiday
Wax la yidhi haddaa goodirkii, lagu gabraartaaye,
Wax la yidhi god daayeer cabbeey, habari geysaaye,
Wax la yidhi gol(719) baa lagu dabraa geed waraaba lehe,
Wax la yidhi gommode(720) naasihii giigsanaan jiraye,
Wax la yidhi gujaa(721) lagu lisaa labada gooroode.
Gol-qaniinna waa loogu daraa yaanay gaagixine,
Gobaad(722) waxay la daaqdaa sagaal goroyo-cawleede,
Gabno(723) se ma laha geeluba hadduu geesi daaqsado e,
Googooye(724) iyo wiil xun baa gaawahaw(725) sida e,
Wallee ama gumooboo(726) sidaa layga godobeysey,
Wallee ama rag weys gaadayaaye gacan ku ciil beeley.

7) Aadan-Carab oo ka mid ah gabyaaga waaweyn ee Soomaalida, isla markaana ka mid ah xooladhaqatada sida weyn u aaminsan waxtarka iyo nacfiga geela, wuxuu ka mid ahaa suugaanleydii saluugtay(727) sidii gurraca-

neyd(728) ee loo maamuley xornnimadii markii la helayba.

Dareenkaas oo ay qabeen shacbigu, miyi iyo magaalaba, gabay uu ka tirshay, oo uu ku tilmaamayey in ninkii geel lihi uuba ka maarmi karo dawladda, isaga oo u arkayey, in aanu dawladda wax dheef ah ama dhaqaala ah ka helaynin. Gabaygaas oo dheeraa, waxaan ka soo qaadanaynaa halku-dhiggiisa oo muujinaya qiimaha geela, wuxuuna yidhi Aadan:-

Reerkaba Dawaar(729) baa ku filan oo diraacdhal(730) ahe,
Dambeeddada(731) Aloos(732) iyo horweyn(733) duuban bay hadhaye,
Dibjirkiyo(734) dugaaggu ha baryeen dawladdaan nacaye.

8) Cali Cilmi Afyare, oo ah gabyaa weyn oo caan ah, gabayo badan oo uu tiriyey oo uu kaga hadlayey hanashada iyo hoggaaminta toosan ee xornnimada Soomaaliyeed, qaar ka mid ah ayuu gabyaagu xornnimada ku matalay hal geel ah. Gabyaaga wuxuu u arkaa in xorriyadda haddii si wacan loo maamulo, ay shicibka deeqayso, sida ay reer idil u deeqdo hal dhashay oo si wacan loo xannaaneeyo.

Hase yeeshee, muddo yar ka dib, dhaliilihii badnaa ee soo if baxay, gabayo uu ka tirshay gabyaagu, waxa ka mid ah tixaha hoos ku qoran oo muujinaya qawadka ka galay maamulka dawladnimo, wuxuuna yidhi isaga oo xorriyaddii ku matalay hal:-

Dambarkeeda Maandeeq kolkii weelka lagu duugey,
Durdur(735) iyo rakaad(736) caanihii duul yar baa dhamaye,
Dibjirkii u soo diriray iyo doorki(737) la illowye.

9) Geeraarka hoos ku qoran oo laga soo qaatay geeraar dheer oo Cali Cilmi ku muujinayey murugada weyn ee ka haysey maamulxummadii ku dhacday xorriyadda, wuxuu muujinayaa sida hashii oo lagu matalay xornnimadii ay u darxumootay iyo xaaladda xun ee guud ahaan dalkii ku sugnaaday. Wuxuuna yiri gabyaagii:-

Raggii dhuubka(738) la saaray baa,
Dheerdheertaynu(739) ulayniyo,
Ka darraaday dhurwaayoo,
Hashii bay dhagax meelliyo,
Dedib aan dhur(740) lahayniyo,
Dhooddi baas ku xireenoo,
Markaasay dhutisaayoo,
Dhogorteedu xumaatayoo,
Dhugan weyday ilmihiiyoo,
Guja dhiig laga keeniyo,
Dhufooleey(741) ku dileenoo,
Dhiiqis(742) baa laga waayey,
Markaasay baryo dheeriyo,
Dad kaleeto u dhoofiyo,
Deyn la soo dhuranaayiyo,
Dhegxumo tii ugu weyn bay,
Dhabarka nooga rideen.

10) Tixaha hoos ku qoran oo laga soo qaatay gabay uu tiriyey Cali Cilmi, waxay ka warramayaan markii Kacaankii 21-ka Oktoobar 1969-kii la wareegay maamulkii dalka, sida murugadii jirtay isugu beddeshay yididiilo. Gabyaagu isaga oo xorriyadda ku metelay hal, wuxuu yiri:-

Intii talada Gaashaandhiggiyo(743) Golaha(744) loo dhiibey,
Garta laguma eexdee miyaan Goodirkii dararin(745),
Godolkeeda Maandeeq miyaan gaawe lagu maalin,
Galaxa(746) iyo dhaydii sow idin ma soo gaarin.
Galladdaa(747) Kacaankaa leh iyo geesigaa kacaye,

Muddo yar ayaa shacabkii Soomaaliyeed ku arkay waxqabadkii kacaanka. Farxaddii laga qaaday iyo sida raalliga looga noqday hoggaaminta kacaanka, waxaa muujinaya dhawrkan tuduc ee hoos ku qoran ee uu tirshay Cali Cilmi. Gabyaagu isaga oo xorriyaddii ka dhigaya hal geel ah, wuxuu yiri:-

11) Horaaddada(748) hasheennii la jaray haanta lagu maalye,
Hareeriga kolkay daaqday iyo haabashadaa(749) sare,
Haynweydey caanihii kolkii hawdka loo raraye,
Ka hiraabte(750) ubadkii jashiyo Hiiradkii(751) jiraye,
Hamba qabate calankeennii hoos u fooraraye.

12) Qiimaha geelu leeyahay inuu sare i kaco mooyee, marna hoos uma dhicin, si kasta oo magoolooyin u dhismeen, wershado iyo beero la sameeyey, guud ahaan laxjeclada geelu isma dhimin. Cali Cilmi oo gabay dheer kaga faallooday qiimaha geela, waxa laga soo qaaday qeyb ka mid ah gabaygaas oo muujinaysa in qiimihii waagii hore geelu lahaan jiray, weli leeyahay, dhaqashadiisana sidii waagii hore loo jeclaa weli loo jecel yahay. Gabyaagu wuxuu yiri:-

Sucsuc(752) iyo dhanaan iyo karuur sabarka(753) kuu buuxsha,
Sulux(754) dhay ah iyo xoor ku siman, Seenyoy adigaa leh,
Sar iyo hilib sareediyo baruur subag la xuukeeyo(755),
So' la kariyo saaf(756) kuu dhigmiyo salay midaad saadho,
Sagandaaqa(757) naaxiyo kolkaad qalato siiggeeda(758),
Sagaal reer ku filan iyo martida socotadeediiye,

Saymaha(759) colaadeed haddii sumucu(760) yeeraayo,
Safayn laysu qaatiyo dagaal si xille loo dhaartay,
Saylaanka(761) dhiiggiyo birtoo la isku saafaayo,
Sulux iyo heshiis baa iyada lagu samaayaaye,
Si kastoo laguu diley hortii waa ku samirtaaye.

Subbeehiga(762) ilaashiyo nin lihi seexan kariwaaye,
Subac iyo Quraan lagu akhriyo sabadka(763) ay daaqdo,
Sakadoo laga baxshiyo sadaqaday Suub ku dhaqantaaye,

Suldi(764) lacaga suuf iyo xariir suuq la kala iibsho,
Sarahaa ka doorroon guryaha saqafka dhaadheere,
Sawaariikhda duushiyo sancada socota mooyaane,
Lama siisan karo xoolo kale sidigta Dhaameele,

Waxba yaan surweel midable iyo saacad lay xirine,
Sicirka dunida geeleennu waa ugu sarreeyaaye,
Soomaaligii diidayow waad silloon(765) tahaye.

13) Gabyaaga caanka ah ee Guhaad Cabdi Gahayr, gabay uu tiriyey dhawrka beyd ee hoos ku qoran oo lagu soo qaatay, waxay muujinayaan sida gabyaagu

xornnimaddi ugu matalay hal geel ah, isaga oo ku waaninaya dadkana inay si feejigan xaqooda ay gumeysiga uga soo dhacsadaan. Wuxuu yiri gabyaagii:-

Dhacsannoo xaqeennii ninkii haystey dhabankaagye(766),
War dhaqaaleeya dhawrtana(767) ka jira dheelli(768) ka ogaada,
Dhex taagnaada Maandeeq dhashaye, dhamana karuurkeeda,
Dhar qudhaa la wada leeyahee nabadda dheereeya,
Is dhunkada dhibkii horena jara dhuugga ka heshiiya,
Haw dhicina cadowgiinna oo dhab ugu soo jeeda,
Waa laydin wada dhawrayaaye ceebi yay dhalanin.

14) Guhaad markuu dareemay in uu qalloocday hoggaamintii xornimada, waano kasta oo uu jeediyeyna la qaadan waayey, himiladii xorriyadda dadweynuhu ka lahaana la waayey, ayuu tiriyey gabay murugo ah oo laga soo qaatay beydadkan hoos ku qoran, oo xornnimadii hal geel ah ku metalaya:-

Maandeeq markay curatay ayey laba mas raaceene,
Malkadaan(769) lahaa way ka fuli yaa mid jiifsadaye,
Marti loo lisaa iyo ma jiro maqal(770) la nuujaaye,
Waa meehannow(771) aan ka bixin xerada maantiiye,
Ma maggowdo oo waa waxaan meel u daaq tegine.

15) Maansoolaha wayn ee Maxamuud Cabdillaahi Ciise (Sangub) oo ka mid ah dadka sida badan xorriyadda ku metalay geela, heesta hoos ku qoran oo uu tiriyey, waxay ka warramaysaa sida shicibka soomaaliyeed isugu diyaariyey dhibaata kasta oo uu kala kulmo dhaqaaleynteeda habboon, iyo dheefta badan ee uu ka sugayo. Wuxuuna yidhi:-

Haddii aanad Dheehooy(772),
Dhabba(773) dheer ku taagnaan;
Oonu doobka dhaarsani,
Dhaaxa(774) leyl socon;
Oon dhenged buladle(775) geeljire,
Kugu dheelmin galabtii;

Dhallaankiyo haweenkuna,
Haddaanay dhoombir(776) wada xidhan;
Dhallinyariyo waayeel,
Haddaan dhidid la wada qubin,

Ogow dhaadashada(777) guud,
Summaddaada dhalashada ah;
Inaan dhabanka laga tirin,
Cidna aanay dhalan rogin;
Waa laysku dhaarsaday.

Dheehooy oloshaye,
Dhabbay noqon,
Dheehaay oloshaye,
Wax baa dhici.

Dheehaay oloshaye,
Dhul baad noqon;

Dheehaay oloshaye,
Dad baad dhali.

Haddii aanad Dheehooy,
Dhabba dheer ku taagnaan;
Oonad buura dhaadheer,
Kaga dicin habeennimo;
Cududlaha(778) dhaarsani,
Aanu xerada kuu dhigin.

Hawaas dhinacyadeedii,
Haddaan dhaanta(779) laga tuman;
Oon dhiisha caanaha ah,
Looga shubin dhallaankii.

Haddii aanay dharaar noqon,
Shanfarood dhirbaaxadu;
Oon dhiigga geesigu,
Kugu beerin midhihii;
Dhigniintayda(780) maad noqon.

Dheehaay oloshaye,
Dhabbay noqon;
Dheehaay oloshaye,
Wax baa dhici;
Dheehaay oloshaye,
Dhul baad noqon;
Dheehaay oloshaye,
Dad baad dhali.

16) Gabyaagii Cabdi Iidaan, gabay uu tiriyey oo beydadka hoos ku qoran laga soo qaatay, wuxuu ka faallooday hanashadii xornnimada soomaaliyeed barwaaqadii laga helay iyo niyadsamida ku abuurantay shicibka soomaaliyeed. Gabyaagu isaga oo xornnimadii ku metalaya hal geel ah wuxuu yiri:-

Inta badan hashii lagu tabcee awrka loo tu'iyey(781),
Afatiyo(782) hashii toban bilood inanku raacaayey,
Irmaanaatay Maandeeq haddaad u iman lahaydeene,
Afarta naasba waa hoorayaan sida iliileede(783),
Aagaamihiyo dhiilashaan aad u culayaaye.

17) Maxamed Gacal Xaayow, gabay uu leeyahay, oo laga soo qaatay dhawrkan beyd, wuxuu kaga warramay in sida keliya ah ee geel lagu shafeecsan karo ay tahay iyada oo dhib iyo tacab badan loo maro. Sidoo kale, xorriyaddana waxa wax laga dheefi karaa, kolkii loo dhibtoodo ee tacab badan lala yimaado. Gabaygagu isaga oo isku matalaya xorriyadda iyo geela wuxuu yiri:-

Geel aan nin lahu dhaqan, gool(784) iyo dhugato waw halise,
Garaangoor(785) candhada gooya iyo shilintu waw gaare,
Xornnimaa la mid ehe waa adduun xulashadiisiiye.

# Erey-Furka

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Odhaahda | = aan qorrayn |
| 2. | Da'da | = faca waqti |
| 3. | raadraacyo | = tixraacyo |
| 4. | Tayadoodii | = qiimahooda |
| 5. | dheefta | = nacfiga |
| 6. | meheradaha | = xirfadaha |
| 7. | maansooyin | = qaab tixo ah u dhisan |
| 8. | shubaasha | = warrabinta xoolaha |
| 9. | salsalka | = heesaha awrta loo qaado |
| 10. | Tix | = hab miisaan iyo qaafiyad leh u dhisan |
| 11. | curiyey | = hal abuuray |
| 12. | baadigoobkaas | = raadinta |
| 13. | sugneyn | = aan sax ahayn |
| 14. | adeegsadaan | = isticmaalaan |
| 15. | kaaftoomid | = ku koobnaanin |
| 16. | xogogaalsaneyd | = warkooda haya |
| 17. | qeexi | = caddayn |
| 18. | faciba | = da'da waqti |
| 19. | Cimilada | = kulka iyo qabowga meel |
| 20. | dabiicaddiisa (dalka) | = abuurta dhulka |
| 21. | kaymo | = dhir badan oo dhaadheer leh |
| 22. | banan | = dhul siman oo aan buuro iyo dhir lahayn |
| 23. | dalag | = waxa la beerto |
| 24. | meheraddooda | = wadarta meherad (xirfooyinka) |
| 25. | aaran | = barwaaqo badan |
| 26. | seejiyo | = aanu ku di'in roob |
| 27. | oollimaadka | = beeluhu deggen yihiin |
| 28. | gammaan | = fardaha, baqlaha iyo dameeraha |
| 29. | gaadiidsi | = rar iyo fuullimaad u isticmaalid |
| 30. | meesiyada | = noocyada xoolaha la dhaqdo |
| 31. | gaadiid | = wax lagu qaato ama la fuulo |
| 32. | godolkiisa | = dheddigiisa la maalo |
| 33. | diimoona | = qarsoona, dahsoona |
| 34. | gegsan kara | = adkaysan kara |
| 35. | badasado | = sida badan caadaysta |
| 36. | biddo | = doorto ama xusho |
| 37. | walbahaar | = welwel badan |
| 38. | waxku-oolnimo | = wanaagga wax leeyihiin |
| 39. | baaxad | = ballaca ama dhumucda |
| 40. | madi | = caano badan, - laga liso |
| 41. | xigsin | = waqti xoolaha irmaani gaaraan caana ka lisid |
| 42. | igadh | = neef irmaan oo ilmihii ka dhintay |
| 43. | maggaabo | = cantuugo caana xoolaad |
| 44. | dadban | = aan toos ahayn |
| 45. | saxar | = qashin yar |
| 46. | kaluulistaa | = caana lis ah oo kulul |
| 47. | kumaanka | = kuusan oon dhuubneyn |

48. Maay = lahjadda lagaga hadlo Gobollada J/Sare
49. Xayle = hal magaceed
50. tulud = neef geel ah
51. ged = dabeecad ama camal
52. maran laan = maraq la'aan
53. mamaadkaa = muuqaalkaa
54. menki = guri ama aqal
55. roogno = joogno
56. moosin = waqti ama xilli
57. mirishi = waqti habeennimo caano mar kale xoolo laga soo liso, xigsin
58. dhallaan = carruur aan garaad wacan lahayn
59. gudhay = maalid ama nuugid ka joogsaday
60. abaydin = ilma yar oon naaska hooyadii nuugin
61. darar = caana badan oo ku joogsada naasaha
62. afada = haweeney la qabo
63. xigto = dhalasho ahaan isu dhow
64. ladnaan" = caafimaad wacan iyo hanti badan lahaan
65. muquuno = xoolo kaalmo la isu siiyo
66. Aqallaale = meel oommana ah magaceed
67. asqo = diifta harraadka badani reebo
68. iltiriyeen = aad u buuxin
69. aano = nac ka dhexeeya laba dhinac; dekano
70. diihaal = daal badan
71. Dhoor = hal magaceed
72. Qiyaas = hal magaceed
73. Qoran = hal magaceed
74. quud = wax la cuno; dheef
75. qandho = xummad xanuun keeno
76. kaliil = xilli kulul oo waqtiga roobka ka horreeya
77. beel = dad meel wada deggen
78. goblan = qof aan ubad lahayn, gaar ahaan wiilal
79. sòòr = wax la cuno; cunto
80. sabab = dhacda waxa keena
81. qadhaab = midhaha iyo xabagta dhirta laga gurto
82. qun = si aad ah
83. Qaayib = hal magaceed
84. quullaha = geed qodax leh oo dhulka ku fida oo midha bixiya
85. qiiq = qaaca dabka
86. irmaan = dheddigga xoolaha iyo dadka inta uu caana leeyahay
87. afarraysane = afarta naasba ka maran
88. tamar = awood wax lagu qabto
89. adadayg = xoogga iyo u-adkaysiga hawsha muruqa
90. Tixo = hadal miisaan iyo qaafiyad leh oo murti ah
91. neef = mid ka mid ah noocyada xoolaha la dhaqdo
92. miidaamiyo = nac darteed la fogeeyo
93. baatir = qaalin geel ah
94. barooddada = qaalin aan waqtigeedii rimin
95. big = dhibic yar oo caanood
96. biid = wax yar
97. xoorka = xumbada caanaha marka la liso

| | | |
|---|---|---|
| 98. | muteysto | = xaq u helo, galabsado |
| 99. | Danqad | = hal magaceed |
| 100. | Goodir | = hal magaceed |
| 101. | hambo | = Waxa ka hara (cuntada, iwm) |
| 102. | ummùl | = haweeney dhashay |
| 103. | Kebdo | = nooc ka mid ah dadabta aqal soomaaliga |
| 104. | badar | = meseggeda iyo galleyda mirahooda |
| 105. | Koronkor | = miraha meseggeda oo la kariyey |
| 106. | sibraar | = weel harag ka samaysan oo caanaha iyo biyaha lagu shubto |
| 107. | sahay | = cuntada iyo cabbidda safarka loo qaato |
| 108. | socdaal | = safar dheer oo meel durugsan lagu aado |
| 109. | Seenyo | = hal magaceed |
| 110. | Libinkeeda | = caanaha geela |
| 111. | sahan | = socdaalka meel lagu aado ee lagu hubiyo daaqa meesha |
| 112. | Afmeerrada | = meel magaceed |
| 113. | surmiyo | = aad loogu harraado |
| 114. | sidig" | = laba halaad oo irmaan oo ilma wada nuugo |
| 115. | marti | = qof ama dad socdaal ah oo dad kale u hoyday si ay uga helaan jiif iyo cunto |
| 116. | sooryo | = cuntada la siiyo martida, iyo dadka kale ee la xushmaynayo |
| 117. | bulaan | = hadal badan oo mar wada yeeraya |
| 118. | nacfiga | = dheefta wax la cunay ama la haysto leeyihiin |
| 119. | jurmi | = jiidh badan |
| 120. | jinow | = caana dhanaan |
| 121. | Jaawo | = hal magaceed |
| 122. | melegga | = wedka |
| 123. | so'da | = hilibka geela |
| 124. | Suub | = hal magaceed |
| 125. | sixin | = subag laga saaray caana la lulay |
| 126. | sadaqo | = xoolo ama cunno barako iyo naxariis ahaan loo siiyo dadka baahan |
| 127. | Ibil | = hal magaceed |
| 128. | dhuuxa | = subagga lafaha ku dhex jira |
| 129. | lanki | = ninkii |
| 130. | aamo | = cuna |
| 131. | leegteeg | = xoog yeesha |
| 132. | Saluugla | = hal magaceed |
| 133. | sokaa | = hilibkaa |
| 134. | saloolkaa | = hilibkaaga duban |
| 135. | sikadaaw | = ma furfurmo jidhkiisu |
| 136. | wal | = wax |
| 137. | Siidigay | = Ilaahay |
| 138. | siddi | = saddex |
| 139. | shidho | = xoolaha (ariga) reerku iskiis u qasho |
| 140. | taakulo | = kaalmo |
| 141. | Teeyo | = hal magaceed |
| 142. | Tebbed | = nooc ka mid ah weelka subagga lagu shubto |
| 143. | Ilacas | = meel magaceed |
| 144. | barraxo | = bandhigo |
| 145. | Beyl | = hal magaceed |

146. wiiqmaan = waxyeello gaarto
147. Salwo = hal magaceed
148. Sool = meel magaceed
149. Seeri = meel magaceed
150. gog = weel subag oo saan geel ka samaysan
151. gumbis = hab hilibka loo kariyo
152. samaaday = hagaagay
153. guutooyin = colal xoog leh
154. habsatay = si xoog leh u fuushay
155. heelka = meel bannaan oo guri u dhow
156. guurti = qof ama dad garasho badan
157. buubo = awr rarkii la boodbooda
158. carbiyo = laylyid ama tababarid
159. abaahiyo = rati qoodh ahi markuu fuulo hal
160. gòòl = neef geel ah oo hilib badan
161. dhufaan = awr xiniinyihii laga saaray
162. gabaabsi = heerkii u dambeeyey maraya
163. weyd = aan hilib wacan lahayn; caato
164. aayaha = mustaqbalka waxa lagu sugnaanayo
165. maato = carruurta iyo haweenka
166. xaaluf = meel aad loo daaqay oo daaqii laga dhammeeyey
167. raray = rar la saaray
168. hayin = awr rarey ah oon carar iyo dhib kale lahayn markuu raran yahay
169. dhaansado = biyo la cabbo xoolo ku qaadasho ama doonasho
170. duubasho = qayb ka mid ah aqal soomaaliga oo raradu ka mid tahay
171. dheelli = rarka awrta oo dhinac u liica
172. geeddi = meel la deggenaa ka guuridda
173. gurgurka = weelka aqal soomaaliga
174. agab = alaabada aqalka
175. qatan = aan cunto iyo cabid helin
176. baad = daaq cusub
177. rakuub = awrka sida fardaha la fuulo
178. culaab = culeyska alaabta
179. taxaabo = hoggaan ama jaro ku xaxeyn
180. jibaaxaa = meel ciriiri ah ama dhir leh marid
181. moodka = hantida aan ahayn xoolaha nool
182. Adari = magaalo magaceed
183. Maarshee = magaalo magaceed
184. Garduur = magaalo magaceed
185. taboodiga = xoog iyo laf leh
186. Bacadle = awr rarey ah oo midab cad leh
187. boqoolsiiyey = waqti kulul la socodsiiyey
188. bakun laha = weyl la dhaansado
189. dhoomo = haamo waaweyn oo la dhaansado
190. waqaan = weligaa
191. shalow = meel aad u hoosaysa oo halis ah
192. shillal = laamo hilibka xoolaha la kor saaro marka la qalayo
193. shaloombiyin = ku dul ururid
194. cataabayee = dhib ka cabanaya
195. caynku = xarig awrta la rarayo labadiisa dhinac la iskaga gudbiyo

196. dhaanqa = ratiga dhaanka ah
197. enhaa = aynu nahay
198. dhillaan = dhallaan ama ilmo
199. dhibboodo = dhibtoodo
200. dhafar = soojeed habeennimo
201. dhidhamis = wax la cuno, dhadhamis
202. dhinnigoo = dhinacoo
203. dhignooy = dhigney ama deyney
204. hoollan karin = awoodi karin
205. Da'arre = awr magaciis
206. daaddey = ilma yar
207. dheelka = cayaarta
208. dogga = duqa
209. doonka = dushaada
210. daw = ceel biyood
211. sheenti = keentay
212. maxas' = dad jilicsan (carruur & haween)
213. goldheer = baahi darteed beer godan
214. gaban = qof cimri yar
215. agoon = qof aan aabbihii nooleyn
216. dhay = caana xoolaad oo cusub
217. Dhooble = awr rarey ah magacii
218. dharaar = maalin iftiinku caadi yahay
219. maal = xoolaha la dhaqdo oo mood iyo noolba leh
220. saranseermay = si hagaagsan u di'in
221. Sud = meel dhir badan oo mugdi leh
222. Gaaroodi = meel magaceed
223. lallabbo = kaco ama arrinsado
224. Koran = awr aad u naaxay
225. keeno = xarig gafuurka laga geliyo awrta marka la hoggaaminayo
226. sintooda = dhinacooda ama agtooda
227. sibirta = lugaha dambe ee geela dhexda ay ka laabmaan
228. qarqarsiga = hab la isugu xiro addimada hore iyo luqunta awrta rereyada ah marka la fadhiisinayo
229. sakalo = xiro ama qabto
230. sayncaddaha = rarey xoog leh oo midab cad
231. heeryada = huga rareyda dusha laga saaro oo culeyska culaabta ka celiya
232. sandahay = sakhiray
233. samay = si toosan u farriso
234. adhaxda = dhexda duudka sare ee nafleyda
235. surradda = aqal soomaaliga intiisa duubashada ah ee rarada iyo kebduhu ka mid yihiin
236. ubbada = weel subagga lagu keydiyo
237. teedsan = safan; meel wada yaal
238. saabka = qoryo si qaab leh la isugu xirey oo haamaha iyo ubbooyinka lagu rido
239. hààn = weel la tolay oo biyaha lagu keydiyo
240. lool = dhigaha yar yar
241. guro = meel yar oo godan oo gaadiidka raran dushiisa laga sameeyo oo la saaro dadka jilicsan iyo maqasha
242. suryada = hababka xarkaha loo gunto mid ka mid ah oo furiddiisu sahlan tahay

243. suuradaha = Qur'aanka qaybihiisa mid ka mid ah
244. suluf = oon iyo kuleyl badan
245. siinad = nooc ama jaad
246. tagoogo = addimada hore ee geela qaybtooda sare
247. taakin = qiyaasta u dhexeysa suulka iyo fardhexada oo la fidiyey
248. baaddiyo = baadi noqda
249. balalaclayn = naxdin la bug-bugleyn
250. hogob = meel daaq iyo hadh wacan leh
251. haleelo = geel dhalay oon la marin
252. mirasho = habeenkii xoola daajin
253. raagsiinyo = daahid dheer
254. dhadi = qabow badan
255. naq = daaq jilicsan oo cusub
256. talanteelliyoobow! = si isdhaaf ah u socdow!!
257. geyiga = dhulka ama carrada
258. hayaan = geeddi dheer oo reereed
259. gabbaad = meel dugsi leh
260. gucle = orod aan badneyn; rucle
261. gaatay = xushay ama doortay
262. kadeed = dhib iyo rafaad badan
263. guul = natiijo wacan; lib
264. guure = habeensocod
265. jarmaado = arooryo hore; socod
266. guddoonsado = go'aansado; ku tashado
267. min = wadarta min; guryo
268. seben = waqti ama xilli
269. mudneysey = wax mudan ka dhigtay
270. dîîf = jileec iyo silic dhibi keentay
271. faciis = weligiis
272. Garo = ri' magaceed
273. gadiidsado = xumaado
274. Giir = sac magacii
275. miis = wanaag ama nacfi
276. Gidir = sac magaciis
277. gunno = dheef yar
278. Gooha = hal magaceed
279. reen = nooc ka mid ah codadka geel oo wax rabid muujinaya
280. abid = weligeed
281. gablooleyn = xumaan jeelaneyn
282. bila = hagaajiya ama qurxiya
283. gardhaaleey = garaaraley
284. gucuri = hunguri
285. gulungulcaaleey = wax iska dabadhaca sida karuurka geela
286. Good = hal magaceed
287. gabày = qabanqaayey waajibkii
288. dhimiro = camal ama meherad
289. dhuubka = qayb yar
290. karanta = xilli roobaad oo deyrta ka horreeya
291. dhiiqda = caanaha ka yimaada naasaha marka la tuujinaya
292. dharabka = qoyaanka habeenkii dhaxantu keento; dhedo
293. madiixaayo = aad u qayliyo
294. maadh = nooc ama jaad

| | | |
|---|---|---|
| 295. | jidhaamada | = meel godan oo biyo-fadhiisi leh |
| 296. | uun | = khalqiga |
| 297. | sedo | = soor ama cunto |
| 298. | sabuullada | = madaxa miruhu ku yaallaan ee badarka |
| 299. | aafoobo | = dhibaatoobo |
| 300. | sulufka | = kuleylka badan iyo habaaska abaartu keento |
| 301. | tooyo | = xulo ama dooro |
| 302. | tabaaloobay | = dhibaato weyn gaartay |
| 303. | tubta | = waddo la maro |
| 304. | duleedka | = dibadda meel la deggen yahay |
| 305. | toobkaha | = hadhuubka geela lagu maalo |
| 306. | muruxday | = diirkii sare ka dhacay; daaq ku oollin |
| 307. | malkaxay | = aad u adkaatay |
| 308. | midhif | = wax yar; in yar |
| 309. | Weehad | = hal magaceed |
| 310. | fajacay | = aad looga yaabay |
| 311. | fidho | = siigo dabayl leh |
| 312. | foore | = dabayl xoog leh |
| 313. | barbarka | = jiilaalka |
| 314. | loo | = lo'da |
| 315. | errin | = ariga |
| 316. | bedefi | = guryaha ama reeraha |
| 317. | diimo | = lala yaabo |
| 318. | biddin | = dhogortiisa ama oogadiisa |
| 319. | bati | = soo baxdo |
| 320. | suudigii | = kuleyl badan |
| 321. | Sool | = dhul dhir sare leh oo commane ah |
| 322. | Jamal | = awr hilib badan leh |
| 323. | dhadhaab | = meel adag |
| 324. | dhaateene | = aad loogu faano |
| 325. | heyjad | = dhul cid la' ah |
| 326. | qorfaha | = dhul aan daaq, biyo iyo degaan lahayn |
| 327. | qafimayaaye | = waqti dheer joogayaa, raagayaa |
| 328. | jooharad | = wax aad loo jecel yahay |
| 329. | jeelka | = baahida dhanaha |
| 330. | milicda | = kuleylka qorraxda |
| 331. | moodka | = hanti aan nafi ku jirin |
| 332. | doonka | = adhiga yaryar ee jilicsan |
| 333. | malkada | = meel bannaan oo ceel ama guri u dhow |
| 334. | muhanayn | = qalbigu jeclaanayn |
| 335. | Mudha | = hal magaceed |
| 336. | Maycas | = nooc ka mid ah midabka geela |
| 337. | mili | = jirridda dhalashada |
| 338. | baylah | = aan la ilaalinaynin |
| 339. | maqaaf | = tamar ama waxtar yar |
| 340. | barraahsaday | = aad u dheeraaday |
| 341. | Baryar | = hal magaceed |
| 342. | daaduf | = fudeyd iyo nugeyl leh |
| 343. | Turmaag | = meel magaceed |
| 344. | tubayoobay | = caato darteed is tubay |
| 345. | Xay | = sac magacii |
| 346. | takaraale | = Takar badan leh |
| 347. | luudaan | = itaal darro darteed qun yar socod |
| 348. | Dugal | = hal magaceed |

349. Sibi = meel magaceed
350. Sabool = qof aan hanti badan lahayn
351. Werdi = Hal magaceed
352. waaga = subaxa
353. Weyrax = hal magaceed
354. hiyiga = niyadda ama qalbiga
355. maamuus = sharaf, magac
356. faddishay = qiima u yeeshay
357. tolleey = dad badani wadaago
358. gadaaman = hareeraha ka joogaan
359. xirib = xeelad ama tab
360. raysin = gedal badan oo meel wada gala
361. kadin = xero ama qayb geel ah
362. xulquun = wax la cuno ama quuto
363. dhuuni = wax la cuno
364. lexjeclo = jeclaanta tabcashada xoolaha
365. dhiidhi = diidmada ama ka dagaallanka xummaan
366. habacsanaya = si aan dhib lahayn u cabbid
367. ramag = geel dhalay oo caana badan
368. rucleyn = qunyar ordid
369. gaaf = korka ama dusha sare
370. gaan = tiro badan
371. Wiirsi = hal magaceed
372. xasili = qun yar meel joojin; dejin
373. Dhebi = hal magaceed
374. Geydho = hal magaceed
375. gurbood = carruur yaryar
376. garanuug = nooc ugaadha ka mid ah
377. mulki = hanti ama wax la leeyahay
378. heegan = diyaar u ah
379. maandhugad = garashada qofka taabanaysa
380. godob = dakano; aano
381. garow = gar bixin
382. goonyaha = hareeraha
383. dhagar = dhibaato waxyeello hore sababtay
384. ledi waayey = seexan ama jiifsan kari waayey
385. goommoon = cunto u baahan
386. hagrado = awood la haro ama kaga bakhaylo
387. Beyla = hal magaceed
388. magta = xoolaha laga bixiyo qof la diley; diyo
389. dakano = aano, godob
390. qaan = xoolo la isku leeyahay ama dhaawac la isu geystay laga xukumay
391. qadar = sidii Nebi Khadar
392. qisaas = dil naf ka goys ah
393. Qawl = hal magaceed
394. adarta = heesaha geela lagu amaano
395. maddi = markii, goortii
396. MAARREEGA = waran mirir yeeshay
397. minis = la isku
398. miirrance = nin magac leh
399. maroor = nin cirroobey; waayeel
400. dhiyo = dhacaan

| | |
|---|---|
| 401. murraada | = haweenka |
| 402. mayllan | = ul labada dhinac wax ka mudda |
| 403. mariidka | = sunta |
| 404. megel | = nin |
| 405. koyti | = timaaddo |
| 406. erri | = yiraahdo |
| 407. mud wiinta | = calool weynta |
| 408. meylle | = meesha |
| 409. Galool | = awr laf weyn |
| 410. qeermo | = qaalmo |
| 411. meyshey | = qaalmahaaga |
| 412. middooyyi | = qaarkood |
| 413. saldamay | = murmay ama dagaallamay |
| 414. sabada | = ceelka haraarihiisa |
| 415. saynsaabo | = maslaxeeyo |
| 416. sooyaamo | = qeylo dheer sameeyo |
| 417. sergo | = ul yar oon dhumuc weyn lahayn |
| 418. Seeri | = hal magaceed |
| 419. Luuli | = hal magaceed |
| 420. ugub | = aan weli curan ama dhalin |
| 421. gashi | = eed ama deyn |
| 422. goobta | = meel lagu dagaallamay ama garramay |
| 423. gaas | = col tiro badan |
| 424. iilka | = meel xabaasha ka mid ah oo meydka la dhigo |
| 425. gaari | = gabar ama haweeney karti badan |
| 426. Baari | = hal magaceed |
| 427. taawiye | = la bidey, la moodey |
| 428. baalliye | = baasheeda ama agteeda |
| 429. baftahaan | = sida marada baftada ah |
| 430. bilbil | = koodhka ama foolka |
| 431. boodka | = oodda ama sarsarka |
| 432. booddiyeey | = bawdadeeda |
| 433. muddayac | = qof aan feejigneyn oo xoolaha lumiya |
| 434. doorka | = kuwa anaag ama karti lagu doorto |
| 435. dumaal | = guurka haweeney ninkeedii hore dhintay |
| 436. Gosol | = hal magaceed |
| 437. garoob | = haweeney la furey |
| 438. gashaanti | = gabar aan weli la guursan |
| 439. Good | = hal magaceed |
| 440. xiisto | = naftu jecleysato |
| 441. gaafwareeg | = meel dul wareegid |
| 442. geyeysiiyo | = dani kuu geyso |
| 443. maageero | = si wareego ah loo dhiso |
| 444. Kinsi | = gabar magaceed |
| 445. dhiisha | = weel caanaha lagu shubto oo siddo leh |
| 446. toobin | = af yar ama dhuuban leh |
| 447. tahan | = qiyaas dheer |
| 448. tafeennada | = dacallada marada la xirto |
| 449. tukhni | = midab aad u madow |
| 450. tayga | = midab aad u cas |
| 451. tafta | = marada (haweenka) faraqeeda hoose |
| 452. toobka | = canbuur |
| 453. Tawlan | = hal magaceed |

454. tiicaysa = qunyar soconaysa
455. tasoobayn = baadi lagu illaabayn
456. Toga = hal magaceed
457. tabanin = wuxuu doonaba waayeyn
458. taaniga = fariid karti badan
459. tabantaabo = kaalmo ama taageero
460. qab = isla weynaan; kibir
461. adyadooda = gardarrooda
462. isbiday = isu bogay
463. Baashi = qof madax ah
464. baanay = si dhaar iyo faan ah u hadlid
465. badali = si xoog iyo qaab leh
466. Shira = hal magaceed
467. Heemaal = hal magaceed
468. Shammaal = hal magaceed
469. shacab = gurya dawladeed
470. qooqaar = waageerka reerka ama oodda
471. Qadow = hal magaceed
472. Qaabbil = hal magaceed
473. hureynin = lagamaarmaynin
474. qalalaase = dhibaato colaad iyo dilba leh
475. jaanta = cagta ama kabaha
476. jirrabi = dhibaato la baday
477. Baxnaanin = Dhaqaalayn, xannaanayn
478. dhuunyeedhin = dhuunta ka qaylin
479. tiiraanyo = murugo badan
480. gooha = cod dhibi keentay
481. Maydhoweetooy = hal magaceed
482. qiyam = xeerar laga dambeeyo
483. xakowdaada = nafta
484. baarid = wax aan loo baahneyn
485. basarka = habka ama asluubta
486. barooddada = gabar ama qaalin aan yaraan ku curan
487. gedo = da' ama cimri; fac
488. gabin = kaalintiisa halleyn
489. waara = raaga; sii jira ama jooga
490. gundhay = danqay oo dhaqaaq
491. gaadashee = si gabbasho leh wax ku qabad
492. waaciidsi = wax is tarid
493. Dhammays = hal magaceed
494. tawdo = wax la waayo ama loo baahdo
495. goofaadho = wax nuugid badan
496. gaaleemo = dhogorta cufan ee nirgaha
497. hudeeca = qunyar socod
498. Warays = hal magaceed
499. Saruur = hal magaceed
500. sarinta = jeexmo yar
501. saabada = xoolaha ama adduunyada
502. saafan = la balballaariyey ama la kala bixiyey
503. sibirta = lugaha dambe ee geela dhexda ay ka laabtaan
504. mudka = hilibka geela qayb ka mid ah oo isugu jira tahar, jiidh iyo baruur
505. duudka = lafaha sare ee xiriirsan ee geela
506. soogan = kor u taagan

507. Surdhooy = hal magaceed
508. eelka = dhibaatada ama xumo
509 sarinka = geed daaqiddiisa geelu jecel yahay oo geed-gaab ah
510. siiqda = geed dheer oo webiga ka baxa
511. jadeer = geed gaaban oo caleen ballaaran leh oo xooluhu daaqaan
512. xagar = geed si ballaaran u baxa oo caleentiisa xooluhu daaqaan
513. jiq = dhir badan awgeed aan la mar karin
514. cuud = xoolaha la maalo
515. hiirta = subaxa hore
516. Haweys = hal magaceed
517. mareerka = geed dhirta waaweyn ka mid ah oo caleentiisa geelu aad u jecel yahay
518. miray = habeennimo xoolo waraabin ama daajin
519. mayrac = galab xoolo daajin
520. miyirin = si deggen wax u qabad
521. Madiix = hal magaceed
522. dixda = ciid quruurux u badan oo biyo leh
523. danan = qaylo dhuuban ama shanqar
524. maadhiinka = banaadiiqda rasaastooda nooc ka mid ah
525. direys = labbis ciidameed
526. darmaha = dhul leh daaq dhano leh
527. dhooddi = dhul carro adag oo biyihiisu dhano leeyihiin
528. dogob = qori weyn oo qallalan
529. balaxsiga = cabbid biyo aad uga dhergid
530. dhanaha = wax dhadhan dhanaan leh
531. faranka = daaqa nooc ka mid ah
532. dhukaan = jirrooyinka geela nooc ka mid ah oo qaniinyada dhuuggu keeno
533. biimo = halis iyo khatar
534. baanto = qof bukooday ama dhaawacmay
535. beytimaal = si wacan loo ilaalin; dayac
536. bulanto = afka hore ka feedhanto
537. bawdka = deyrka ama sarsarka guriga
538. xantoobsiga = si xoog iyo boob leh wax u qabsi
539. Xiis = hal magaceed
540. malaasta = dhoobo timaha raggu marsado oo nadiifisa
541 milay = biyo ama caano lagu qasay ama labay
542. Minaweey = hal magaceed
543. maanka = niyadda ama maskaxda
544. ragaadka = jab yar oo qori oo geela ka muda cagaha
545. rafanka = cagaag dhagax keena
546. himirta = geed bixiya miro yar yar oo macaan
547. hareeriga = geed dheer oo caleentiisa geelu aad u jecel yahay
548. habeedda = uskag ku dhega qaarka dambe ee geela oo kaadidiisu reebto
549. Ayro = Hal magacced
550. Caweer = hal magaceed
551. cuunka = meel dhir badan
552. cagaag = qodaxda, dhagaxa iwm ee cagaha muda
553. Cawl = hal magaceed

554. ciyoon = si degdeg ah, dhakhso
555. jaarka = hadhuub yar oo xoolaha lagu maalo
556. dholmamin = xanaaneyn ama dhaqaaleyn
557. dhidib = tiir adag oo meel laga qotomiyo
558. Dhabboose = awr magacii
559. Dhaayin = hal magaceed
560. Dhudi = hal magaceed
561. suruqda = qashin biyaha kor sabbeeya
562. milaaq = madax; taliye
563. mamac = meel leh dhagax adag
564. madyo = halo aad u caana badiya
565. hoolmay = dhogortii ama dubkii sare ka diirmay
566. sarta = saanta geela
567. sirarta = hilibka ku yaal dhinacyada geela
568. dhawrid = fiirin ama eegid
569. darka = meesha xooluhu ka cabbaan ee ceelka u dhow
570. hore = qofka xoolaha la waraabinayo mar in soo daayo
571. calfanmaayo = cunimaayo ama heli maayo
572. feeyig' = aad u dareenqab; feejigan
573. negaado = geeddi ka baaqasho
574. soodhka = bir dhuuban leh oo banaadiiqda afka lagaga xiro
575. siiqa = geed dheer oo webiga ka baxa
576. amminka = waqti; goor
577. uunka = khalqiga; mekhluuqaadka
578. abriska = nooc ka mid ah halaqa halista ah
579. seesha = meel magaceed
580. hoodada = nasiib wacan
581. hanan = helid ama hantiyid
582. coofka = dhogor shinbiraha kaga taal madaxa korkiisa
583. ceelalyo = ceel biyo ka sii qalqaalin inta aan xooluhu iman
584. saloollaado = waqti walba heegan u ahaado oo hawsheeda u joogo
585. sawlaxo = si geesinnimo leh u diririd
586. gudinta = bir iyo qori madax godan oo isku dhaaban oo dhirta lagu jaro
587. maganta = qof xilkiisii nabadgelyo cid kale ka masuul yihiin
588. Riinji = meel magaceed
589. Garane = meel magaceed
590. Laf cambe = gabayaa magaciis
591. looyaamin = geeddi wadid
592. gabraarta = ugaarsi tegid
593. birmad = si xoog leh oo degdeg ah u ciidmid
594. Xiito = hal magaceed
595. cadceedsaday = dhinaca cadceedda u socod
596. Qaayib = hal magaceed
597. tumaatida = waran ama toorrey qof darid
598. Tiirey = hal magaceed
599. gebogebo = nebadgelyo la'aan
600. dheeman = nooc ka mid ah macdanta qaaliga ah
601. luul = nooc ka mid ah macdanta
602. Dhoorwiil = hal magaceed
603. hanqalka = damac darteed hunguriga kor u taagid

| | |
|---|---|
| 604. Deeroy | = hal magaceed |
| 605. amleyda | = toorrey; abley |
| 606. durraansaday | = si niyad ah ama adag wax u weydiisi |
| 607. Daawas | = hal magaceed |
| 608. Feyd | = hal magaceed |
| 609. Boga | = hal magaceed |
| 610. Heemaal | = hal magaceed |
| 611. Baar | = hal magaceed |
| 612. Baarax | = hal magaceed |
| 613. suuf | = maryo xoorid colaad darteed |
| 614. magliga | = toorrey; amley |
| 615. makalay | = diley; laayey |
| 616. maqaawiirta | = madax sharaf leh |
| 617. maluugnaaday | = ag taagnaa oon baylihin |
| 618. mahiibsiiyo | = gacanta u gesho; siiyo |
| 619. masqaro | = dheeldheel iyo fudeyd |
| 620. Maahir | = hal magaceed |
| 621. Xayaad | = hal magaceed |
| 622. booliga | = hanti aan sharci ahayn |
| 623. had | = dhimasho ama ajal |
| 624. Diiqa | = hal magaceed |
| 625. saanad | = rasaasta banaadiiqda |
| 626. Senge | = faras xooggan |
| 627. solansiin | = garansiin |
| 628. haaliga | = hub wax lagu dilo |
| 629. holid | = isku deyid |
| 630. hirqo | = aad wax uga dhergid |
| 631. ceeb | = fool xumo, nacasnimo |
| 632. heensaha | = kooraha fardaha |
| 633. horor | = bahal aan baqan |
| 634. hawaarsaday | = meel fadhiyid itaal darr darteed |
| 635. Dhool | = hal magaceed |
| 636. luro | = dhib u geysto |
| 637. mintid | = dagaal ama hawl aad ugu feejignaan |
| 638. Idinbacas | = hal magaceed |
| 639. awlaadsadaa | = cibaadeystaa |
| 640. Weris | = hal magaceed |
| 641. Xula | = hal magaceed |
| 642. Xadeed | = meel magaceed |
| 643. Xodayo | = meel magaceed |
| 644. Xaawis | = hal magaceed |
| 645. Fanax | = hal magaceed |
| 646. gaadiidka | = bartamaha maalinta |
| 647. gammuuran | = xoog la buurraa |
| 648. gob | = geed dheer oo midho bixiya |
| 649. dheenka | = midho la cuno |
| 650. gingimay | = caloosha ka buuxin |
| 651. qaaqle | = qaraar leh |
| 652. gurgurshaa | = rarey hayin ah oo alaabta gurgurka ah lagu raro |
| 653. galliintaaye | = aad laguu baryaa |
| 654. Garawo | = hal magaceed |
| 655. Wareego | = xoolo sahay ahaan loo kaxaysto marka la duulaayo |

656. sabarka = dhexda qofka
657. dheelmatiin = galab meel aadid
658. dhaantada = cayaaraha nooc ka mid ah
659. saamiga = qayb ama in
660. dharaarsiiyo = maalin cunto siin
661. dhaabad = dhib adag ama xujo
662. Dhooddi = faras magacii
663. dheelka = qoyaanka uu keeno qabowga habeenkii
664. dhuyac = geed aan qodax lahayn oo caleen yaryar bixiya
665. dhuundhas = geed xabag leh oon qodax lahayn
666. jiiqa = geed qodax leh oo dheer
667. dhagaxwaaq = burbur iyo baaba' xoog leh
668. dhalafalluuq = madax wareer
669. dhinbiliil = midho ka baxa dhirta qaarkood xilliyada - qaarkood oo geelu jecel yahay
670. dhaylaysi = neef yaraan ku qalid
671. cutubka = qayb ama qaar
672. sarbeebta = si maldahan wax u sheegid
673. dareenka = wax ogaalka
674. muuqaal = qaabka ama aragga wax leeyihiin
675. gegida = meel bannaan
676. dhiidhiibin = meyd ahaan meel dhigid
677. dhererida = xiidmaha geela ee baruurta leh
678. dhaadka = qaybta hoose ee lugta oon cagtu ku jirin
679. dar = qaar ama kuwo
680. urugo = cadho badan; uurxumo
681. dhunkaal = geed sun leh
682. dhab = aan been ahayn; run
683. dhirif = xanaaq badan
684. dhirillo = dareen waxyeello oo dhac ama dhimasho ah
685. dhagar = gado; dekeno
686. mataanayn = laba ilmood mar wada dhalid
687. Maandeeq = hal magaceed
688. magawdo = caano naasa ku joogsi
689. diihaal = dhibaato iyo hawl badan
690. galawga = shimbiraha nooc ka mid ah
691. geeddanka = col loo diyaariyey inuu difaaco xoolo la dhacay; raadca-reeb
692. goodka = nooc ka mid ah halaqa halista ah
693. gaal = qof aan rumeysnayn Islaannimada
694. geydh = cadho badan
695. muquunin = xoog wax meel marin
696. guntane = dadka maryaha guntada; ragga
697. galool = geed dheer oo qodax leh oo mayraxdiisa waxyaalo badan laga sameeyo
698. maraaga = geed weyn oo qodax fiiqan leh
699. kidiga = geed weyn oo qodax buuran leh
700. geylaanshay = xoog wax u ridid
701. sidkeedii = muddada ilmaha uurka lagu sido
702. gaagixin = neef irmaan caana laga lisi lahaa ku dhaafid
703. gantaalaha = nooc ka mid ah hubka la rido oo meelo fog wax ka dila
704. gaaddada = laabta qaybteeda sare
705. gabboon waayey = dhuumasho diid

706. goroyacowl = dheddiga gorayada
707. majarahabaabay = jidhkii habboonaa ka lumay
708. gaaxin = neef irmaan maaliddiisa dib u dhigid
709. gayaxa = maraqa naasaha geela lagu maro si aan loo nuugin
710. ganuun = aad hoos ugu dheer
711. galaydhyaayey = aad sida galaydhka u qaylinaayey; heesaayey
712. magoolaha = cagaar bixiya
713. Gaaroodi = meel magaceed
714. labagar = meel magaceed
715. Guudaan = nooc ka mid ah cudurrada geela
716. garaabiido = cudurrada geela nooc ka mid ah
717. gulaan = nooc ka mid ah awrta qoodha ah
718. gubadlaha = awr qoodha oo taya ahaan liita
719. gol = meel buuro dhexdood ah
720. gujada = candha garaacid si caano uga yimaaddaan
721. gommode = caana la'aan dartood qallale
722. Gobaad = hal magaceed
723. gobno = neef ama hal caana yar, badho
724. googooye = wax kala qeybiye, wax iskuma wade
725. gaawaha = weelka geela lagu maalo
726. gumoobey = gun noqday
727. saluugay = diidey xumo muuqda darteed
728. gurracan = aan qummanayn; qalloocan
729. Dawaar = hal magaceed
730. diraacdhal = xilliga diraacda dhalay
731. dambeedka = naasaha dambe ee geela iyo lo'da
732. Aloos = hal magaceed
733. horweyn = geela intiisa aan irmaaneyn
734. dibjirka = qof danyar ah oon xoolo lahayn; sabool
735. durduur = xoolo waraabin ku celcelin
736. rakaad = neef cabbey mar kale waraabin
737. doorki = ka ugu mudan
738. dhuubka = calaamad madaxnimo
739. dheerdheer = bahal ama gumeyste
740. dhur = waxtar ama faa'iido
741. dhufooley = wax la dhufanayo
742. dhiiqis = naas caana ka keenid
743. gaashaandhiga = xoogga ama difaaca
744. golaha = hoggaamiyeyaasha kacaanka
745. dararin = naaso caano ku joogsi waayid
746. galaxa = caano la qaboojiyey oo cusub
747. galladaha = wanaagga ama deeqda
748. horaaddada = naasaha hore ee geela iyo lo'da
749. haabashada = wax durugsan tiigsad
750. hiraabte = aad uga dherge
751. Hiiradkii = magac nineed
752. sucsuc = caana dhanaan yeeshay; suusac
753. sabarka = dhexda ama caloosha
754. sulux = caana saafi ah
755. xuukeeyo = xuuko ama subag laga shiilo
756. saaf = cad jiidh ah oo la ballaarshay
757. sagandaaq = nooc ka mid ah ugaadha; biciid
758. siiggeeda = nooc ka mid ah ugaadha oo dheereeya
759. saymaha = dhibaatada ama rafaadka
760. sumuc = xabbadda qaybteeda hore

761. saylaanka = daadashada ama qubashada
762. subbeehiga = ciidanka kuwa derejada yar
763. sabadka = dhulka ama carrada
764. suldi = nooc lacagta ka mid ah
765. silloon = aan qummanayn ama wax u dhiman yihiin
766. dhabankaag = la yaab badan
767. dhawrta = bahalaha xoolaha cuna
768. dheelli = dhinac u liicid
769. malkada = meesha ama kobta
770. maqàl = dhasha yaryar ee adhiga
771. meehanow = warwareeg macna la'aaneed
772. Dheehooy = hal magaceed
773. dhabbo = waddo la maro
774. dhaaxaad = waqti badan; in badan
775. buladle = madaxa ka fagmay
776. dhoonbir = nooc ka mid ah banaadiiqda
777. dhaadashada = wax ku faanid
778. cududlaha = kuwo xoog leh
779. dhaanto = nooc ka mid ah ciyaaraha
780. dhigniintayada = dadkayga ama dhashayda
781. tu'iyey = rati u fadhiisin
782. afato = xilli kulul oo abaareed
783. iliileed = sida il biyo ka socdaan
784. gool = nooc ka mid ah cudurrada geela
785. garangoor = shilin halis ah oo xoolaha qaniinta

Maansooleyda waaweyn ee maansadoodii laga soo qaatay tusaalooyin muujinaya qiimaha geela iyo kaalinta muhiimka ah ee uu kaga jiro nolosha xoola-dhaqatada reer-guuraaga ah:-

1. Aadan-carab Yuusuf
2. Askar Cali
3. Axmed Caynoosh
4. Ayjeex Cali-beenaley
5. Cabdi-Gahayr Warsame
6. Cabdi Aw Aadan
7. Cabdi Xirsi
8. Cabdi-Galayax
9. Cabdi Iidaan
10. Cabdullaahi Suldaan (Timacadde)
11. Cadde Samakaab
12. Cali Maxamed Faarax
13. Cali Maxamed Aadan
14. Cali Aadan (cali-dhuux)
15. Cali Xuseen Xirsi
16. Cali Cilmi (Afyare)
17. Cawad Faarax
18. Cilmi-carab
19. Cumar Xuseen (Isteelliye)
20. Ducaale - Fagaase
21. Guhaad Cabdi-Gahayr
22. Ismaaciil Mire
23. Ismaaciil Xeyd (Aflow)
24. Faarax Cali Gamuute
25. Jaamac Faarax Aadan
26. Khaliif Xareed Maxamuud
27. Maxamed Cali-beenaley
28. Maxamed Ismaaciil (Qaasim)
29. Maxamuud Cabdillaahi (singub)
30. Maxamed Gacal Xaayow
31. Qawdhan Ducaale
32. Sayid Maxamed Cabdulle
33. Samatar Baxnaan
34. Saalax-malaydiray
35. Saxardiid Maxamed
36. Xiirey Jaamac
37. Xaaji Aadan (Afqallooc)
38. Xaashi Cali (Indhoole)
39. Yuusuf Xaaji Aadan
40. Yuusuf Jaamac
41. Yuusuf Cabaade

TAARIIKH-NOLOLEEDKA MAANSOOLEYDA

Sida suugaanta soomaalidu aanay weli u urursanayn ayaanay taariikh nololeedka maansooleyduna u urursanayn. Waxa suurowda in maansoole la helo suugaan badan oo uu curiyey, laakin aan kii curiyey maansadaas laga haynin wax macluumaad ah oo noloshiisa ku saabsan.

Maansooleyda hoos ku qoran oo ka mid ah kuwa ugu caansan, waxaa lagu dadaalay in laga helo macluumaad run ah ama qiyaas runta u dhow. Waxaana tilmaan laga bixiyey dhalashadiisii, degaanka uu ku noolaa ama laga yiqiin, iyo maansadiisu waxa ay badanaa ku saabsaneyd. Dhammaantoodna, maansooyin ay leeyihiin ayaa meelo kala duwan oo qoraalkan ka mid ah lagu halqabsaday.

1. AADAN CARAB, dhashay bilowgii qarniga labaatanaad, degaankiisu yahay Nugaal iyo Doollo, tiriyeyna maanso badan oo ku lug leh qiimaha geelu leeyahay iyo rafaadka loo maro dhaqashadiisa.

2. ASKAR CALI, dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Woqooyi Galbeed, tiriyey maanso badan oo muujinaysa qiimaha weyn ee dhaqashada geelu u leeyahay nolosha xooladhaqatada reerguuraaga ah.

3. AXMED CAYNOOSH, dhashay qiyaastii bartamihii qarniga sagaal iyo tobnaad, degaankiisu ahaa gobollada Soomaali Galbeed, tiriyey maanso badan oo muujinaysa sida uu u jeclaa geela iyo nacfiga badan ee uu leeyahay.

4. AYJEEX CALI BEENALEY, dhashay qiyaastii bartamihii qarniga 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Soomaali Galbeed, tiriyey maanso badan oo ku lug leh dhaqashada geela.

5. CABDI-GAHAYR WARSAME, dhashay qiyaasti bartamihii qarniga 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Woqooyi-Galbeed, tiriyey maanso badan oo ku lug leh dhaqashada geela.

6. CABDI AW AADAN, dhashay qiyaastii bilowga qarnigan 20-aad, degaankiisu yahay Nugaal, tiriyeyna gabayo muujinaya sida weyn ee uu u jeclaa dhaqashada geela.

7. CABDI XIRSI, dhashay qiyaastii bartamihii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Soomaali Galbeed, tiriyeyna maanso muujinaysa qiimaha iyo qaayaha geelu leeyahay.

8. CABDI-GALAYAX, dhashay qiyaastii bilowgii qarniga 20-aad, degaankiisu yahay Gobollada Mudug iyo Galguduud, tiriyeyna maansooyin badan oo muujinaya sida weyn ee uu geela u jeclaa, waxtarka badan ee laga helo iyo dhibaha badan ee lagu muto dhaqashadiisa.

9. CABDI-IIDAAN, dhashay bilowgii qarniga 20-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Woqooyi Galbeed, tiriyey maanso badan oo gobannimada ku mataaleysa geela.

10. CABDILLAAHI SULDAAN (TIMACADDE), dhashay 1920-kii, dhintayna 1973-kii, degaankiisu ahaa Gobollada Woqooyi Galbeed, tiriyeyna maanso badan oo gobannimadoon ah, isaga oo xornimada ku metali jiray geel.

11. CADDE SAMAKAAB, dhashay qiyaastii bartamihii qarniga 19-aad, degaankiisu ahaa Nugaal, tiriyey maanso muujinaysa sida uu geela u jeclaa.

12. CALI MAXAMED FAARAX, dhashay qiyaastii bilowgii qarniga 20-aad, degaankiisu ahaa Nugaal, tiriyey gabayo muujinaya waxtarka bulsho iyo dhaqaale ee geelu leeyahay.

13. CALI MAXAMED AADAN, dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Hawd iyo Ciid, tiriyeyna gabayo ku lug leh dhaqashada geela iyo dhibka iyo dheefta uu leeyahay.

14. CALI AADAN (Cali-Dhuux), dhashay qiyaastii bartamihii qarnigii 19-aad, dhintay 1962-kii, degaankiisu ahaa Nugaal iyo Doollo, tiriyey maanso badan oo muujinaysa manaafacaadka geela iyo dhibaatada ku lammaan dhaqashadiisa.

15. CALI XUSEEN, dhashay 1913-kii, dhintay 1976-kii, degaankiisu ahaa Muqdisho, tiriyey maansooyin badan oo waddani ah, isaga oo xornimada ku meteli jiray tulud geel ah.

16. CALI CILMI AFYARE, dhashay qiyaastii bilowgii qarniga 20-aad, degaankiisu yahay Bari iyo Muqdisho, tiriyey maanso badan oo waddani ah oo uu xornnimada ku metaliyey geel dhaqashadii iyo manaafacaadkii.

17. CAWAD FAARAX, dhashay qiyaastii bilowgii qarniga 20-aad, degaankiisu yahay Hawd iyo Carrociideed, tiriyey maanso muujinaysa jeclaanta geela iyo dhaqashadiisa.

18. CILMI-CARAB, dhashay qiyaastii bartamihii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Nugaal, tiriyey maanso muujinaysa waxtarka bulsho iyo dhaqaale ee geela.

19. CUMAR XUSEEN, dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Woqooyi Galbeed, tiriyey maansooyin badan oo tilmaamaysa kaalinta weyn ee muhiimka ah ee dhaqashada geelu kaga jirto nolosha xooladhaqatada reerguuraaga ah ee Soomaaliyeed.

20. DUCAALE-FAGAASE, dhashay qiyaastii bartamihii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Hawd iyo Carro-ciideed, tiriyey maanso tilmaamaysa qiimaha geela iyo dhibka laga muto dhaqashadiisa.

21. GUHAAD CABDI-GAHAYR, dhashay qiyaastii bilowgii qarniga 20-aad, degaankiisu yahay Gobollada Woqooyi Galbeed, tiriyey maanso badan oo waddani ah oo uu Xornimada iyo dhaqashada geela isbarbar dhigayey.

22. ISMAACIIL MIRE, dhashay qiyaastii bartamihii qarnigii 19-aad, dhintay 1950-kii, degaankiisu ahaa Nugaal iyo Doollo, tiriyey maanso badan oo muujinaysa sida uu geela u jeclaa iyo dhibaatada lagala kulmo dhaqashada geela.

23. ISMAACIIL XEYD (Aflow), dhashay qiyaastii bartamihii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Woqooyi Galbeed, tiriyey gabayo muujinaya manaafacaadka geela.

24. FAARAX CALI GAMMUUTE, dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Doollo, tiriyey gabayo tilmaamaya jaceylka uu hayey lahaanshaha geela, dhibaatooyinka badan ee la xiriira dhaqashadiisa, iyo manaafacaadkiisa faraha badan.

25. JAAMAC FAARAX AADAN, dhashay qiyaastii bilowgii qarniga 20-aad, degaankiisu wuxuu ahaa Gobolka Togdheer, wuxuu tiriyey gabayo muujinaya geel jacaylka iyo dhibaatooyinka laga muto dhaqashada geela.

26. KHALIIF XAREED MAXAMUUD, dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii 19-aad degaankiisu ahaa Gobollada Soomaali Galbeed, tiriyey maanso muujinaysa geel jacaylka iyo manaafacaadkiisa badan.

27. MAXAMED ISMAACIIL (Qaasim), dhashay qiyaastii bilowgii qarniga labaatanaad, degaankiisu yahay, Gobollada Woqooyi Galbeed, tiriyey maanso badan oo waddani ah, isaga oo xornnimada ku metalaya geel dhaqashadii.

28. MAXAMED CALI BEENALEY, dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Soomaali Galbeed, tiriyey gabayo muujinaya geel jacaylka iyo dhaqashadiisa.

29. MAXAMUUD CABDULLAAHI "SANGUB", dhashay 1942, degaankiisu yahay Gobollada Soomaali Galbeed, tiriyey maanso badan oo waddani ah isaga oo xornimada ku metalaya ama barbardhigaya dhaqashada geela.

30. MAXAMED GACAL XAAYOW, dhashay 1940s, degaankiisu yahay Benaadir, tiriyey maanso badan oo waddani ah oo uu xornimada ku metalayey dhaqashada geela.

31. QAWDHAN DUCAALE, dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Woqooyi Galbeed, tiriyey maanso badan oo muujinaysa manaafacaadka geela iyo dhibka lagala kulmo dhaqashadiisa.

32. SAYID MAXAMED CABDULLE, dhashay qiyaastii bartamihii qarnigii 19-aad, dhintay 1920-kii, degaankiisu ahaa Nugaal iyo Doollo, ahaa abaabulihii iyo hoggaamiyihii Daraawiishta, tiriyey maanso badan oo uu ku muujinayey manaafacaadka geela iyo kaalinta muhiimka ah ee uu kaga jiro nolosha xooladhaqatada reerguuraaga ah ee Soomaaliyeed.

33. SAMATAR BAXNAAN, dhashay qiyaastii bilowgii qarniga 20-aad, degaankiisu yahay Nugaal iyo Doollo, tiriyey maanso badan oo muujinaya waxtarka geela iyo dhibaatooyinka lagala kulmo dhaqashadiisa.

34. SAALAX-MALAY-DIRAY, dhashay qiyaastii qartamihii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Sanaag, tiriyey maanso muujinaysa waxtarka bulshe iyo dhaqaale ee geelu xoolaha kale dheer yahay.

35. SAXARDIID MAXAMED, dhashay 1940$^{s}$, degaankiisu yahay Gobollada Woqooyi Galbeed, tiriyey heeso badan oo waddani ah oo uu xornimada ku metaalayey dhaqashada geela.

36. XIIREY JAAMAC, dhashay qiyaastii bartamihii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Nugaal iyo Doollo, tiriyey gabayo muujinaya lexjeclada geela.

37. XAAJI AADAN AXMED (Afqallooc), dhashay 1845-kii degaankiisu yahay Gobolka Sanaag, tiriyey maanso badan oo waddani ah, oo uu xornimada ku metaaley dhaqashada geela.

38. XAASHI CALI "INDHOOLE", dhashay qiyaastii bilowgii qarniga 20-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Soomaali Galbeed, tiriyey maanso uu ku muujinayey sida weyn ee uu geela u jeclaa iyo manaafacaadka badan ee uu leeyahay.

39. YUUSUF CABAADE, dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii 19-aad degaankiisu ahaa Gobollada Soomaali Galbeed, tiriyey maanso badan waxtarka geela iyo dhibaatada lagala kulmo dhaqashadiisa.

40. YUUSUF JAAMAC, dhashay qiyaastii dhammaadkii qarnigii 19-aad, degaankiisu ahaa Gobollada Soomaali Galbeed, tiriyey maanso muujinaysa waxtarka geela iyo adkaysiga uu dheeryahay xoolaha kale.

Qoraallada <u>Suugaaneed ee</u> la tixraacay


1. Axmed Cali Abokor i) <u>Maahmaahyo soomaaliyeed</u>
   Wasaaradda Waxbarashada, 1967, Muqdisho

   ii) <u>Gabayadii Cali-Dhuux</u>
   Wasaaradda Waxbarashada, 1968, Muqdisho

   iii) <u>Gabayadii Cabdi-Gahayr</u>
   Wasaaradda Waxbarashada, 1971, Muqdisho

   iv) <u>Maansadii Guba</u>
   Wasaaradda Waxbarashada, 1969, Muqdisho

   v) <u>Gabayadii Samatar Baxnaan</u>
   Wasaaradda Waxbarashada, 1972, Muqdisho

   vi) <u>Gabayadii Guhaad Cabdi-Gahayr</u>
   Wasaaradda Waxbarashada, 1971, Muqdisho

   vii) <u>Gabayadii Ismaaciil Mire</u>
   Wasaaradda Waxbarashada, 1968, Muqdisho

2. Axmed Faarax Cali i) <u>Ismaaciil Mire</u>
   Wasaaradda Waxbarashada, Akadeemiyada Dhaqanka, 1975, Muqdisho

   ii) <u>Mahadho furan & Salsal, awreed</u>
   Akadeemiyada Dhaqanka, 1975, Muqdisho

3. Axmed Cali Xuseen, <u>Maansadii Cali Xuseen</u>
   Akadeemiyada Cilmiga & Fanka, 1983, Muqdisho

4. Axmed Cabdi Haybe, <u>Diiwaanka Qammaan Bulxan</u>
   Akadeemiyada Cilmiga & Fanka, 1983, Muqdisho

5. Aadan Maxamed Isaaq i) <u>Adarta Geela</u>,
   Akadeemiyada Cilmiga & Fanka, 1983, Muqdisho

   ii) <u>Maahmaahyo Soomaaliyeed</u>
   Akadeemiyada Cilmiga & Fanka, 1984, Muqdisho

6. Aw Daahir Afqarshe, <u>Dood iyo Difaac</u>
   Akadeemiyada Dhaqanka, 1975, Muqdisho

7. Boobe Yuusuf Ducaale, <u>Maansadii Timacadde</u>
   Akadeemiyada Cilmiga iyo Fanka, 1984, Muqdisho

8. Cali Cilmi Afyare, <u>Maansadii Cali Cilmi</u>
   Akadeemiyada Cilmiga & Fanka, 1983, Muqdisho

9. Cali Maxamed Jaamac, <u>Gabayadii Cumar Xuseen</u>
   Akadeemiyada Cilmiga & Fanka, 1984, Muqdisho

10. Cabdulqaadir Xirsi Yamyam, <u>Gabayadii Cabdi Maxamed Magan</u>
    Akadeemiyada Dhaqanka, 1975, Muqdisho

11. Ciise Maxamed Siyaad, <u>Suugaanta Geela</u>
    Akadeemiyada Cilmiga & Fanka, 1984, Muqdisho

12. Faarax Abokor Kheyre, Diiwaankii Gabayada Afqallooc
Akadeemiyada Cilmiga & Fanka, 1982, Muqdisho

13. Maxamed Gacal Xaayow, Gabayadii Maxamed Gacal Xaayow
Akadeemiyada Dhaqanka, 1978, Muqdisho

14. Maxamed Axmed Liibaan, Maahmaahyo Soomaaliyeed
Akadeemiyada Cilmiga iyo Fanka, 1982, Muqdisho

15. Sheekh Jaamac Cumar Ciise, Diiwaanka Gabyadii Sayid Maxamed
Akadeemiyada Dhaqanka, 1974, Muqdisho

16. Xasan Cawad Duccale, Hees Cayaareed
Akadeemiyada Cilmiga & Fanka, 1984, Muqdisho

NORDISKA
AFRIKAINSTITUTET
1987-03-02
UPPSALA